# حصن المسلم

# Xisnul Muslimka

## Gaashaanka Muslimka

## من أذكار الكتاب والسنة

## Ducooyinka Quraanka iyo Sunnada


*Waxa Qoray:*

*Ka u baahan Ilaaha sarreeya:*

*Saciid binu Cali binu Wahaf Al-Qaxdaani*

*Waxa Tarjumay*

*Ka u baahan nxariista Ilaahay:*

*Abdulaziz Mohamed Oogle*

بسم الله الرحمن الرحيم

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabayaa,
Allahaasoo naxariista naxariista guud iyo
naxariista gaarka ah.

# HORDHAC

Mahaddu Ilaahbay u sugnaatay, isagaan u mahad celinaynaa, kaalmo iyo danbi dhaaf waydiisanaynaa, Ilaahay waxaan ka magan galaynaa sharka nafahayaga iyo xumaanta camaladayda. Kii Ilaahay hanuuniyo ma baadiyoobayo, kii uu baadiyeysiiyana ma hanuunayo, waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Allah mooyee, waana kalidii, cidna lama wadaagto cibaadadiisa, waxa kale oon qirayaa in Maxamadna yahay adoonkiisii iyo rasuulkiisii, nabad galyo iyo naxariis Ilaahay korkiisa ha yeelo isaga iyo saxaabadiisii iyo ku kasta oo ku raaca wanaaga ilaa maalinta Qayaame.

Kitaabkan waxaan kasoo gaabiyey kitaabkayga la dhaho (xuska iyo ducooyinka iyo cilaajka

ruqyada kitaabka iyo sunnada)[1] waxaan soo gaabiyey qaybtii ducooyinka, si uu unoqdo mid la qaadan karo xilliga safarada.

Waxaan soo gaabiyey murtida ducooyinka, sidoo kale waxaan tixraaciisa ku koobay hal masdar ama laba, kuwaasoo ku qoran kitaabka asalka ah. Qofkii raba inuu ogaado saxaabiga (soo wariyey ducada) ama tixraac dheeraada haku laabto kitaabka asalka ah.

Ilaaha sharafta leh waxaan ku waydiisanayaa magacyadiisa wanaagsan iyo sifooyinkiisa sarreeya inuu ka yeelo mid u gaar ah Ilaahay wajigiisa sharafta leh, iyo inuu igu anfaco noloshayda iyo dhimashadayda kadib iyo inuu ka faa'idaysto cidii akhrisata ama daabacda ama sabab u noqota inuu fido, Ilaahayna isagaa xumaan ka nasahan oo aan u talo saaranaynaa waanu awoodaa.

---

[1] الذكرُ والدعاءُ والعلاج بالرقي من الكتاب والسنة

Nabadgalyo korkiisa ha ahaato nabigeena Maxamad, ehelkiisii, saxaabadiisii iyo kuwa ku raacay wanaaga ilaa maalinta qayaamaha.

Qoraaga kitaabka.

Waxa la qoraya bishii Safar ee sanadkii 1409 hijriga.

# Fadliga Ducooyinka

**Ilaaaha korreeya wuxuu yiri:**

{ فَاذْكُرُونِي أَذْكُرْكُمْ وَاشْكُرُواْ لِي وَلاَ تَكْفُرُونِ }

{i xusa aan idin xusee iina mahad celiya oo ha gaaloobina}

{ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اذْكُرُوا اللَّهَ ذِكْراً كَثِيراً}

{Kuwa Ilaahay rumeeyow xusa Ilaahay xus badan}

{ وَالذَّاكِرِينَ اللَّهَ كَثِيراً وَالذَّاكِرَاتِ أَعَدَّ اللَّهُ لَهُم مَّغْفِرَةً وَأَجْراً عَظِيماً}

{iyo nimanka xusa Ilaahay in badan iyo gabdhaha xusa (Ilaahay) waxa Ilaahay u diyaariyey danbi dhaaf iyo abaalgud wayn}

{ وَاذْكُر رَّبَّكَ فِي نَفْسِكَ تَضَرُّعاً وَخِيفَةً وَدُونَ الْجَهْرِ مِنَ الْقَوْلِ بِالْغُدُوِّ وَالآصَالِ وَلاَ تَكُن مِّنَ الْغَافِلِينَ }

{Ku xus rabbigaaga naftaada adigoo khushuucsan oo cabsoonaya oo aan hadalku qaylo ahayn  galin hore iyo galin danbe hana kamid noqonin mooganayaasha (ilaaway xuska Ilaahay)}

**Nabiguna (ﷺ) wuxuu yiri:**

“tusaalaha qofka xusaya rabbigiisa iyo ka aan xusaynin rabbigii waa sida qof nool iyo mid dhinta”

**Nabiguna (ﷺ) wuxuu yiri:**
“ma idiin ka warramayaa camaladiina ka ugu khayrka badan, uguna daahirsan Allaha boqorka ah agtiisa, uguna darajo sarreeya, idiin kana khayr badan inaad bixisaan dahab iyo fidho, idiin kana khayr badan inaad la kulantaan cadawgiina oo aad dishaan ayaguna ay idin dilaan? Waxay dhaheen: haa. Wuxuu yiri: waa xuska Ilaahay.

**Nabiguna (ﷺ) wuxuu yiri:** Ilaaha korreeya ayaa leh:

“Anigu waxaan ahaaday adoonkaygu wuxuu iga malaysto, waxaan ahay la jirkiisa markuu i xusayo, haduu naftiisa igu xuso waxaan ku xusaa naftayda, haduu igu xuso jamaaco dhexdeedadana waxaan ku xusaa jamaaco ka

khayr badan, haduu iisoo dhowaado hal taako waxaan u dhowaadaa dhudhun, haduu dhudhun iisoo dhowaadana waxaan u dhowaada baac, haduu ii yimaado isagoo soconaya waxaan ugu tagaa guclayn (naxariista).

Cabdilaahi binu Busri Ilaahay haka raali ahaadee waxa laga wariyey in nin dhahay: rasuulkii Ilaahayow, shareecadii Islaamka ayaa igu fara batay ee ii sheeg arrin aan ku dhago. Wuxuu yiri: “Carrabkaagu yaanu ka tagin inuu ku qoyanaado xuska Ilaahay”

**Nabiguna (ﷺ) wuxuu yiri:**
“Qofkii akhriya xaraf kamida kitaabka Ilaahay wuxuu helayaa xasano, xasanaduna waa toban laab, ma odhanayo: alif laam miim waa xaraf balse alifku waa xaraf, laamkuna waa xaraf, miimkuna waa xaraf.”

Cuqbah binu Caamir waxa laga wariyey Ilaahay raali haka ahaadee inuu yiri: “rasuulkii Ilaahay (ﷺ) ayaa soo baxay anagoo Suffada joogna,

wuxuuna yiri: “midkiin ma jecelyahay inuu u kallaho (u jarmaado) maalin kasta Budxaan ama Caqiiq oo kasoo qaato laba halaad oo naaxay isagoon danbi galin, qoysna goynin? Waxaanu nidhi: rasuulkii Ilaahayow, waanu jecelnahay. Wuxuu yiri: midkiin miyaanu ku kallahayn xaga masaajidka oo aanu baranayn ama akhriyayn laba aayadood oo kamida kitaabka Ilaaha sharafta leh, taasaa ka khayr badan labada halaad, sadexna waxa ka khayr badan sadex, afarna waxa khayr badan afar, iyo tiradeeda oo geela. (tiro kasta oo geela waxa ka khayr badan aayadahaas).

**Nabiguna (ﷺ) wuxuu yiri:**

“Qofkii fadhiista meel oo aan ku xusin Ilaahay waxay ku noqonaysa xaga Ilaahay murugo, qofkii jiifsada meel la jiifsado oo aan ku xusin Ilaahay waxay ku noqonaysaa xaga Ilaahay murugo”

**Nabiguna (ﷺ) wuxuu yiri:**

“Qoom ma fadhiistaan meel (haday fadhiistanba) oo aanay ku xusin Ilaahay, oo ayna ku salliyin nabigooda, waxay ku noqonaysaa murugo, haduu doonana wuu ku cadaabi, haduu doonana wuu u dhaafaa”

**Nabiguna (ﷺ) wuxuu yiri:**

“Qoom majiro ka kacaya meel ay fadhiyeen oo aan ku xusin Ilaahay, waxay u kacayaan sida dameer bakhtiyey, waxayna ku noqon qoomamyo”

## 1) Ducada marka hurdada lagasoo kaco:

**-1 "الحَمْدُ لله الذِي أحْيَانا بَعْدَمَا أمَاتَنَا وإلَيْهِ النَشُور"**

“Ilaahbaa mahadda iska leh, na nooleeyey kadib markuu na dilay, xagiisaana loo noqonayaa

**-2 "الحَمْدُ لله الذِي عَافَانِي في جَسَدِي ورَدَّ عَلَيَّ رُوحِي، وأَذِنَ لي بِذِكْرِهِ"**

“Ilaahbaa mahadda iska leh kaasoo caafimaadsiiyey jidhkayga, iina soo celiyey ruuxdayda, iina ogolaaday xuskiisa”

**قال رسول الله صلى الله عليه وسلم " مَنْ تَعَارَ مِنَ اللَّيْل فقال حين يستيقظ :**

**-3 "لا إلَهَ إلاَّ الله وحْدَهُ لا شَرِيكَ لَهُ، لَهُ المُلْكُ ولَهُ الحَمْدُ وهُوَ على كلِّ شيءٍ قَدير، الحَمْدُ لله وسُبْحانَ الله ولا إله إلا الله والله أكبر ولا حَولَ ولا قُوةَ إلا بالله"**

***ثم قال: "اللَّهُمَّ اغْفِرْ لي"، أو دعى استُجيبَ لهُ، فإن توَضأَ وصَلّى قُبِلَتْ صَلاتُهُ.***

*Rasuulkii Ilaahay (ﷺ) wuxuu yiri: qofkii is roga habeenkii ee dhaha markuu soo kaco:*

"Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee, waana kalidii, cidna lama wadaagto cibaadadiisa, isaga ayay u sugunaatay boqortooyadu iyo mahadduba, wax walbana wuu awoodaa, Ilaahbaa mahadda iska leh, xumaana Allah ayaa ka nasahan, ilaah xaq lagu caabudana majiro isaga mooyee, Ilaahbaa wayn, xeelad iyo awoodna majirto aan ka ahayn ta Ilaahay"

kadibna dhaha: "Ilaahow ii danbi dhaaf, ama ducaysta waa laga aqbalaa, hadii uu waysaysto oo uu tukado waa laga aqbalaa salaadiisa"

4- { إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاخْتِلَافِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ لَآيَاتٍ لِأُولِي الْأَلْبَابِ ﴿١٩٠﴾ الَّذِينَ يَذْكُرُونَ اللَّـهَ قِيَامًا وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِهِمْ وَيَتَفَكَّرُونَ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ رَبَّنَا مَا خَلَقْتَ هَـٰذَا بَاطِلًا سُبْحَانَكَ فَقِنَا عَذَابَ النَّارِ ﴿١٩١﴾ رَبَّنَا إِنَّكَ مَنْ تُدْخِلِ النَّارَ فَقَدْ أَخْزَيْتَهُ ۖ وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ أَنْصَارٍ ﴿١٩٢﴾ رَبَّنَا إِنَّنَا سَمِعْنَا مُنَادِيًا يُنَادِي لِلْإِيمَانِ أَنْ آمِنُوا بِرَبِّكُمْ فَآمَنَّا ۚ رَبَّنَا فَاغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا وَكَفِّرْ

عَنَّا سَيِّئَاتِنَا وَتَوَفَّنَا مَعَ الْأَبْرَارِ ﴿١٩٣﴾ رَبَّنَا وَآتِنَا مَا وَعَدْتَنَا عَلَىٰ رُسُلِكَ وَلَا تُخْزِنَا يَوْمَ الْقِيَامَةِ ۗ إِنَّكَ لَا تُخْلِفُ الْمِيعَادَ ﴿١٩٤﴾فَاسْتَجَابَ لَهُمْ رَبُّهُمْ أَنِّي لَا أُضِيعُ عَمَلَ عَامِلٍ مِنْكُمْ مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أُنْثَىٰ ۖ بَعْضُكُمْ مِنْ بَعْضٍ ۖ فَالَّذِينَ هَاجَرُوا وَأُخْرِجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ وَأُوذُوا فِي سَبِيلِي وَقَاتَلُوا وَقُتِلُوا لَأُكَفِّرَنَّ عَنْهُمْ سَيِّئَاتِهِمْ وَلَأُدْخِلَنَّهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ثَوَابًا مِنْ عِنْدِ اللَّـهِ ۗ وَاللَّـهُ عِنْدَهُ حُسْنُ الثَّوَابِ ﴿١٩٥﴾ لَا يَغُرَّنَّكَ تَقَلُّبُ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي الْبِلَادِ ﴿١٩٦﴾ مَتَاعٌ قَلِيلٌ ثُمَّ مَأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ ۚ وَبِئْسَ الْمِهَادُ ﴿١٩٧﴾ لَـٰكِنِ الَّذِينَ اتَّقَوْا رَبَّهُمْ لَهُمْ جَنَّاتٌ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا نُزُلًا مِنْ عِنْدِ اللَّـهِ ۗوَمَا عِنْدَ اللَّـهِ خَيْرٌ لِلْأَبْرَارِ ﴿١٩٨﴾ وَإِنَّ مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ لَمَنْ يُؤْمِنُ بِاللَّـهِ وَمَا أُنْزِلَ إِلَيْكُمْ وَمَا أُنْزِلَ إِلَيْهِمْ خَاشِعِينَ لِلَّـهِ لَا يَشْتَرُونَ بِآيَاتِ اللَّـهِ ثَمَنًا قَلِيلًا ۗ أُولَـٰئِكَ لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ ۗ إِنَّ اللَّـهَ سَرِيعُ الْحِسَابِ ﴿١٩٩﴾ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اصْبِرُوا وَصَابِرُوا وَرَابِطُوا وَاتَّقُوا اللَّـهَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٢٠٠﴾}

{Run ahaantii abuurida samooyinka iyo dhulka iyo is daba marka habeenka iyo maalinta calaamooyin ayaa ugu sugan kuwa caqliga fayow leh ﴿190﴾ kuwa xusaya Ilaahay ayagoo taagan iyo ayagoo fadhiya iyo ayagoo jiifa ee ka fakaraya abuurida

samooyinka iyo dhulka (ayagoo leh) Rabbiyow umaad abuurin kuwan cayaar ee waad ka hufantahay xumaan iyo nuqsaanba ee naga badbaadi cadaabka naareed ﴿191﴾ Rabbiyow cidii aad galiso naarta waad dullaysay, daalimiintuna malaha cid u gargaaraysa ﴿192﴾ Rabbiyow waxaan maqalnay mid dhawaaqaya (nabiga) oo ku dhawaaqaya iimaanka (oo leh) rumeeya rabbigiin waanan rumaynay, rabbiyow noo dhaaf danbiyadayada nagana tirtir xumaanahayaga oo na oofso anagoo la jirna kuwa baariyiinta ah ﴿193﴾ Rabbiyow waxaad na siisaa wixii aad noogu ballan qaaday (carrabka) rusushaada hana na hoojinin maalinta qayaame, adiguna ma burisid ballantee ﴿194﴾ Wuu ka ajiibay rabbigood (ducadoodii) aniguna ma luminayo mid shaqaystay shaqadiisii oo idinka mida ha ahaado lab ama dhadigbee, badhkiinba badhka kale (kula walaala diinta) kuwii hijrooday ee lagasoo bixiyey guryahoodii ee lagu dhibay jidkayga ee dagaalamay ee la

dilay waan u dhaafayaa ayaga xumaanahoodii waanan galinayaa jannooyin ay soconayso hoosteeda wabiyoyaalkii, waana abaal marin katimid xaga Ilaahay, Ilaahay agtiisa ayay taala abaalmarinta fiican ﴾195﴿ Haku kadsoomin (nabiyow) gadgadoonka kuwa gaaloobay dhulka (ay u kala gooshayaan) ﴾196﴿ Waa dhaldhalaal yar kadibna hoygoodu waa jahannama, meel loo noqdana halkaasaa ugu xun ﴾197﴿ Hase ahaatee kuwa ka cabsada rabbigood waxa u sugnaanaya jannooyin ay soconayso hoosteeda wabiyoyaalkii ayagoo ku waaraya dhexdooda waana martiqaad xaga Ilaahay ka ahaaday, waxa Ilaahay agtiisa ah ayaana u khayr badan samo falayaasha ﴾198﴿ Qaar kamida ehelu kitaabka waxay rumaysanyihiin Ilaahay iyo wixii la idinku soo dajiyey (way islaameen) iyo wixii lagu soo dajiyey ayagoo u khushuucsan Ilaahay kumana iibsadaan aayadaha Ilaahay qiimo yar, kuwaasi waxay mudanayaan ajirkooda rabbigood agtiisa, Ilaahayna xisaabtiisu way dagdagtaa ﴾199﴿

Kuwa rumeeyey Ilaahayow, samra oo isa samirsiiya oo jihaada kana cabsada Ilaahay waxaad u dhowdihiin inaad liibaantaane ﴿200﴾}

### 2) Ducada xidhashada Dharka.

**5- مَنْ لَبِسَ ثَوْباً فقال: "الحَمْدُ لله الذِي كَساني هذا (الثوب) ورَزَقَنِيه مِنْ غَيْرِ حَوْلٍ مِنّي ولا قُوة"**

Cidii xidhata dhar ee dhahda: "Ilaahaybaa mahadda iska leh, allahaasoo noo xidhay tan (maradan) iguna arsaaqay anigoon lahayn xeelad iyo awood toona"

### 3) Ducada xidhashada dharka cusub.

**6- "اللَّهُمَّ لَكَ الحَمْدُ أَنْتَ كَسَوتَنِيه، أسْألك مِنْ خَيرِهِ وخَيْرَ ما صُنع لَهُ، وأعُوذُ بِكَ مِنْ شرِّه وشَرَّ ما صُنِعَ لَهُ "**

"Ilaahow adigaa mahaddu kuu sugnaatay, adigaa ii xidhay, waxaan ku waydiisanayaa khayrkeeda iyo khayrka loo sameeyey, waxaan kaa magan galayaa sharkeeda iyo sharka loo sameeyey"

## 4) Ducada qofkii gashta maro cusub.

-7 "إلبِسْ جَدِيداً وعِشْ حميداً ومُتْ شهيداً"

"Xidho wax cusub, noolow nolol la mahadiyey, dhimana adigoo shahiida"

-8 "تُبْلي ويَخْلِفُ الله تعالي"

"Way baaliyoobaysaa, Ilaaha sarreeya badal ka fiican haku siiyo"

## 5) Muxuu dhahayaa markuu bixinayo dharka?

-9 سِتْرُ ما بَيْنَ أعْيُن الجِنّ وَعَوْرَاتِ بَني آدَمَ إذا وَضَعَ أحدُهُمْ ثَوْبَهُ أنْ يقول: "بِسم الله"

Xijaabka u dhaxeeya indhaha jinka iyo cawrooyinka aadamaha markuu midkiin bixinayo dharkiisa waa inuu dhaho: "Bismillaah, magaca Allah ayaan ku bilaabay"

6) **Ducada galida suuliga ama musqusha.**

**-10 {بسم الله}، اللهُمَّ إنّي أعُوذُ بِكَ مِنَ الخُبْثِ والخبائِثِ"**

“Bismillaah” Ilaahow waxaan kaa magan galay shaydaanka kuwooda lab ee xun iyo kuwooda dhadig ee xun.

7) **Ducada markuu kasoo baxayo suuliga.**

**-11 "غُفْرانَكَ"**

“Ilaahow danbi dhaaf ayaan ku waydiisanay”

8) **Ducada waysada kahorreeya.**

**-12 "بسم الله"**

“Bismillaah”

9) **Ducooyinka marka waysada laga faaruqo.**

**-13 "أشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له ، وأشهد أن محمداً عبده ورسوله"**

“ Waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Ilaahay mooyee, waana kalidii, mana

jiro cid la shuraako ah, waxaan qirayaa in Maxamad yahay adoonkiisii iyo rasuulkiisii"

**14- "اللهم اجعلني من التوابين واجعلني من المتطهرين"**

"Ilaahow iga yeel kuwa toobada keena iyo kuwa is daahiriya"

**15- "سبحانك اللهم وبحمدك أشهد أن لا إله إلا أنت أستغفرك وأتوب إليك"**

"Xumaan adigaa ka nasahan Ilaahow adigayna mahaddu kuu sugantahay, waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin adiga mooyee, danbi dhaaf ayaan ku waydiistay waanan kuu toobad keenay"

## 10) Ducooyinka marka guriga laga baxayo.

**16- "بسم الله، توكَّلْتُ على الله، ولا حَوْلَ ولا قُوةَ إلا بالله "**

"Magaca Allah ayaan ku bilaabayaa, Ilaahbaan talo saartay, xeelad iyo awoodna mjirto aan ka ahayn ta Ilaahay"

**17- "اللهُمَ إني أعُوذُ بِكَ أن أَضِلَّ أوْ أُضَلَّ أَوْ أزِلَّ، أو أُزَلَّ، أوْ أظلِمِ أوْ أُظْلَم، أوْ أَجْهَلَ أوْ يُجْهَلَ عَلَيَّ"**

“Ilaahow waxaan kaa magan galayaa inaan baadiyoobo iyo in la i baadiyeysiiyo, inaan sinbiririxdo iyo in la i sinbiririxiyo, inaan wax dulmiyo iyo in la i dulmiyo, inaan jaahil noqda iyo in jaahil la iga dhigo”

## 11) Ducada marka guriga lasoo galayo.

18- **"بِسْمِ اللَّهِ وَلَجْنَا، وَبِسْمِ اللَّهِ خَرَجْنَا، وَعَلَى اللَّهِ رَبِّنَا تَوَكَّلْنَا، ثُمَّ لِيُسَلِّمْ عَلَى أَهْلِهِ"**

“Magaca Allah ayaan ku galaynaa, magaca Allah ayaan ku baxaynaa, rabbigeena waan talo saaranaynaa, kadibna reerkiisa ayuu salaamayaa”

## 12) Ducada marka lagu socdo masaajidka.

**19-اللَّهُمَّ اجْعَلْ فِي قَلْبِي نُوراً، وَفِي لِسَانِي نُوراً، وَفِي سَمْعِي نُوراً، وَفِي بَصَرِي نُوراً، وَمِنْ فَوْقِي نُوراً، وَمِنْ تَحْتِي نُوراً، وَعَنْ يَمِينِي نُوراً، وَعَنْ شِمَالِي نُوراً، وَمِنْ أَمَامِي نُوراً، وَمِنْ خَلْفِي نُوراً، وَاجْعَلْ فِي نَفْسِي نُوراً، وَأَعْظِمْ لِي نُوراً، وَعَظِّمْ لِي نُوراً، وَاجْعَلْ لِي نُوراً، وَاجْعَلْنِي نُوراً، اللَّهُمَّ أَعْطِنِي نُوراً، وَاجْعَلْ فِي عَصَبِي نُوراً، وَفِي لَحْمِي نُوراً، وَفِي دَمِي نُوراً، وَفِي شَعْرِي نُوراً، وَفِي بَشَرِي نُوراً" ”**

اللَّهُمَّ اجْعَلْ لِي نُوراً فِي قَبْرِي... وَنُوراً فِي عِظَامِي" "وَزِدْنِي نُوراً، وَزِدْنِي نُوراً، وَزِدْنِي نُوراً "وَهَبْ لِي نُوراً عَلَى نُورٍ"

"Ilaahow ka yeel qalbigayga nuur, carrabkaygana nuur, maqalakaygana nuur, kana yeel aragayga nuur, dushayda nuur, hoostaydana nuur, dhincayga midigna nuur, bidixdaydana nuur, hortayda nuur, dhabarkaygana nuur, naftaydana nuur, iina kori nuur, iina waynee nuur, iga yeel nuur, iga dhig nuur, Ilaahow isii nuur, kana yeel xididadayda nuur, hilibkaygana nuur, dhiigaygana nuur, timahaygana nuur, haragaygana nuur" "Ilaahow iiga yeel nuur xabaashayda… kana yeel nuur lafahayga" "iina siyaadi nuur, iina kordhi nuur" "iina hibee nuur ka sarreeya nuur"

## 13) Ducada galida masaajidka.

20- "يَبْدَأُ بِرِجْلِهِ الْيُمْنَى" ، وَيَقُولُ: "أَعُوذُ بِاللَّهِ العَظِيمِ، وَبِوَجْهِهِ الْكَرِيمِ، وَسُلْطَانِهِ الْقَدِيمِ، مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ" [بِسْمِ اللَّهِ، وَالصَّلَاةُ] [وَالسَّلَامُ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ] "اللَّهُمَّ افْتَحْ لِي أَبْوَابَ رَحْمَتِكَ"

"Wuxuu ku galayaa lugtiisa midig" wuxuuna dhahayaa: "Ilaaha wayn waxaan ka magan

galayaa, wajigiisa sharafta leh waxaan kaga magan galayaa, awoodiisa qadiimiga ah waxaan kaga magan galayaa shaydaan la fogeeyey" [Magaca Ilaahay ayaan ku galayaa, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato rasuulkii Ilaahay" "Ilaahow ii fur alabaabada naxariistaada"

## 14) Ducada ka bixida masaajidka.

**21- "يَبْدَأُ بِرِجْلِهِ الْيُسْرَى" وَيَقُولُ: "بِسْمِ اللَّهِ وَالصّلَاةُ وَالسَّلَامُ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ، اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ مِنْ فَضْلِك، اللَّهُمَّ اعْصِمْنِي مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ"**

"Wuxuu ku baxayaa lugta bidix" wuxuuna dhahayaa: "Magaca Allah ayaan ku baxaynaa, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato rasuulkii Ilaahay, Ilaahow waxaan ku waydiisanayaa deeqdaada, Ilaahow iga nabadgali shaydaanka la fogeeyey"

## 15) Ducooyinka Aadaanka

**22- يَقُولُ مِثْلَ مَا يَقُولُ المُؤَذِّنُ إِلاَّ فِي"حَيَّ عَلَى الصَّلَاةِ وَحَيَّ عَلَى الْفَلَاحِ" فيقول "لاَ حَوْلَ وَلاَ قُوَّةَ إِلاَّ بِاللَّهِ"**

Wuxuu dhahayaa: waxa mu'adinku akhrinayo marka laga reebo: "Xayya cala assalaah iyo

xayya calaa al-falaax” (u kaalaya salaada, u kaalaya liibaanta) wuxuuna dhahayaa: laa xawla walaa quwwata ilaa billaah (xeelad iyo awood majirto aan ka ahayn ta Ilaahay”

**23- يَقُولُ" وَأَنَا أَشْهَدُ أَنْ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ وَأَنَّ مُحَمَّداً عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ، رَضِيتُ بِاللَّهِ رَبَّاً، وَبِمُحَمَّدٍ رَسُولاً، وَبِالْإِسْلاَمِ دِيناً" "يَقُولُ ذَلِكَ عَقِبَ تَشَهُّدِ الْمُؤَذِّنِ"**

Wuxuu dhahayaa: “Aniguna waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Allah mooyee, waana kalidii mana laha shuraako, Maxamadna waa adoonkiisii iyo rasuulkiisii, Ilaahay ayaan raali uga noqday rabbinimo, Maxamadna rasuulnimo, islaamnimada diin ahaan” “Wuxuu akhrinayaa markuu ashahaato kadib”

**24- "يُصَلِّي عَلَى النَّبِيِّ صلى الله عليه وسلم بَعْدَ فَرَاغِهِ مِنْ إِجَابَةِ الْمُؤَذِّنِ"**

“Wuxuu ku sallinayaa nabiga (ﷺ) kadib markuu dhameeyo ka daba akhrinta mu’adinka.”

**25- "اللَّهُمَّ رَبَّ هَذِهِ الدَّعْوَةِ التَّامَّةِ، وَالصَّلاَةِ الْقَائِمَةِ، آتِ مُحَمَّداً الْوَسِيلَةَ وَالْفَضِيلَةَ، وَابْعَثْهُ مَقَاماً مَحمُوداً الَّذِي وَعَدْتَهُ، [ إِنَّكَ لاَ تُخْلِفُ الْمِيعَادَ]"**

“Ilaahayow, rabbiga iska leh yaboohan dhamayska tiranow iyo salaada taagan, waxaad

siisaa Maxamad darajada wasiilada iyo ta fadiilada, kanasoo bixi booskii la mahadiyey ee aad u ballan qaaday" [adiguna ma burisid ballantee]

**26- "يَدْعُو لِنَفسِهِ بَيْنَ الْأَذَانِ وَالْإِقَامَةِ فَإِنَّ الدُّعَاءَ حِينَئِذٍ لاَ يُرَدُّ"**

"Wuxuu u ducaynayaa naftiisa inta u dhaxaysa aadaanka iyo qiimista, maxaa yeelay ducada xilligan lama celiyo"

## 16) Ducooyinka Furfurashada (salaada).

**27- "اللَّهُمَّ بَاعِدْ بَيْنِي وَبَيْنَ خَطَايَايَ كَمَا بَاعَدْتَ بَيْنَ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ، اللَّهُمَّ نَقِّنِي مِنْ خَطَايَايَ كَمَا يُنَقَّى الثَّوْبُ الْأَبْيَضُ مِنَ الدَّنَسِ، اللَّهُمَّ اغْسِلْنِي مِنْ خَطَايَايَ، بِالثَّلْجِ وَالْماءِ وَالْبَرَدِ"**

"Ilaahow kala fogee aniga iyo danbiyadayda sidaad ukala fogaysay bari iyo galbeed, Ilaahow iga nadiifi qaladaadkayga sida marada cad looga nadiifiyo wasakhda, Ilaahow ku dhaq qaladaadkayga baraf, biyo iyo qabow"

**28- "سُبْحانَكَ اللَّهُمَّ وَبِحَمْدِكَ، وَتَبارَكَ اسْمُكَ، وَتَعَالَى جَدُّكَ، وَلاَ إِلَهَ غَيْرُكَ"**

"Xumaan adigaa ka nasahan Ilaahayow, mahaddana adigaa iska leh, magacaaguna wuu

barkaysanyahay, sharaftaaduna way korraysaa, Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee”

**29- "وَجَّهْتُ وَجْهِيَ لِلَّذِي فَطَرَ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضَ حَنِيفاً وَمَا أَنَا مِنَ الْمُشْرِكِينَ، إِنَّ صَلاَتِي، وَنُسُكِي، وَمَحْيَايَ، وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ، لاَ شَرِيكَ لَهُ وَبِذَلِكَ أُمِرْتُ وَأَنَا مِنَ الْمُسْلِمِينَ. اللَّهُمَّ أَنْتَ المَلِكُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ، أَنْتَ رَبِّي وَأَنَا عَبْدُكَ، ظَلَمْتُ نَفْسِي وَاعْتَرَفْتُ بِذَنْبِي فَاغْفِرْ لِي ذُنُوبِي جَمِيعَاً إِنَّهُ لاَ يَغْفِرُ الذُّنوبَ إِلاَّ أَنْتَ. وَاهْدِنِي لِأَحْسَنِ الأَخْلاقِ لاَ يَهْدِي لِأَحْسَنِها إِلاَّ أَنْتَ، وَاصْرِفْ عَنِّي سَيِّئَهَا، لاَ يَصْرِفُ عَنِّي سَيِّئَهَا إِلاَّ أَنْتَ، لَبَّيْكَ وَسَعْدَيْكَ، وَالخَيْرُ كُلُّهُ بِيَـــــدَيْكَ، وَالشَّـــرُّ لَيْسَ إِلَيْـــكَ، أَنَا بِكَ وَإِلَيْكَ، تَبارَكْتَ وَتَعَالَيْتَ، أَسْتَغْفِرُكَ وَأَتوبُ إِلَيْكَ"**

“Wajigayga waxaan u jiheeyey kii abuuray samooyinka iyo dhulka anigoo kasoo leexday gaalnimo unasoo leexday islaamnimo, kamana mid ahi mushrikiinta, salaadayda, cibaadadayda, noloshayda iyo dhimashadayduba waxay u sugnaadeen Ilaahay oo ah rabbiga caalamiinta, mana laha shuraako la wadaagta cibaadadiisa, sidaasbaana la i faray, aniguna muslimiinta ayaan kamid ahay. Ilaahow adigaa ah boqorka, Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee, adigaa ah rabbigay, aniguna adoonkaagiibaan ahay, naftaydaan dulmiyey, danbigaygiina waan qirtay, ee ii dhaaf dunuubtayda dhamaantood,

maxaa yeelay cid danbi dhaafta majirto adiga mooyee, iguna hanuuni akhlaaqda wanaagsan, kumana hanuuniyo ta wanaagsan adiga mooyee, igana fogee teeda xun, mana iga fogayn karo teeda xun adiga mooyee, waan ku ajiibay oon ku ajiibay, khayrkuna gacantaadu ku jiraa, sharkuna kamuu iman xagaaga, aniga adigaa i waafajiyey, xagaagan usoo noqonayaa, waad barako badantahay, waanad sarraysaa, danbi dhaaf ayaan ku waydiistay waanan kuu toobad keenay"

**30- "اللَّهُمَّ رَبَّ جِبْرَائِيلَ، وَمِيْكَائِيلَ، وَإِسْرَافِيلَ، فَاطِرَ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضِ، عَالِمَ الغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ أَنْتَ تَحْكُمُ بَيْنَ عِبَادِكَ فِيمَا كَانُوا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ. اهْدِنِي لِمَا اخْتُلِفَ فِيهِ مِنَ الْحَقِّ بِإِذْنِكَ إِنَّكَ تَهْدِي مَنْ تَشَاءُ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ"**

"Ilaahow, rabbiga Jibriil, Miikaa'iil iyo Israafiilow, ka abuuray samooyinka iyo dhulkow, ka og waxa maqan iyo waxa joogow, adigaa kala xukumi adoomadaada wixii ay isku khilaafeen, igu hanuuni xaqa waxay isku khilaafeen ogoloshaanhaaga darteed, adigaa ku hanuuniya jidka toosan cidaad doonto"

31- "اللّهُ أَكْبَرُ كَبِيراً، اللّهُ أَكْبَرُ كَبِيراً، اللّهُ أَكْبَرُ كَبِيراً، وَالْحَمْدُ لِلّهِ كَثيراً، وَالْحَمْدُ لِلّهِ كَثيراً، وَالْحَمْدُ لِلّهِ كَثيراً، وَسُبْحَانَ اللّهِ بُكْرَةً وَأَصِيلاً" ثَلاثاً "أَعُوذُ بِاللّهِ مِنَ الشَّيْطَانِ: مِنْ نَفْخِهِ، وَنَفْثِهِ، وَهَمْزِهِ"

"Ilaahbaa wayn oo wayn, Ilaahbaa wayn oo wayn, Ilaahbaa wayn oo wayn, mahad badana waxay u sugnaatay Ilaahay, mahad badana Ilaahbay u sugantahay, mahad badana Ilaahbay u sugantahay, xumaan iyo nuqsaana waad ka hufantahay galin hore iyo galin danbeba" sadex jeer (ayaa la akhrinayaa) "Ilaahbaan ka magangalay shaydaanka la fogeeyey, kibirkiisa, gabaygiisa iyo suuxidiisa"

32- " اللَّهُمَّ لَكَ الْحَمْدُ، أَنْتَ نُورُ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضِ وَمَنْ فِيهِنَّ، وَلَكَ الْحَمْدُ أَنْتَ قَيِّمُ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضِ وَمَنْ فِيهِنَّ،"[وَلَكَ الْحَمْدُ أَنْتَ رَبُّ السَّمَواتِ وَالأَرْضِ وَمَنْ فِيهِنَّ" "[وَلَكَ الْحَمْدُ لَكَ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضِ وَمَنْ فِيهِنَّ" "وَلَكَ الْحَمْدُ أَنْتَ مَلِكُ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضِ" "وَلَكَ الْحَمْدُ" "أَنْتَ الْحَقُّ، وَوَعْدُكَ الْحَقُّ، وَقَوْلُكَ الْحَقُّ، وَلِقاؤُكَ الْحَقُّ، وَالْجَنَّةُ حَقٌّ، وَالنَّارُ حَقٌّ، وَالنَّبِيُّونَ حَقٌّ، وَمحَمَّدٌ صلى الله عليه وسلم حَقٌّ، وَالسّاعَةُ حَقٌّ" اللَّهُمَّ لَكَ أَسْلَمتُ، وَعَلَيْكَ تَوَكَّلْتُ، وَبِكَ آمَنْتُ، وَإِلَيْكَ أَنَبْتُ، وَبِكَ خاصَمْتُ، وَإِلَيْكَ حاكَمْتُ. فَاغْفِرْ لِي مَا قَدَّمْتُ، وَمَا أَخَّرْتُ، وَمَا أَسْرَرْتُ، وَمَا أَعْلَنْتُ" "وَمَا أَنْتَ أَعْلَمُ بِهِ مِنِّي" أَنْتَ المُقَدِّمُ، وَأَنْتَ المُؤَخِّرُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ" "أَنْتَ إِلَهِي لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ" "وَلاَ حَوْلَ وَلاَ قُوَّةَ إِلاَّ بِاللّهِ"

“Ilaahow adigaa mahadda iska leh, aidgaa ah ka nuuriya samooyinka iyo dhulkaba iyo inta u dhaxaysaba, adigaa mahadda iska leh, adigaa ah maamulaha samooyinka, dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, adigaa mahadda iska leh, adigaa ah rabbiga samooyinka, dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, adigaa mahadda iska leh, adigaa iska leh samooyinka, dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, adigaa mahadda iska leh, adigaa ah boqorka samooyinka, dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, adigaa mahadda iska leh, adigaa ah xaqa, ballantaaduna waa xaq, qawlkaaguna waa xaq, la kulankaaguna waa xaq, jannaduna waa xaq, naartuna waa xaq, nabiyaduna waa xaq, Maxamadna (ﷺ) waa xaq, saacaduna waa xaq” “Ilaahow adigaan isu kaa dhiibay, adigaan ku talo saartay, adigaan ku rumeeyey, adigaan kuusoo noqday, daraadaa ayaan u dooday, xagaagan u xukuntamay, ee ii dhaaf wixii aan hormarsaday, dib dhigtay, qarsaday, muujistay, adigaa ah ka wax hormariya iyo ka dibmariya, Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee, adigaa ah Ilaahayga, Ilaah xaq lagu caabudo

majiro adiga mooyee,” “xeelad iyo awoodna majirto marka laga reebo taada mooyee”

## 17) Ducooyinka Rukuucda.

**33- " سُبْحانَ رَبِّيَ الْعَظِيمِ" ثلاث مرَّاتٍ**

“Xumaan waxa ka nasahan rabbigayga wayn” Sadex jeer ayuu ku celceinayaa.

**34- " سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ رَبَّنَا وَبِحَمْدِكَ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي"**

“Xumaan adigaa ka nasahan Ilaahayow, rabbiyow waad mahadsantahay, Ilaahow ii danbi dhaaf”

**35- " سُبُّوُحٌ، قُدُّوسٌ، رَبُّ المَلاَئِكَةِ وَالرُّوحِ"**

“Xumaan Alle ayaa ka nasahan, waana daahir, waana rabbiga malaa’ikta iyo malaku Jibriil”

**36- " اللَّهُمَّ لَكَ رَكَعْتُ، وَبِكَ آمَنْتُ، وَلَكَ أَسْلَمْتُ، خَشَعَ لَكَ سَمْعِي، وَبَصَرِي، وَمُخِّي، وَعَــظْمِي، وَعَصَبِي" "وَمَا استَقَلَّتْ بِهِ قَدَمِي"**

“Ilaahow adigaan kuu rukuucay, adiga dartaa ayaan u rumeeyey, adigaan kuu hogaansamay, waxa kuu khushuucay maqalkaygii, aragaygii, dhiigaygii, hilibkaygiii, lafahaygii, xididadaydii iyo waxa cagahaygu ay sidaan”

**37- سُبْحَانَ ذِي الْجَبَرُوتِ، وَالْمَلَكُوتِ، وَالْكِبْرِيَاءِ، وَالْعَظَمَةِ"**

"Xumaan waxa ka nasahan Allaha awooda badan, boqortooyada iska leh, kibirka iyo wayniduna u sugnaatay"

## 18) Ducada rukuucda marka lagasoo kaco.

**38- " سَمِعَ اللَّهُ لِمَنْ حَمِدَهُ"**

"Ilaahay wuu ajiibay cidii u mahadcelisa"

**39- " رَبَّنَا وَلَكَ الْحَمْدُ، حَمْداً كَثيراً طَيِّباً مُبارَكاً فِيهِ"**

"Rabbiyow adigaa mahadda iska leh, mahaddaas oo badan, wanaagsan oo barkaysan"

**40- " مِلْءَ السَّمَوَاتِ وَمِلْءَ الأَرْضِ، وَمَا بَيْنَهُمَا، وَمِلْءَ مَا شِئْتَ مِنْ شَيءٍ بَعْدُ. أَهلَ الثَّناءِ وَالْمَجْدِ، أَحَقُّ مَا قَالَ الْعَبْدُ، وَكُلُّنَا لَكَ عَبْدٌ. اللَّهُمَّ لاَ مَانِعَ لِمَا أَعْطَيْتَ، وَلاَ مُعْطِيَ لِمَا مَنَعْتَ، وَلاَ يَنْفَعُ ذَا الجَدِّ مِنْكَ الجَدُّ"**

"(mahadaas oo) la eeg muga samooyinka iyo muga dhulka iyo inta u dhaxaysaba, iyo muga wixii aad doonto ee intaa ka danbeeya, ehelbaad u tahay amaan iyo waynayn, waxa ugu mudan wax adoon dhaho, anagoo dhana adoon baan kuu nahaye, Rabbiyow, ma jiro cid diidi karta waxaad bixiso, mana jiro cid bixin karta waxaad

diido, waxna kama tarto agtaada ka sharafta leh sharaftiisu”

## 19) Ducooyinka Sujuuda.

**41- " سُبْحَانَ رَبِّيَ الأَعْلَى" ، ثلاث مرَّاتٍ.**

“Xumaan waxa ka nasahan rabbigayga sarreeya” Sadex jeer ayuu dhahayaa.

**42- "سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ رَبَّنَا وَبِحَمْدِكَ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي"**

“Xumaan adigaa ka nasahan Ilaahayow, rabbiyow adigaa mahadda iska leh, Ilaahow danbigayga ii dhaaf”

**43- " سُبوحٌ، قُدُّوسٌ، رَبُّ الْمَلَائِكَةِ وَالرُّوحِ"**

“Xumaan Alle ayaa ka nasahan, waana daahir, waana rabbiga malaa’ikta iyo malaku Jibriil”

**44- " اللَّهُمَّ لَكَ سَجَدْتُ وَبِكَ آمَنْتُ، وَلَكَ أَسْلَمْتُ، سَجَدَ وَجْهِيَ لِلَّذِي خَلَقَهُ، وَصَوَّرَهُ، وَشَقَّ سَمْعَهُ وَبَصَرَهُ، تَبَارَكَ اللَّهُ أَحْسنُ الْخَالِقِينَ"**

“Ilaahow adigaan kuu sujuuday, adiga dartaa ayaan u rumeeyey, adigaan kuu hogaansamay, wajigaygii wuxuu u sujuuday kii abuurtay ee sawirtay ee u dalooliyey maqalkiisa iyo aragiisa, Ilaahbaa barako badan, oo ah ku wax abuura ka ugu fiican”

**45- سُبْحَانَ ذِي الْجَبَرُوتِ، وَالْمَلَكُوتِ، وَالْكِبْرِيَاءِ، وَالْعَظَمَةِ"**

"Xumaan waxa ka nasahan allaha awooda badan, boqortooyada iska leh, kibirka iyo wayniduna u sugnaatay"

**46- اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي كُلَّهُ: دِقَّهُ وَجِلَّهُ، وَأَوَّلَهُ وَآخِرَهُ، وَعَلاَنِيَّتَهُ وَسِرَّهُ "**

"Ilaahow ii dhaaf danbigaaga dhamaantiis, kiisa yar iyo kiisa wayn, kii horreeyey iyo kii danbeeyey, kiisii muuqday iyo kii qarsoonaaba"

**47- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِرِضَاكَ مِنْ سَخَطِكَ، وَبِمُعَافَاتِكَ مِنْ عُقوبَتِكَ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْكَ، لاَ أُحْصِي ثَنَاءً عَلَيْكَ، أَنْتَ كَمَا أَثْنَيْتَ عَلَى نَفْسِكَ"**

"Ilaahow raali ahaanshahaaga waxaan kaga magan galayaa cadhadaada, cafiskaagan ciqaabtaada, adigaan kaa magan galayaa (ciqaabkaaga), ma koobi karo amaantaada, adigu waxaad tahay sidaad ku amaantay naftaada"

## 20) Ducada fadhiga labada sujuudood u dhaxeeya

**48- " رَبِّ اغْفِرْ لِي، رَبِّ اغْفِرْ لِي"**

“Rabbiyow danbigayga ii dhaaf, Rabbiyow danbigayga ii dhaaf”

**49- " اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي، وَارْحَمْنِي، وَاهْدِنِي، وَاجْبُرْنِي، وَعَافِنِي، وَارْزُقْنِي، وَارْفَعْنِي"**

“Ilaahow danbigayga ii dhaaf, iina naxariiso, ina hanuuni, ina taageer, ina cafi, ina arsaaq, sarena ii qaad”

## 21) Ducada sujuuda Quraanka

**50- " سَجَدَ وَجْهِيَ لِلَّذِي خَلَقَهُ، وَشَقَّ سَمْعَهُ وَبَصَرَهُ بِحَوْلِهِ وَقُوَّتِهِ، ﴿فَتَبَارَكَ اللَّهُ أَحْسَنُ الْخَالِقِينَ﴾"**

“Wajigaygu wuxuu u sujuuday kii abuuray, ee dalooliyey maqalkiisa iyo aragiisa, xeeladiisa iyo awoodiisa darteed, (waxa barako badan Ilaahay oo ah ku wax ka ugu fiican)”

**51- " اللَّهُمَّ اكْتُبْ لِي بِهَا عِنْدَكَ أَجْراً، وَضَعْ عَنِّي بِهَا وِزْراً، وَاجْعَلْهَا لِي عِنْدَكَ ذُخْراً، وَتَقَبَّلْهَا مِنِّي كَمَا تَقَبَّلْتَهَا مِنْ عَبْدِكَ دَاوُدَ"**

“Ilaahow agtaada iigu qor ajir, danbina agtaada igaga tirtir, kana yeel agtaada mid iigu kaydsan,

igana aqbal sidii aad uga aqbashay adoonkaagii Daa'uud"

### 22) Atixiyaadka.

**52- "التَّحِيَّاتُ لِلَّهِ، وَالصَّلَوَاتُ، وَالطَّيِّبَاتُ، السَّلاَمُ عَلَيْكَ أَيُّهَا النَّبِيُّ وَرَحْمَةُ اللَّهِ وَبَرَكَاتُهُ، السَّلاَمُ عَلَيْنَا وَعَلَى عِبَادِ اللَّهِ الصَّالِحِينَ. أَشْهَدُ أَنْ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّداً عَبْدُهُ وَرَسولُهُ"**

"Salaamo, naxariis iyo wanaagyaal Ilaahbay u sugnaadeen, Salaan korkaaga ha ahaato nabiyahow iyo naxariista Ilaahay iyo barakadiisuba. Nabadgalyo korkeena ha ahaato iyo adoomada Ilaahay ee wanaagsan, waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Ilaahay mooyee, waxaan kale oon qirayaa in Maxamadna yahay adoonkiisa iyo Rasuulkiisa."

### 23) Salliga nabiga (ﷺ) ee ka danbeeya Atixiyaadka.

**53- اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ، وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ، كَمَا صَلَّيتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ، وَعَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ، إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ، اللَّهُمَّ بَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ، كَمَا بَارَكْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَعَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ، إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ"**

“Ilaahow u naxariiso muxammad iyo reer muxammad, sidaad ugu naxariisatay Ibraahiim iyo reer ibraahiim, adigu waxaad tahay (Rabbiyow) mid la mahadiyo oo sharaf badane, Ilaahow barakee Maxamad iyo reer Maxamad sidaad u barakaysay Ibraahiim iyo reer Ibraahiim adigu waxaad tahay Ilaahayow mahad badane sharaf leh”.

**54. " اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى أَزْوَاجِهِ وَذُرِّيَّتِهِ، كَمَا صَلَّيْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ. وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى أَزْواجِهِ وَذُرِّيَّتِهِ، كَمَا بَارَكْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ. إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ "**

“Ilaahow u naxariiso Maxamad iyo xaasaskiisii iyo ubadkiisii, sidaad ugu naxariisatay reer Ibraahim, (Ilaahow) barakee Maxamad iyo dumarkiisii iyo ubadkiisii sidaad u barakaysay reer Ibraahim, adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan.”

## 24) Ducooyinka ka danbeeya Atixiyaadka, kahor intaan la salaamo naqsanin.

**55- " اللَّهُــمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ، وَمِنْ عَذَابِ جَهَنَّمَ، وَمِنْ فِتْنَةِ الْمَحْيَا وَالْمَمَاتِ، وَمِنْ شَرِّ فِتْنَةِ الْمَسِيحِ الدَّجَّالِ "**

"Ilaahow anigu waxaan kaa magan galayaa cadaabka qabriga iyo cadaabka naarta jahannama iyo fitnada nolosha iyo ta geerida iyo sharka fitnada Masiixa Dajaalka (dajaal cawar)"

**56- " اللَّهُمَّ إِنِّي أعوذُ بِكَ مِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ، وَأَعوذُ بِكَ مِنْ فِتْنَةِ الْمَسِيحِ الدَّجَّالِ، وَأَعوذُ بِكَ مِنْ فِتْنَةِ الْمَحْيَا وَالْمَمَاتِ. اللَّهُمَّ إِنِّي أَعوذُ بِكَ مِنَ الْمَأْثَمِ وَالْمَغْرَمِ "**

"Ilaahow waxaan kaa magan galayaa cadaabka qabriga, waxaaan kaa magan galayaa fitnada Masiixa Dajaalka, waxaan kaa magan galayaa fitnada nolosha iyo dhimashada, Ilaahow waxaan kaa magan galaya dambiga iyo qaanta (daynta)"

**57- " اللَّهُمَّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي ظُلْماً كَثِيراً، وَلاَ يَغْفِرُ الذُّنوبَ إِلاَّ أَنْتَ، فَاغْفِرْ لِي مَغْفِرَةً مِنْ عِنْدِكَ وَارْحَمْنِي، إِنَّكَ أَنْتَ الغَفورُ الرَّحيمُ "**

"Ilaahow, anigu waxaan dulmiyey naftayda dulmi badan, mana dhaafo dambiyada adiga mooyee ee ii dhaaf dambi dhaafid agtaada ah iina

naxariiso, adigu waxaad tahay dambi dhaafe naxariis badane”

**58- " اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي مَا قَدَّمْتُ، وَمَا أَخَّرْتُ، وَمَا أَسْرَرْتُ، وَمَا أَعْلَنْتُ، وَمَا أَسْرَفْتُ، وَمَا أَنْتَ أَعْلَمُ بِهِ مِنِّي. أَنْتَ الْمُقَدِّمُ، وَأَنْتَ الْمُؤَخِّرُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ "**

“Ilaahayow ii danbi dhaaf waxaan hor marsaday, waxaan dib dhigtay, waxaan qarsaday iyo waxaan muujistay iyo waxaan ku xadgudbay iyo waxaad adigu igu ogtahay, adigaa wax hormariya waxna dib u dhiga, ilaah xaq lagu caabudana ma jiro adiga mooyee.”

**59- " اللَّهُمَّ أَعِنِّي عَلَى ذِكْرِكَ، وَشُكْرِكَ، وَحُسْنِ عِبادَتِكَ "**

“Ilaahayow, igu kaalmee inaan ku xuso iyo inaan kuu mahad naqo iyo inaan hagaajiyo cibaadadaada.”

**60- اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْبُخْلِ، وَأَعوذُ بِكَ مِنَ الْجُبْنِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ أَنْ أُرَدَّ إِلَى أَرْذَلِ الْعُمُرِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ فِتْنَةِ الدُّنْيَا وَعَذَابِ الْقَبْرِ "**

“Ilaahow waxaan kaa magan galayaa bakhaylnimo iyo fulaynimo, waxaan kale oon kaa magan galayaa in la ii celiyo da’da teeda xun (asaasaq), waxaan kaa magan galayaa fitnada aduunyada iyo cadaabka qabriga.”

**61- اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ الْجَنَّةَ وَأَعُوذُ بِكَ مِنَ النَّارِ "**

"Ilaahayow waxaan ku waydiisanayaa Jannada, waxaanan kaa magan galayaa cadaabka Naareed."

**62- " اللَّهُمَّ بِعِلْمِكَ الغَيْبَ وَقُدْرَتِكَ عَلَى الْخَلقِ أَحْيِنِي مَا عَلِمْتَ الْحَيَاةَ خَيْراً لِي، وَتَوَفَّنِي إِذَا عَلِمْتَ الْوَفَاةَ خَيْراً لِي، اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَشْيَتَكَ فِي الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ، وَأَسْأَلُكَ كَلِمَةَ الْحَقِّ فِي الرِّضَا وَالْغَضَبِ، وَأَسْأَلُكَ الْقَصْدَ فِي الْغِنَى وَالْفَقْرِ، وَأَسْأَلُكَ نَعِيماً لاَ يَنْفَدُ، وَأَسْأَلُكَ قُرَّةَ عَيْنٍ لاَ تَنْقَطِعُ، وَأَسْأَلُكَ الرِّضَا بَعْدَ الْقَضَاءِ، وَأَسْـــأَلُكَ بَرْدَ الْعَيْشِ بَعْدَ الْمَوْتِ، وَأَسْأَلُكَ لَذَّةَ النَّظَرِ إِلَى وَجْهِكَ، وَالشَّوْقَ إِلَى لِقَائِكَ فِي غَيرِ ضَرَّاءَ مُضِرَّةٍ، وَلاَ فِتْنَةٍ مُضِلَّةٍ، اللَّهُمَّ زَيِّنَا بِزِينَةِ الإِيمَانِ، وَاجْعَلْنَا هُدَاةً مُهْتَدِينَ "**

"Ilaahayow ogaanshaha aad ogtahay qaybka awgeed iyo awoodaada aad ku leedahay noolaha korkooda, inoolee inta aad ogtahay in noloshu kheyr ii tahay, ina oofso inta aad ogtahay in geeridu khayr ii tahay. Ilaahow anigu waxaan ku weydiisanayaa cabsidaada marka la iga maqan yahay iyo marka la ila joogaba. Waxaan ku waydiisanayaa erayga runta ah xilliga raalinimada iyo xilliga xanaaqa, waxaan ku waydiisanayaa dhexdhexaadka hodantinimada iyo saboolnimadaba, waxaan ku waydiisanayaa

nicmo aan dhamaanayn, waxaan ku waydiisanayaa indha-doogsi aan go’ayn, waxaaa ku waydiisanayaa raalinimo qadarka kadib, waxaan ku waydiisanayaa nolol qabow geerida kadib, waxaan ku waydiisanayaa macaanka eegidda wajigaaga iyo xiisaha la kulankaaga, dhib la’aan aan wax dhibaynin, iyo fitno la-aan aan wax luminayn, Ilaahow nagu qurxi quruxda iimaanka, nagana yeel kuwo wax hanuuniya oo hanuunsan.”

**63- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ يَا أَللَّهُ بِأَنَّكَ الْوَاحِدُ الْأَحَدُ الصَّمَدُ الَّذِي لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يولَدْ، وَلَمْ يَكنْ لَهُ كُفُواً أَحَدٌ، أَنْ تَغْفِرَ لِي ذُنُوبِي إِنَّكَ أَنْتَ الْغَفُورُ الرَّحِّي "**

“Ilaahow waxaan ku waydiisanayaa, Ilaahayow maadama aad adigu tahay (Ilaaha) kalida ah, ee aan cidi ku lamaanayn, sayidka deeqtoona ah, adiguna wax maad dhalin lagumana dhalin, cid kula mid ahna aanay jirin, ee ii dhaaf danbigayga, waxaad tahay (adigu) danbi dhaaf badane naxariista”

**64- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ بِأَنَّ لَكَ الْحَمْدَ لَا إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ وَحْدَكَ لاَ شَرِيكَ لَكَ، الْمَنَّانُ، يَا بَدِيعَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ يَا ذَا الْجَلاَلِ وَالْإِكْرَامِ، يَا حَيُّ يَا قَيُّومُ إِنِّي أَسْأَلُكَ الْجَنَّةَ وَأَعُوذُ بِكَ مِنَ النَّارِ "**

“Ilaahow, anigu waxaan ku waydiisanayaa adigoo ay kuu sugnaatay mahaddu, uusan jirin ilaah xaq lagu caabudo adiga mooyee, kalina aad tahay, oo aanay jirin cid wax kula wadaagta , gallad badane ayaad tahay, kii abuuray samooyinka iyo dhulkow, kii u saaxiibka ahaa weynaanta, wanaaga iyo deeqsinimadaw, Ilaaha nool ee maamula wax walbow, waxaan ku waydiisanayaa jannada, waxaan kaa magan galayaa naarta.”

**65-" اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ بِأَنِّي أَشْهَدُ أَنَّكَ أَنْتَ اللَّهُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ الْأَحَدُ الصَّمَدُ الَّذِي لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ وَلَمْ يَكُنْ لَهُ كُفُواً أَحَدٌ "**

“Ilaahayow, waxaan ku waydiisanayaa sabatoo ah waxaan qirayaa inaad adigu tahay Allah, Ilaah xaq lagu caabudana ma jiro adiga mooyee, kalina waad tahay, sayid deeqtoonbaad tahay, kii aan ubad lahayn baad tahay, kii aan la dhalin baad tahay, cid kuu dhigantaana ma jirto.”

## 25) Ducooyinka ka danbeeya Salaada

66- " أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ (ثَلاَثاً) اللَّهُمَّ أَنْتَ السَّلاَمُ، وَمِنْكَ السَّلاَمُ، تَبَارَكْتَ يَا ذَا الْجَلاَلِ وَالْإِكْرَامِ "

"Ilaahow ii danbi dhaaf" sadex jeer "Ilaahow adigaa ah Salaam, nabaduna xagaaga ayay ka timaadaa, waad barako badantahay Ilaaha waynida iyo sharaftu u sugantahayow"

67-" لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ [ثلاثاً]، اللَّهُمَّ لاَ مَانِعَ لِمَا أَعْطَيْتَ، وَلاَ مُعْطِيَ لِمَا مَنَعْتَ، وَلاَ يَنْفَعُ ذَا الْجَدِّ مِنْكَ الجَدُّ "

"Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana jirto cid la wadaagta cibaadadiisa, waxa u sugnaaday boqortooyada iyo mahadda, isaguna wax walba wuu awoodaa, (sadex jeer ayaa la akhrinayaa). Ilaahow ma jiro cid diidi karta waxaad bixiso, mana jirto cid bixisa waxaad diido, waxna ma tarto ku sharaf leh sharaftiisu adiga agtaada"

68-"لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ، وَلَهُ الْحَمدُ، وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ. لاَ حَوْلَ وَلاَ قُوَّةَ إِلاَّ بِاللَّهِ، لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ، وَلاَ نَعْبُدُ

**إِلاَّ إِيَّاهُ, لَهُ النِّعْمَةُ وَلَهُ الْفَضْلُ وَلَهُ الثَّنَاءُ الْحَسَنُ، لَا إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ وَلَوْ كَرِهَ الكَافِرُونَ**

"Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana jirto cid la wadaagta cibaadadiisa, waxa u sugnaaday boqortooyada iyo mahadda, isaguna wax walba wuu awoodaa, xeelad iyo awood majirto aan ahayn ta Ilaahay, Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee, mana caabudayno adiga mooyee, waxa u sugnaatay nicmada iyo deeqsinimada iyo amaanta wanaagsan, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee waan u gaaryeelaynaa cibaadadiisa haba karaahiyeystaan gaaladuye"

**69- " سُبْحَانَ اللَّهِ، وَالْحَمْدُ لِلَّهِ، وَاللَّهُ أَكْبَرُ (ثلاثاً وثلاثين) لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ "**

"Xumaan Ilaahbaa ka nasahan, mahadduna Ilaahbay u sugnaatay, Ilaahbaa wayn (sadex iyo sodon jeer) Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana jirto cid la wadaagta cibaadadiisa, waxa u sugnaaday boqortooyada iyo mahadda, isaguna wax walba wuu awoodaa"

70 بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ* اللَّهُ الصَّمَدُ* لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ* وَلَمْ يَكُن لَّهُ كُفُواً أَحَدٌ﴾،

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) isagu Ilaahay waa kalidii * Ilaahay waa sayid deeqtoon * waxna ma dhalin isagana lama dhalin * mana jiro cid u dhiganta}

بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ* مِن شَرِّ مَا خَلَقَ* وَمِن شَرِّ غَاسِقٍ إِذَا وَقَبَ* وَمِن شَرِّ النَّفَّاثَاتِ فِي الْعُقَدِ* وَمِن شَرِّ حَاسِدٍ إِذَا حَسَدَ﴾

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) waxaan magan galayaa Rabbiga waabariga * Wixii shar lehba sharkiisa * iyo sharka habeenka markuu madoobaado * iyo sharka kuwa wax ku tufa guntimaha * iyo sharka xaasidka markuu wax xasdinayo}

بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ* مَلِكِ النَّاسِ* إِلَهِ النَّاسِ* مِن شَرِّ الْوَسْوَاسِ الْخَنَّاسِ* الَّذِي يُوَسْوِسُ فِي صُدُورِ النَّاسِ* مِنَ الْجِنَّةِ وَ النَّاسِ﴾

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) waxaan magan galayaa Rabbiga dadka * boqorka dadka * Ilaaha dadka * sharka waswaasiya qarsoon * kaasoo waswaasiya laabaha dadka * kuwaaso ah jinni iyo dadba}

بعد كل صلاة

Waxa la akhrinayaa sadex suuradood salaad kasta dhabarkeeda.

71- ﴿اللَّهُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ لاَ تَأْخُذُهُ سِنَةٌ وَلاَ نَوْمٌ لَّهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الأَرْضِ مَن ذَا الَّذِي يَشْفَعُ عِنْدَهُ إِلاَّ بِإِذْنِهِ يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلاَ يُحِيطُونَ بِشَيْءٍ مِّنْ عِلْمِهِ إِلاَّ بِمَا شَاءَ وَسِعَ كُرْسِيُّهُ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضَ وَلاَ يَؤُودُهُ حِفْظُهُمَا وَهُوَ الْعَلِيُّ الْعَظِيمُ﴾ عَقِبَ كلِّ صَلاَةٍ

{Ilaahay waa rabbiga isaga mooyee Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin wuu noolyahay khalqigiisana wuu maamulaa, ma qabato lulmo iyo hurdo toona, waxa u sugnaatay waxa ahaaday samooyinka iyo dhulka dhexdeeda,

waa kuma ka shafeeco qaaday agtiisa ogolaanshihiisa la’aanteed, wuxuu ogyahay waxa kahorreeya iyo waxa ka danbeeya, mana koobaan wax kamida cilmigiisa wuxuu isagu doono mooyee, waxa kursigiisu ka waasacmay samooyinka iyo dhulka, mana culaysiso ilaalintoodu waana Ilaaha korreeya ee wayn”

**72- " لاَ إِلَهَ إلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ يُحْيِي وَيُمِيتُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ " عَشْرَ مَرّاتٍ بَعْدَ صَلاةِ الْمَغْرِبِ وَالصُّبْحِ**

“Ilaah majiro xaq lagu caabudo ilaaha kalida ah mooyee, cid wax la wadaagtana majirto, wuxuu leeyahay boqortinimada iyo mahadda, isagaana ciduu doono nooleeya ciduu doonana dila, wax walbana wuu karaa.” “Toban jeer ayaa la akhrinayaa salaada Maqrib iyo salaada Subaxa kadib.”

**73- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ عِلْماً نافِعاً، وَرِزْقاً طَيِّباً، وَعَمَلاً مُتَقَبَّلاً " بَعْدَ السّلامِ مِنْ صَلاَةِ الفَجْرِ**

“Ilaahayow waxaan ku waydiisanayaa cilmi faa’ido leh, arsaaqad wanaagsan iyo camal layga aqbalo.” (Marka laga salaama naqsado salaada Subax ayaa la akhrinayaa)

## 26) Ducada salaada istikhaarada (khayr dalbashada)

**74- قَالَ جَابرُ بْنُ عَبْدِ اللَّهِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْـهُمَا: كَانَ رسُولُ اللَّهِ صلى الله عليه وسلم يُعَلِّمُنَا الاسْتِخَارَةَ فِي الْأُمُورِ كُلِّهَا كَمَا يُعَلِّمُنَا السُّورَةَ مِنَ الْقُرْآنِ، يَقُولُ: ((إِذَا هَمَّ أَحَدُكُمْ بِالْأَمْرِ فَلْيَرْكَعْ رَكْعَتَيْنِ مِنْ غَيْرِ الْفَرِيضَةِ، ثُمَّ لْيَقُلْ: اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْتَخِيرُكَ بِعِلْمِكَ، وَأَسْتَقْدِرُكَ بِقُدْرَتِكَ، وَأَسْأَلُكَ مِنْ فَضْلِكَ العَظِيمِ؛ فَإِنَّكَ تَقْدِرُ وَلاَ أَقْدِرُ، وَتَعْلَمُ وَلاَ أَعْلَمُ، وَأَنْتَ عَلاَّمُ الغُيُوبِ، اللَّهُمَّ إِنْ كُنْتَ تَعْلَمُ أَنَّ هَذَا الأَمْرَ - وَيُسَمِّي حَاجَتَهُ - خَيْرٌ لِي فِي دِينِي وَمَعَاشِي وَعَاقِبَةِ أَمْرِي – أَوْ قَالَ: عَاجِلِهِ وَآجِلِهِ - فَاقْدُرْهُ لِي وَيَسِّرْهُ لِي ثمَّ بَارِكْ لِي فِيهِ، وَإِنْ كُنْتَ تَعْلَمُ أَنَّ هَذَا الْأَمْرَ شَرٌّ لِي فِي دِينِي وَمَعَاشِي وَعَاقِبَةِ أَمْرِي – أَوْ قَالَ: عَاجِلِهِ وَآجِلِهِ – فَاصْرِفْهُ عَنِّي وَاصْرِفْنِي عَنْهُ وَاقْدُرْ لِيَ الْخَيْرَ حَيْثُ كَانَ، ثُمَّ أَرْضِنِي بِهِ)).وَمَا نَدِمَ مَنِ اسْتَخَارَ الْخَالِقَ، وَشَاوَرَ الْمَخْلُوقِينَ الْمُؤْمِنِينَ وَتَثَبَّتَ فِي أَمْرِهِ، فَقَدْ قَالَ الله تعالى: ﴿وَشاوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ﴾ "**

Jaabir binu Cabdilaahi Ilaahay haka raali ahaado isaga iyo aabihiibee wuxuu yiri: rasuulkii Ilaahay (ﷺ) wuxuu ahaa mid na bara inaan u istikhaaraysano umuuraha oo dhan, siduu noo bari jiray suurad kamida Quraanka, wuxuu dhihi jiray: hadii midkiin uu hammiyo arrin ha tukado laba rakcadood oo aan faral ahayn, markaana ha

dhaho: Ilaahayoow khayr ayaan ku waydiistay maadama aad cilmi leedahay, awoodna inaad isiiso maadaama aad awood leedahay, waxaan ku waydiisanayaa fadligaaga wayn maxaa yeelay adigu waxwalba waad awoodaa aniguna awood ma lihi, waxkastan waad ogtahay, aniguna ma ogi, adigaana og wax qaybka ku maqan. Ilaahayow hadaad garanayso in arrinkaas – waxa uu magacaabayaa xaajadiisa- wanaag uleeyahay diintayda, noloshayda iyo cidhib danbeedkayga (aduun iyo aakhiro) ama wuxuu yiri: hasoo degdegto ama dib haka timaadee, ee ii qadar, iina fududee, kadibna ii barakee. Hadaadse ogtahay in arrinkaasi shar u yahay diintayda, noloshayda iyo cidhib danbeedkayga, ama wuxuu yiri hasoo degdegto ama dib haka timaadee, iga leexi, anigana i leexi iina qadar meesha khayrka leh, kadibna igu raaligali"

Mana shalleeyo qof khayr waydiistay Ilaahay, lana tashada dadka mu'miniinta ee arrinkiisana iska hubsada, Ilaaha xumaanta ka nasahana

wuxuu yiri: {kala tasho arrinka, markaad go'aansatana talo saaro Ilaahay"

## 27) Ducooyinka subaxa iyo galabta.

**الْحَمْدُ للهِ وَحْدَهُ، وَالصَّلَاةُ وَالسَّلَامُ عَلَى مَنْ لَا نَبِيَّ بَعْدَهُ**

"Ilaahbaa mahadda iska leh kalidii, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kii aanu nabi ka danbaynin"

**75- أَعُوذُ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيطَانِ الرَّجِيمِ ﴿اللّهُ لاَ إِلَـهَ إِلاَّ هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ لاَ تَأْخُذُهُ سِنَةٌ وَلاَ نَوْمٌ لَّهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الأَرْضِ مَن ذَا الَّذِي يَشْفَعُ عِنْدَهُ إِلاَّ بِإِذْنِهِ يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلاَ يُحِيطُونَ بِشَيْءٍ مِّنْ عِلْمِهِ إِلاَّ بِمَا شَاء وَسِعَ كُرْسِيُّهُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَلاَ يَؤُودُهُ حِفْظُهُمَا وَهُوَ الْعَلِيُّ الْعَظِيمُ﴾**

Waxaan Ilaahay ka magan galayaa shaydaanka la fogeeyey {Ilaahay waa rabbiga isaga mooyee Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin wuu noolyahay khalqigiisana wuu maamulaa, ma qabato lulmo iyo hurdo toona, waxa u sugnaatay waxa ahaaday samooyinka iyo dhulka dhexdeeda, waa kuma ka shafeeco qaadaya agtiisa ogolaanshihiisa la'aanteed, wuxuu ogyahay

waxa kahorreeya iyo waxa ka danbeeya, mana koobaan wax kamida cilmigiisa wuxuu isagu doono mooyee, waxa kursigiisu ka waasacmay samooyinka iyo dhulka, mana culaysiso ilaalintoodu waana Ilaaha korreeya ee wayn}

**76- بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ* اللَّهُ الصَّمَدُ* لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ* وَلَمْ يَكُن لَّهُ كُفُواً أَحَدٌ﴾**

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) isagu Ilaahay waa kalidii * Ilaahay waa sayid deeqtoon * waxna ma dhalin isagana lama dhalin * mana jiro cid u dhiganta}

**بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ* مِن شَرِّ مَا خَلَقَ* وَمِن شَرِّ غَاسِقٍ إِذَا وَقَبَ* وَمِن شَرِّ النَّفَّاثَاتِ فِي الْعُقَدِ* وَمِن شَرِّ حَاسِدٍ إِذَا حَسَدَ﴾**

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) waxaan magan galayaa Rabbiga waabariga * Wixii shar lehba sharkiisa * iyo sharka habeenka markuu madoobaado * iyo sharka kuwa wax ku tufa

guntimaha * iyo sharka xaasidka markuu wax xasdinayo}

**بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ* مَلِكِ النَّاسِ* إِلَهِ النَّاسِ* مِن شَرِّ الْوَسْوَاسِ الْخَنَّاسِ* الَّذِي يُوَسْوِسُ فِي صُدُورِ النَّاسِ* مِنَ الْجِنَّةِ وَ النَّاسِ﴾**

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) waxaan magan galayaa Rabbiga dadka * boqorka dadka * Ilaaha dadka * sharka waswaasiya qarsoon * kaasoo waswaasiya laabaha dadka * kuwaaso ah jinni iyo dadba}

**(ثلاثَ مرَّاتٍ)**

(Waxa la akhrinayaa sadex jeer).

**77- " أَصْبَحْنَا وَأَصْبَحَ الْمُلْكُ لِلَّهِ ، وَالْحَمْدُ لِلَّهِ، لاَ إِلَهَ إلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ، رَبِّ أَسْأَلُكَ خَيْرَ مَا فِي هَذَا الْيَوْمِ وَخَيرَ مَا بَعْدَهُ ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّ مَا فِي هَذَا الْيَوْمِ وَشَرِّ مَا بَعْدَهُ، رَبِّ أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْكَسَلِ وَسُوءِ الْكِبَرِ، رَبِّ أَعُوذُ بِكَ مِنْ عَذَابٍ فِي النَّارِ وَعَذَابٍ فِي الْقَبْرِ ". وإذا أمسى قال: أمسينا وأمسى الملك لله: " وإذا أمسى قال: رب أسألك خير ما في هذه**

**الليلة، وخير ما بعدها، وأعوذ بك من شر ما في هذه الليلة، وشر ما بعدها ".**

"Waan waabariisanay, mulkiguna wuxuu u waabariistay Ilaahay, mahaddana ilaahay ayaa iska leh, Ilaah xaq lagu caabudaana majiro Ilaahay mooyee waana kalidii, cid wax lawadaagtana majirto, waxa u sugan boqortinimada iyo mahadda, wax kastana wuu karaa, Rabbiyow waxaan ku weydiisanayaa (inaad i siiso) khayrka maalintan iyo khayrka ka dambeeya, waxaan kaa magangalayaa sharka maalintan iyo sharka ka dambeeya, rabbiyow waxaan kaa magangalayaa caajiska, waxaana kaa magan galayaa gabowga xun (asaasaqnimo), Rabbiyow waxaan kaa magan galayaa cadaabka naarta iyo cadaabka qabriga"
Markuu galabaysto wuu akhrinayaa, isagoo leh: "Waan galabaysanay mulkiguna wuxuu u galabaystay Ilaahay"
Markuu galabaysto wuxuu dhahayaa: "Rabbiyow waxaan ku waydiistay khayrka habeenkan, iyo khayrka ka danbeeya, waxaan kaa magan

galayaa sharka habeenkan iyo sharka ka danbeeya"

**78- " اللَّهُمَّ بِكَ أَصْبَحْنَا، وَبِكَ أَمْسَيْنَا ، وَبِكَ نَحْيَا، وَبِكَ نَمُوتُ وَإِلَيْكَ النُّشُورُ وَإِذَا أَمْسَى قَالَ: اللَّهُمَّ بِكَ أَمْسَيْنَا، وَبِكَ أَصْبَحْنَا، وَبِكَ نَحْيَا، وَبِكَ نَمُوتُ، وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ**

"Rabbiyow adiga dartaa ayaan u waabariisanay, sababtaana waan u galabaysanaya, sababtaana waan u noolnahay, sababtaana waan ku dhiman, xagaagaana waa loo noqon." Makuu galabaystana wuxuu dhahayaa: "Rabbiyow adiga dartaa ayaan u galabaysanay, dartaa ayaan u waabariisanay, dartaa ayaan u noolnahay, dartaa ayaan u dhiman, xagaagana waa loo noqon"

**79- " اللَّهُمَّ أَنْتَ رَبِّي لَا إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ، خَلَقْتَنِي وَأَنَا عَبْدُكَ، وَأَنَا عَلَى عَهْدِكَ وَوَعْدِكَ مَا اسْتَطَعْتُ، أَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّ مَا صَنَعْتُ، أَبُوءُ لَكَ بِنِعْمَتِكَ عَلَيَّ، وَأَبُوءُ بِذَنْبِي فَاغْفِرْ لِي فَإِنَّهُ لاَ يَغْفِرُ الذُّنوبَ إِلاَّ أَنْتَ "**

"Ilaahow waxaad adigu tahay Rabigay, Ilaah xaq lagu caabudana ma jiro adiga mooyee, waad i abuurtay aniguna adoonkaagii baan ahay, waxaan ku suganahay ballantaada iyo axdigaaga intaan awoodo, waxaan (Rabbiyow) kaa magan galayaa sharka aan falo, waxaan kuu

qirayaa nicmadaada korkayga ahaatay, waxaan kale oon qirayaa danbigayga ee ii dani dhaaf, sababtoo ah cid danbi dhaaftaa ma jirto adiga mooyee.”

**80- اللَّهُمَّ إِنِّي أَصْبَحْتُ أُشْهِدُكَ، وَأُشْهِدُ حَمَلَةَ عَرْشِكَ، وَمَلاَئِكَتِكَ، وَجَمِيعَ خَلْقِكَ، أَنَّكَ أَنْتَ اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ وَحْدَكَ لاَ شَرِيكَ لَكَ، وَأَنَّ مُحَمَّداً عَبْدُكَ وَرَسُولُكَ " ( أربعَ مَرَّاتٍ) [ وَإِذَا أَمْسَى قَالَ: اللَّهُمَّ إِنِّي أَمْسَيْتُ... ]**

“Ilaahayow waxaan waabariistay anigoo ku qirsan oo qirsan (malaa’ikta) xanbarsan carshigaaga, (qirsana) malaa’iktaada iyo dhamaan khalqigaaga (Abuurkaaga), inaad tahay adigu Allah, ilaah xaq lagu caabudana majiro adiga mooyee, waxaad tahay kalidaa, cidina wax kulama wadaagto, iyo inuu Maxamad yahay adoonkaaga iyo Rasuulkaaga.” (Afar jeer ayaa la akhrinayaa) [Markuu galabaystana wuxuu dhahayaa: Ilaahow waxaan galabaystay…]

**81- اللَّهُمَّ مَا أَصْبَحَ بِي مِنْ نِعْمَةٍ أَوْ بِأَحَدٍ مِنْ خَلْقِكَ فَمِنْكَ وَحْدَكَ لاَ شَرِيكَ لَكَ، فَلَكَ الْحَمْدُ وَلَكَ الشُّكْرُ " [ وَإِذَا أَمْسَى قَالَ: اللَّهُمَّ مَا أَمْسَى بِي... ]**

“Ilaahayow wixii aan ku waabariistay oo nicmo ah ama mid ka mida makhluuqaadkaagu (uu ku waa bariistay) waxay ka ahaatay adiga xagaaga kaligaa, cidina wax kulama wadaagto, waxa kuu sugan mahadda iyo shukri naqa” [Markuu galabaystana wuxuu dhahayaa: Ilaahow wixii aan ku galabaystay…]

**82- " اللَّهُمَّ عَافِنِي فِي بَدَنِي، اللَّهُمَّ عَافِنِي فِي سَمْعِي، اللَّهُمَّ عَافِنِي فِي بَصَرِي، لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ. اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْكُفْرِ، وَالفَقْرِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ عَذَابِ القَبْرِ، لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ " (ثلاثَ مرَّاتٍ)**

“Ilaahayow caafimaad sii jirkayga, Ilaahayow caafimaadsii maqalkayga, Ilaahayow caafimaadsii aragayga, Ilaah xaq lagu caabudo ma jiro adiga mooyee. Ilaahayow waxaan kaa magan galayaa gaalnimo, faqrinimo, Ilaahayow waxaan kaa magan galayaa cadaabka qabriga Ilaah xaq lagu caabudo ma jiro adiga mooyee. (Sadex jeer ayaa la akhrinayaa)

**83- " حَسْبِيَ اللَّهُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ هُوَ عَلَيهِ تَوَكَّلتُ وَهُوَ رَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ "( سَبْعَ مَرّاتٍ)**

"Waxa igu filan Allaah, Ilaah xaq lagu caabudaana ma jiro isaga mooyee, isagaan talo saartay waana Rabbiga iska leh carshiga wayn. (Todoba jeer ayaa la akhrinayaa )

**84-" اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ الْعَفْوَ وَالْعَافِيَةَ فِي الدُّنْيَا وَالآخِرَةِ، اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ الْعَفْوَ وَالْعَافِيَةَ: فِي دِينِي وَدُنْيَايَ وَأَهْلِي، وَمَالِي، اللَّهُمَّ اسْتُرْ عَوْرَاتِي، وَآمِنْ رَوْعَاتِي، اللَّهُمَّ احْفَظْنِي مِنْ بَينِ يَدَيَّ، وَمِنْ خَلْفِي، وَعَنْ يَمِينِي، وَعَنْ شِمَالِي، وَمِنْ فَوْقِي، وَأَعُوذُ بِعَظَمَتِكَ أَنْ أُغْتَالَ مِنْ تَحْتِي "**

"Ilaahayow waxaan ku waydiisanayaa cafis aduunyo iyo mid aakhiraba, Ilaahayow waxan ku waydiisanayaa inaad i cafiso iyo caafimaad qabka diintayda iyo aduunyadaydaba iyo ehelkayga iyo xoolahaygaba. Ilaahayow astur cawraadkayga, igana aamin yeel walwalkayga, Ilaahayow iga ilaali hortayda, gadaashay, xagayga midig, xagayga bidix iyo kaorkayga waxaan kale oon kaa magan galayaa in layga shirqoolo hoostayda."

**85-" اللَّهُمَّ عَالِمَ الغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَاطِرَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ، رَبَّ كُلِّ شَيْءٍ وَمَلِيكَهُ، أَشْهَدُ أَنْ لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ، أَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّ نَفْسِي، وَمِنْ**

شَرِّ الشَّيْطانِ وَشَرَكِهِ، وَأَنْ أَقْتَرِفَ عَلَى نَفْسِي سُوءاً، أَوْ أَجُرَّهُ إِلَى مُسْلِمٍ "

“Rabbiyow, Ilaaha og waxa maqan iyo waxa joogabow, cirka iyo dhulkana rabbigii abuurayow, rabbiga shay kasta lahaayow, waxaan qirayaa in uusan jirin ilaah xaq lagu caabudo adiga mooyee, waxaan kaa magan galayaa sharka naftayda, iyo sharka shaydaanka iyo shirkigiisa ama dabinkiisa, waxaan kale oon kaa magan galayaa in aan naftayda xumaan kula kaco, ama qof muslim ah u soo jiido xumaan.”

**86-" بِسْمِ اللَّهِ الَّذِي لاَ يَضُرُّ مَعَ اسْمِهِ شَيْءٌ فِي الْأَرْضِ وَلاَ فِي السَّمَاءِ وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ " ( ثلاثَ مرَّاتٍ)**

“Magaca ilaahay ayaan ku billaabayaa, magacaasoo uusan dhibin la jirkiisa wax ku sugan dhulka iyo circa toona, Ilaahayna waa maqal badane cilmi badane ah.” (Sadex jeer ayaa la akhrinayaa)

**87- رَضِيتُ بِاللَّهِ رَبّاً، وَبِالْإِسْلاَمِ دِيناً، وَبِمُحَمَّدٍ صلى الله عليه وسلم نَبِيّاً " (ثلاثَ مرَّاتٍ)**

“Ilaahay Rabbinimo ayaan raali uga ahay, Islaamnimada diin ahaan (ayaan raali uga ahay),

Maxamadna (ﷺ) nabinimo (ayaan raali uga ahay) (sadex jeer ayaa la akhrinayaa)

**88- " يَا حَيُّ يَا قَيُّومُ بِرَحْمَتِكَ أَسْتَغِيثُ أَصْلِحْ لِي شَأْنِيَ كُلَّهُ وَلاَ تَكِلْنِي إِلَى نَفْسِي طَرْفَةَ عَيْنٍ "**

"Ilaah noolow, Ilaaha qayyuumka ahaw (Ilaaha u taagan maamulka koonkiisa) naxariistaada darteeda ayaan gurmad ku dalbayaa, wanaaji arinkayga dhamaantiis, hana igu sii dayn naftayda hal ilbiriqsi."

**89- أَصْبَحْنَا وَأَصْبَحَ الْمُلْكُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ، اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَيْرَ هَذَا الْيَوْمِ: فَتْحَهُ، وَنَصْرَهُ، وَنورَهُ، وَبَرَكَتَهُ، وَهُدَاهُ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّ مَا فِيهِ وَشَرِّ مَا بَعْدَهُ " [ وَإِذَا أَمْسَى قَالَ: أَمْسَيْنَا وَأَمْسَى الْمُلْكُ للّه رَبِّ الْعَالَمِيْنِ اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَيْرَ هَذِهِ اللَّيْلَةِ: فَتْحَهَا، وَنَصْرَهَا، وَنُورَهَا، وَبَرَكَتَهَا، وَهُدَاهَا، وَأَعُوذُ بِكَ مَنْ شَرِّ مَا فِيهَا، وَشَرِّ مَا بَعْدَهَا.]**

"Waan waa bariisanay, mulkiguna wuxuu u waabariistay Ilaaha caalamiinta rabbigooda ah, Ilaahow waxaan ku weydiisanayaa khayrka maalintan, fatxigeeda (furashadeeda), gargaarkeeda, nuurkeeda, barakadeeda iyo hanuunkeeda, waxaana kaa magan galayaa sharka ku sugan dhexdeeda iyo sharka ka dambeeyaba."

[markuu galabaystana wuxuu dhahayaa: waan galabaysanay, mulkiguna wuxuu u galabaystay Ilaaha rabbiga caalamiinta, Ilaahow waxaan ku waydiisanayaa khayrka habeenkan, furashadeeda, guusheeda, nuurkeeda, barakadeeda, hanuunkeeda, waxaan kaa magan galayaa sharkeeda iyo sharka ka danbeeya.]

**90- " أَصْبَحْنا عَلَى فِطْرَةِ الْإِسْلاَمِ، وَعَلَى كَلِمَةِ الْإِخْلاَصِ، وَعَلَى دِينِ نَبِيِّنَا مُحَمَّدٍ صلى الله عليه وسلم، وَعَلَى مِلَّةِ أَبِينَا إِبْرَاهِيمَ، حَنِيفاً مُسْلِماً وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ " [ وَإِذَا أَمْسَى قَالَ: أَمْسَيْنَا عَلَى فِطْرَةِ الْإِسْلاَمِ... ]**

“Waxaan ku waa bariisanay fidrada (diinta) islaamka, iyo kalimada ikhlaaska (tawxiidka) iyo diinta nabigeena Maxammad (ﷺ) iyo diinta aabaheen Ibraahiim ee ahaa mid ka leexday (gaalnimo,) ahaana muslim, kamanuusan mid ahayn mushrikiinta (gaalada).” [Haduu galabaystana wuxuu dhahayaa: waxaan ku galabaysanay fidradii islaamka…]

**91- " سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ "( مائة مرَّةٍ)**

“Xumaan Ilaahbaa ka nasahan, isagaana mahadda leh” (boqol jeer ayaa la akhrinayaa)

**92- " لاَ إِلَهَ إلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ، وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ) ( عشرَ مرَّات ، أَوْ مرَّةً واحدةً عندَ الكَسَلِ)**

"Ilaah xaq lagu caabudo ma jiro Ilaahay mooyee, waa kalidii, wahelna ma laha, waxa u sugnaaday boqornimada iyo mahadda, wax walbana wuu karaa. (Toban jeer ayaa la akhrinayaa ama hal mar hadaad daalantahay)

**93-" لاَ إِلَهَ إلاَّ اللَّهُ، وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ "( مائةَ مرَّةٍ إذا أصبحَ )**

"Ilaah xaq lagu caabudo ma jiro Ilaahay mooyee, waa kalidii, wahelna ma laha, waxa u sugnaaday boqornimada iyo mahadda, wax walbana wuu karaa" (Boqol jeer markuu waabariisto ayuu akhrinayaa)

**94- " سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ: عَدَدَ خَلْقِهِ، وَرِضَا نَفْسِهِ، وَزِنَةَ عَرْشِهِ، وَمِدَادَ كَلِمَاتِهِ "( ثلاثَ مرَّاتٍ إذا أصبحَ )**

"Xumaan waxa ka hufan Ilaahay, mahaddana iska leh (waxaan u mahadcelinayaa) tirada khalqigiisa, intay naftiisu raali noqonayso, inta miisaanka carshigiisu la eegyahay iyo tirada ereyadiisa. (Sadex jeer markuu waabariisato.)

**95- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ عِلْماً نَافِعاً، وَرِزْقاً طَيِّباً، وَعَمَلاً مُتَقَبَّلاً " ( إذا أصبحَ)**

“Ilaahow waxaan ku weydiisanayaa cilmi wax anfaca iyo arsaaqad wanaagsan iyo camal la iga aqbalo,” (waxaa la akhriyaa subaxdii).

**96-" أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ " (مِائَةَ مَرَّةٍ فِي الْيَوْمِ)**

“Ilaahay baan danbi dhaaf waydiisanayaa, waanan u toobad keenayaa (Boqol jeer maalintii ayaa la akhrinayaa)

**97- " أَعُوذُ بِكَلِمَاتِ اللَّهِ التَّامَّاتِ مِنْ شَرِّ مَا خَلَقَ " ( ثلاثَ مرَّاتٍ إذا أمسى)**

“waxaan kaga magan galayaa kalmadaha ilaahay ee dhamayska tiran sharka wixii uu abuuray.” (Sadex jeer markuu galabaysto)

**98- " اللَّهُمَّ صَلِّ وَسَلِّمْ عَلَى نَبَيِّنَا مُحَمَّدٍ " (عشرَ مرَّاتٍ)**

“Ilaahayow u naxariiso oo nabadgalyo korkiisa yeel nabigayaga Maxamad (Toban jeer ayaa la akhrinayaa)

## 28) Ducooyinka Hurdada

**99-"يَجْمَعُ كَفَّيْهِ ثُمَّ يَنْفُثُ فِيهِمَا فَيَقْرَأُ فِيهِمَا**

Labadiisa gacmood ayuu kulminayaa waanu ku tufayaa isagoo akhrinaya:

**بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ * اللَّهُ الصَّمَدُ* لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ* وَلَمْ يَكُن لَّهُ كُفُواً أَحَدٌ﴾**

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) isagu Ilaahay waa kalidii * Ilaahay waa sayid deeqtoon * waxna ma dhalin isagana lama dhalin * mana jiro cid u dhiganta}

**بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ* مِن شَرِّ مَا خَلَقَ* وَمِن شَرِّ غَاسِقٍ إِذَا وَقَبَ* وَمِن شَرِّ النَّفَّاثَاتِ فِي الْعُقَدِ* وَمِن شَرِّ حَاسِدٍ إِذَا حَسَدَ﴾**

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) waxaan magan galayaa Rabbiga waabariga * Wixii shar lehba sharkiisa * iyo sharka habeenka markuu madoobaado * iyo sharka kuwa wax ku tufa guntimaha * iyo sharka xaasidka markuu wax xasdinayo}

بسم الله الرحمن الرحيم ﴿قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ* مَلِكِ النَّاسِ* إِلَهِ النَّاسِ* مِن شَرِّ الْوَسْوَاسِ الْخَنَّاسِ* الَّذِي يُوَسْوِسُ فِي صُدُورِ النَّاسِ* مِنَ الْجِنَّةِ وَ النَّاسِ﴾

Magaca Ilaahay ayaan ku bilaabay, Allahaasoo naxariista naxariis guud iyo mid gaaraba. {Waxaad dhahdaa (nabiyow) waxaan magan galayaa Rabbiga dadka * boqorka dadka * Ilaaha dadka * sharka waswaasiya qarsoon * kaasoo waswaasiya laabaha dadka * kuwaaso ah jinni iyo dadba}

ثُمَّ يَمْسَحُ بِهِمَا مَا اسْتَطَاعَ مِنْ جَسَدِهِ يَبْدَأُ بِهِمَا عَلَى رَأْسِهِ وَوَجْهِهِ وَمَا أَقْبَلَ مِنْ جَسَدِهِ. "يفعلُ ذلك ثلاثَ مرَّاتٍ"

Kadibna wuxuu ku masaxayaa jidhkiisa intii uu awoodo, wuxuu kaga bilaabayaa madixiisa, wajigiisa iyo jidhkiisa inta soo qaabilsan. (sidaas wuxuu yeelayaa sadex jeer)

100- ﴿اللّهُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ لاَ تَأْخُذُهُ سِنَةٌ وَلاَ نَوْمٌ لَّهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الأَرْضِ مَن ذَا الَّذِي يَشْفَعُ عِنْـــــــدَهُ إِلاَّ بِإِذْنِهِ يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلاَ يُحِيطُونَ بِشَيْءٍ مِّنْ عِلْمِهِ إِلاَّ بِمَا شَاء وَسِعَ كُرْسِيُّهُ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضَ وَلاَ يَؤُودُهُ حِفْظُهُمَا وَهُوَ الْعَلِيُّ الْعَظِيمُ﴾

{Ilaahay waa rabbiga isaga mooyee Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin wuu noolyahay khalqigiisana wuu maamulaa, ma qabato lulmo iyo hurdo toona, waxa u sugnaatay waxa ahaaday samooyinka iyo dhulka dhexdeeda, waa kuma ka shafeeco qaadaya agtiisa ogolaanshihiisa la'aanteed, wuxuu ogyahay waxa kahorreeya iyo waxa ka danbeeya, mana koobaan wax kamida cilmigiisa wuxuu isagu doono mooyee, waxa kursigiisu ka waasacmay samooyinka iyo dhulka, mana culaysiso ilaalintoodu waana Ilaaha korreeya ee wayn}

**101- ﴿آمَنَ الرَّسُولُ بِمَا أُنزِلَ إِلَيْهِ مِن رَّبِّهِ وَالْمُؤْمِنُونَ كُلٌّ آمَنَ بِاللَّهِ وَمَلآئِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ لاَ نُفَرِّقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِّن رُّسُلِهِ وَقَالُواْ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا غُفْرَانَكَ رَبَّنَا وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ* لاَ يُكَلِّفُ اللَّهُ نَفْساً إِلاَّ وُسْعَهَا لَهَا مَا كَسَبَتْ وَعَلَيْهَا مَا اكْتَسَبَتْ رَبَّنَا لاَ تُؤَاخِذْنَا إِن نَّسِينَا أَوْ أَخْطَأْنَا رَبَّنَا وَلاَ تَحْمِلْ عَلَيْنَا إِصْراً كَمَا حَمَلْتَهُ عَلَى الَّذِينَ مِن قَبْلِنَا رَبَّنَا وَلاَ تُحَمِّلْنَا مَا لاَ طَاقَةَ لَنَا بِهِ وَاعْفُ عَنَّا وَاغْفِرْ لَنَا وَارْحَمْنَآ أَنتَ مَوْلاَنَا فَانصُرْنَا عَلَى الْقَوْمِ الْكَافِرِينَ﴾**

{Rasuulku wuxuu rumeeyey wixii lagaga soo dajiyey xaga rabbigiis iyo mu'miniintuba, kulligood waxay rumeeyeen Ilaahay,

malaaa’iktiisa, kutubtiisa, rusushiisa mana kala kaxaynayno mid kamida rusushiisa dhexdooda, waxayna dhaheen waanu maqalnay oo adeecnay ee noo danbi dhaaf rabbiyow xagaagana waa loo soo noqonayaa * Kuma kallifo Ilaahay nafna wax aanay awoodin, waxay helaysaa wixii ay kasbatay (khayr ah) korkeedana waxa ah wixii ay kasbatay (shar ah), rabbiyow hanoo qabanin wixii aan halmaamno ama aan gafno, rabbiyow hanagu xanbaarin culays sidii aad ugu xanbaartay kuwii naga horreeyey, rabbiyow hanagu xanbaarin (ha nasaarin) wax aanaan awood u lahayn, na cafi oo noo dhaaf oo noo naxariiso adigaa gargaarahayaga ah ee nooga gargaar qoomka gaaloobay }

**102- بِاسْمِكَ رَبِّي وَضَعْتُ جَنْبِي، وَبِكَ أَرْفَعُهُ، فَإِن أَمْسَكْتَ نَفْسِي فارْحَمْهَا، وَإِنْ أَرْسَلْتَهَا فَاحْفَظْهَا، بِمَا تَحْفَظُ بِهِ عِبَادَكَ الصَّالِحِينَ"**

“Magacaaga, rabbiyow ayaan dhinaca u dhigayaa, sababtiisana waan kusoo kacayaa, hadii aad qabato naftayda u naxariiso, hadii aad

sii daysana ka ilaali waxaad ka ilaaliso adoomadaada wanaagsan”

**103- "اللَّهُمَّ إِنَّكَ خَلَقْتَ نَفْسِي وَأَنْتَ تَوَفَّاهَا، لَكَ مَمَاتُهَا وَمَحْياهَا، إِنْ أَحْيَيْتَهَا فَاحْفَظْهَا، وَإِنْ أَمَتَّهَا فَاغْفِرْ لَهَا. اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ العَافِيَةَ"**

“Ilaahow waxaad abuurtay naftayda, adigaana oofsanaya, waxa kuu sugan dhimashadeeda iyo nolosheedaba, hadaad noolayso ilaali, hadaad dishana u naxariiso, Ilaahow waxaan ku waydiistay cafis”

**104-"اللَّهُمَّ قِنِي عَذَابَكَ يَوْمَ تَبْعَثُ عِبَادَكَ"( ثلاث مرات )**

“Ilaahow iga badbaadi cadaabkaaga maalinta aad soo bixinayso adoomadaada” (sadex jeer ayaa lagu celcelinayaa)

**105- " بِاسْمِكَ اللَّهُمَّ أَمُوتُ وَأَحْيَا"**

“Magacaaga dartii, Ilaahow ayaan ku dhiman kuna noolaan”

**106- " سُبْحَانَ اللَّهِ (ثلاثاً وثلاثين) وَالْحَمْدُ لِلَّهِ (ثلاثاً وثلاثين) وَاللَّهُ أَكْبَرُ (أربعاً وثلاثينَ)**

“Xumaan Ilaahow waad ka nasahantahay (sadex iyo sodon jeer) Mahadda Ilaabaa iska leh (sadex iyo sodon jeer) Ilaahbaa wayn (afar iyo sodon jeer)

**107- "اللَّهُمَّ رَبَّ السَّمَوَاتِ السَّبْعِ وَرَبَّ الأَرْضِ، وَرَبَّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ، رَبَّنَا وَرَبَّ كُلِّ شَيْءٍ، فَالِقَ الْحَبِّ وَالنَّوَى، وَمُنْزِلَ التَّوْرَاةِ وَالْإِنْجِيلِ، وَالْفُرْقَانِ، أَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّ كُلِّ شَيْءٍ أَنْتَ آخِذٌ بِنَاصِيَتِهِ. اللَّهُمَّ أَنْتَ الأَوَّلُ فَلَيْسَ قَبْلَكَ شَيْءٌ، وَأَنْتَ الآخِرُ فَلَيس بَعْدَكَ شَيْءٌ، وَأَنْتَ الظَّاهِرُ فَلَيْسَ فَوْقَكَ شَيْءٌ، وَأَنْتَ الْبَاطِنُ فَلَيْسَ دُونَكَ شَيْءٌ، اقْضِ عَنَّا الدَّيْنَ وَأَغْنِنَا مِنَ الْفَقْرِ"**

“Ilaahow, rabbiga todoba samow, rabbiga carshigii waynaayow, rabigayagiiyow, wax kasta rabbigoodow, ka kala filqiya iniintow, soona dajiyey towraad, injiil iyo furqaanow, waxaan kaa magan galayaa wax kasta sharkooda ood fooodooda hayso, Ilaahow adigaa ahaa kii koowaad ee aan cidina ka horraynin, adigaa ah kii u danbeeyey ee aan cidina ka danbaynin, adigaa ah ka sarreeya ee aan cidina ka sarrayn, adigaa ah ka sokeeya ee aan cidina ka sokayn, naga bixi daynta nagana koryeel faqrinimada”

**108- "الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَطْعَمَنَا وَسَقَانَا، وَكَفَانَا، وَآوَانَا، فَكَمْ مِمَّنْ لاَ كَافِيَ لَهُ وَلاَ مُؤْوِيَ"**

“Ilaahbaa mahadda iska leh, kaasoo na cuntaysiiyey, na waraabiyey, nagu filnaaday, na hooyay, fara badanaa mid aan cid ku filan iyo cid hoysaba aan lahayn”

**109- "اللَّهُمَّ عَالِمَ الغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَاطِرَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ، رَبَّ كُلِّ شَيْءٍ وَمَلِيكَهُ، أَشْهَدُ أَنْ لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ، أَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّ نَفْسِي، وَمِنْ شَرِّ الشَّيْطَانِ وَشِرْكِهِ، وَأَنْ أَقْتَرِفَ عَلَى نَفْسِي سُوءاً، أَوْ أَجُرَّهُ إِلَى مُسْلِمٍ"**

“Ilaaha aqoonta u leh waxa maqan iyo waxa joogabow, abuurihii samooyinka iyo dhulkow, rabbiga barbaariyey wax kasta ee maamulow, waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin adiga mooyee, waxaan kaa magan galayaa sharka naftayda, sharka shaydaanka iyo gaalnimadiisa iyo inaan naftayda kula kaco xumaan ama inaan xumaan usoo jiido muslim kale”

**110-" يَقْرَأُ ﴿الم﴾ تَنْزِيلَ السَّجْدَة ِ، وَتَبَارَكَ الَّذي بِيَدِهِ الْمُلْكُ"**

“Wuxuu akhrinayaa {Alif Laam Miim} tanziil oo ah suuratu Sajdah iyo {Tabaaraka alladii biyadihii almulku}

**111- "للَّهُمَّ أَسْلَمْتُ نَفْسِي إِلَيْكَ، وَفَوَّضْتُ أَمْرِي إِلَيْكَ، وَوَجَّهْتُ وَجْهِي إِلَيْكَ، وَأَلْجَأْتُ ظَهْرِي إِلَيْكَ، رَغْبَةً وَرَهْبَةً إِلَيْكَ، لاَ مَلْجَأَ وَلاَ مَنْجَا مِنْكَ إِلاَّ إِلَيْكَ، آمَنْتُ بِكِتَابِكَ الَّذِي أَنْزَلْتَ، وَبِنَبِيِّكَ الَّذِي أَرْسَلْتَ"**

“Ilaahayow naftaydii ayaan kuu dhiibay, umuurahaygiina waan kuu talo saartay, dhabarkaygana waxaan u magan galay xagaaga,

anigoo kaa cabsanaya kuna rajaynaya adiga, majiro meel loo magan galo iyo meel lagu badbaado adiga xagaaga mooyee, waxaan aaminay kitaabkaaga aad soo dajisay iyo nabigaagii aad soo dirtay”

## 29) Ducada habeenkii markuu baraarugo (is rogo).

**112- "لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ الْوَاحِدُ الْقَهّارُ، رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا الْعَزِيزُ الْغَفَّارُ"**

“Ilaah xaq lagu caabudo majiro, Ilaaha kalida ah ee awooda badan leh mooyee, rabbiga samooyinka iyo dhulka iyo inta u dhaxaysaba, ee ah rabbiga adkaada ee danbi dhaafka badan”

## 30) Ducada walwalka iyo cabsida hurdada.

**113- "أَعُوذُ بِكَلِمَاتِ اللَّهِ التَّامَّاتِ مِنْ غَضَبِهِ وَعِقَابِهِ، وَشَرِّ عِبَادِهِ، وَمِنْ هَمَزَاتِ الشَّيَاطِينِ وَأَنْ يَحْضُرُونِ"**

“Ilaahay waxaan kaga magan galayaa ereyadiisa dhamayska tiran cadhadiisa iyo ciqaabkiisa iyo

sharka adoomadiisa iyo waswaaska shaydaanka iyo inay soo xaadiraan”

## 31) Muxuu samaynayaa qofka riyo xun ku riyooda?

**114- "يَنْفُثُ عَنْ يَسَارِهِ (ثلاثاً).**

“Dhinaca bidix ayaa ku tufayaa” (sadex jeer)

**"يَسْتَعِيذُ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيطَانِ وَمِنْ شَرِّ مَا رَأَى (ثَلاَثَ مَرَّاتٍ).**

“Wuxuu Ilaaha ka magan galayaa shaydaanka iyo sharka wixii uu arkay” (sadex jeer)

**"لاَ يُحَدِّثْ بِهَا أَحَداً"**

“Cidna uma sheegayo”

**"يَــتَحَوَّلُ عَنْ جَنْبِهِ الَّذِي كَانَ عَلَيْهِ"**

“Wuxuu iska rogayaa dhinacuu u jiifsaday”

**115- " ويَقُومُ يُصَلِّي إِنْ أَرَادَ ذَلِكَ"**

“Wuu kacayaa oo wuu tukanayaa haduu doono”

## 32) Ducada qunuutka Witriga.

**116- " اللَّهُمَّ اهْدِنِي فِيمَنْ هَدَيْتَ، وَعَافِنِي فِيمَنْ عَافَيْتَ، وَتَوَلَّنِي فِيمَنْ تَوَلَّيْتَ، وَبَارِكْ لِي فِيمَا أَعْطَيْتَ، وَقِنِي شَرَّ مَا قَضَيْتَ؛ فَإِنَّكَ تَقْضِي وَلاَ يُقْضَى عَلَيْكَ، إِنَّهُ لاَ يَذِلُّ مَنْ وَالَيْتَ، [وَلاَ يَعِزُّ مَنْ عادَيْتَ]، تَبارَكْتَ رَبَّنا وَتَعَالَيْتَ"**

“Ilaahow i hanuuni la jirka kuwii aad hanuunisay, caafimaad isii la jirka kuwii aad caafimaadsiisay, ii gargaar la jirka kuwii aad u gargaartay, iina barakee wixii aad isiiso, igana badbaadi sharka wixii aad qadarto, maxaa yeelay adigaa wax go’aamiya laguumana go’aamiyo, mana dulloobo qof aad u gargaarto, mana guulaysto qof aad dullayso, adigaa barako badan rabbiyow oo korreeya”

**117- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِرِضَاكَ مِنْ سَخَطِكَ، وَبِمُعَافَاتِكَ مِنْ عُقُوبَتِكَ، وَأَعُــوذُ بِكَ مِنْكَ، لاَ أُحْصِي ثَنَاءً عَلَيْكَ، أَنْتَ كَمَا أَثْنَيْتَ عَلَى نَفْسِكَ"**

“Ilaahow waxaan kaaga magan galay raali ahaanshahaaga cadhadaada, cafiskaagana ciqaabkaaga, adigaan ku magan galay oon ka magan galay isla adiga, ma koobayo amaantaada, adigu waxaad tahay sidaad naftaada ku amaantay”

**118- " اللَّهُمَّ إِيَّاكَ نعْبُدُ، وَلَكَ نُصَلِّي وَنَسْجُدُ، وَإِلَيْكَ نَسْعَى وَنَحْفِدُ، نَرْجُو رَحْمَتَكَ، وَنَخْشَى عَذَابَكَ، إِنَّ عَذَابَكَ بِالكَافِرِينَ مُلْحَقٌ. اللَّهُمَّ إِنَّا نَسْتَعِينُكَ، وَنَسْتَغْفِرُكَ، وَنُثْنِي عَلَيْكَ الْخَيْرَ، وَلاَ نَكْفُرُكَ، وَنُؤْمِنُ بِكَ، وَنَخْضَعُ لَكَ، وَنَخْلَعُ مَنْ يَكْفُرُكَ"**

“Ilaahow adiga kalida ayaan ku caabudnaa, adigaan kuu tukanaa oon kuu sujuudnaa, adigaan u shaqaynaynaa oon u ordaynaa (daacadaada), waxaan rajaynaynaa naxariistaada, cadaabkaagana waan ka cabsoonaynaa, cadaabkaaguna waa mid gaalada haleelaya. Ilaahow adigaan kaalmo ku waydiisanaynaa, danbi dhaafna warsanaynaa, kuguna amaanaynaa khayr, kaamana gaaloobayno, waan ku rumaynaynaa, waan kuu khushuucaynaa, waan ka tagaynaa cida kaa gaalowda”

## 33) Ducada marka laga salaamo naqsado Witriga.

**119- "سُبْحَانَ المَلِكِ القُدُّوسِ" ثلاثَ مرَّاتٍ والثَّالِثَةُ يَجْهَرُ بها ويَمُدُّ بها صَوتَهُ يقولُ: [رَبِّ الْمَلاَئِكَةِ وَالرُّوحِ]**

“Xumaan waxa ka nasahan Ilaaha boqorka ah ee daahirka ah” sadex jeer ayuu akhrinayaa, ta sadexaad codka sare ayuu u qaadayaa isagoo leh: [Rabbiga malaa’kta iyo ruuxda]

## 34) Ducada walbahaarka iyo murugada.

**120- " اللَّهُمَّ إِنِّي عَبْدُكَ، ابْنُ عَبْدِكَ، ابْنُ أَمَتِكَ، نَاصِيَتِي بِيَدِكَ، مَاضٍ فِيَّ حُكْمُكَ، عَدْلٌ فِيَّ قَضَاؤُكَ، أَسْأَلُكَ بِكُـــلِّ اسْمٍ هُوَ لَكَ، سَمَّيْتَ بِهِ نَفْسَكَ، أَوْ أَنْزَلْتَهُ فِي كِتَابِكَ، أَوْ عَلَّمْتَهُ أَحَداً مِنْ خَلْقِكَ، أَوِ اسْتَأْثَرْتَ بِهِ فِي عِلْمِ الغَيْبِ عِنْدَكَ، أَنْ تَجْعَلَ الْقُرْآنَ رَبِيعَ قَلْبِي، وَنُورَ صَدْرِي، وَجَلاَءَ حُزْنِي، وَذَهَابَ هَمِّي"**

“Ilaahow anigu adoonkaagiibaan ahay, wiilkii adoonkaagii ayaan ahay, wiilkii adoontaadii ayaan ahay, foodaydu waxay ku jirtaa gacantaada, xukunkaaga ayaa igu fuli, waa cadaalad garsoorkaagu, waxaan kugu waydiisanayaa magac kasta ood leedahay, oo aad naftaada ku magacawday, ama kitaabkaaga aad kusoo dajisay, ama qof kamida khalqigaaga aad bartay, ama aad ku kaydisay cilmiga qaybka ee agtaada ah, inaad ka yeesho quraanka wanaajiyaha qalbigayga, nuurka laabtayda, tagida murugadayda iyo tagida walbahaarkayga”

**121- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْهَمِّ وَالْحَزَنِ، وَالْعَجْزِ وَالْكَسَلِ، وَالْبُخْلِ وَالْجُبْنِ، وَضَلَعِ الدَّيْنِ وَغَلَبَةِ الرِّجَالِ"**

“Ilaahow waxaan kaa magan galay walwalka iyo murugada, caajisnimada iyo wahsiga, bakhaylnimada iyo fulaynimada, culayska daynta iyo in la iga adkaado”

## 35) Ducada kurbashada (balaayooyinka).

**122-" لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ الْعَظِيمُ الْحَلِيمُ، لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ رَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ، لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ رَبُّ السَّمَوَاتِ وَرَبُّ الْأَرْضِ وَرَبُّ الْعَرْشِ الْكَرِيمِ "**

“Ilaaha xaq lagu caabudo majiro Ilaaha wayn ee dulqaadka badan mooyee, Ilaah xaq lagu caabudo majiro, rabbiga carshiga wayn mooyee, Ilaah xaq lagu caabudo majiro rabbiga samooyinka iyo rabbiga dhulka iyo rabbiga carshiga leh ee sharafta badan mooyee”

**123- اللَّهُمَّ رَحْمَتَكَ أَرْجُو، فَلاَ تَكِلْنِي إِلَى نَفْسِي طَرْفَةَ عَيْنٍ، وَأَصْلِحْ لِي شَأْنِي كُلَّهُ، لاَ إِلَـهَ إِلاَّ أَنْتَ "**

“Ilaahow naxariistaada ayaan rajaynayaa, ee naftayda ha igu sii dayn hal ilbiriqsi, iina hagaaji arrimahayga kulligood, Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee”

**124- " لاَ إِلَـهَ إِلاَّ أَنْتَ سُبْحَانَكَ إِنِّي كُنْتُ مِنَ الظَّالِمِينَ "**

“Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee, xumaan waad ka nasahantahay, aniguna waxaan kamid ahaa kuwa naftooda dulmiyey”

**125- " اللَّهُ اللَّهُ رَبِّي لاَ أُشْرِكُ بِهِ شَيْئاً "**

“Ilaahay, Ilaahay ayaa rabbigay ah, mana la wadaajinayo cibaadadiisa cidna”

## 36) Ducada la kulanka cadawga iyo ka awooda leh.

**126- " اللَّهُمَّ إِنَّا نَجْعَلُكَ فِي نُحُورِهِم، وَنَعُوذُ بِكَ مِنْ شُرُورِهِمْ "**

“Ilaahow waxaan kaa yeelanay Dhuumahooda (Laa), waxaanan kaa magan galnay sharkooda”

**127- " اللَّهُمَّ أَنْتَ عَضُدِي، وَأَنْتَ نَصِيرِي، بِكَ أَحُولُ وَبِكَ أَصُولُ، وَبِكَ أُقَاتِلُ "**

“Ilaahayow adigu garabkay ayaad tahay, adigu waxaad tahay gargaarahayga, adigaan xeelad kaa dalbanayaa (aan ku celiyo dhagarta gaalada), adigaan kuu dirirayaa (jidkaagaa), adigaan kuu dagaalamayaa.

**128- " حَسْبُنَا اللَّهُ وَنِعْمَ الْوَكِيلُ "**

“Ilaahow adigaa nagu filan, adigaana u nicmo badan cid la talo saarto”

## 37) Ducada qofka ka cabsada dulmiga madaxda.

**129-** **" اللَّهُمَّ ربَّ السَّمَوَاتِ السَّبْعِ، وَرَبَّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ، كُنْ لِي جَاراً مِنْ فُلاَنِ بْنِ فُلاَنٍ، وَأَحْزَابِهِ مِنْ خَلاَئِقِكَ، أَنْ يَفْرُطَ عَلَيَّ أَحَدٌ مِنْهُمْ أَوْ يَطْغَى، عَزَّ جَارُكَ، وَجَلَّ ثَنَاؤُكَ، وَلاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ "**

"Ilaahayow, rabbiga samooyinka todobada ahow, rabbiga carshiga waynow, iiga hiili hebal oo ah ina hebal iyo xisbigiisa oo kamida khalqigaaga, inuu igu xadgudbo mid ayaga kamida ama uu igu kibro, hiilkaaga ayaa wayn, amaantaaduna way wayn tahay, Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee"

**130-** **" اللَّهُ أَكْبَرُ، اللَّهُ أَعَزُّ مِنْ خَلْقِهِ جَمِيعاً، اللَّهُ أَعَزُّ مِمَّا أَخَافُ وَأَحْذَرُ، أَعُوذُ بِاللَّهِ الَّذِي لاَ إِلَهَ إِلاَّ هُوَ، الْمُمْسِكِ السَّمَوَاتِ السَّبْعِ أَنْ يَقَعْنَ عَلَى الْأَرْضِ إِلاَّ بِإِذْنِهِ، مِنْ شَرِّ عَبْدِكَ فُلاَنٍ، وَجُنُودِهِ وَأَتْبَاعِهِ وَأَشْيَاعِهِ، مِنْ الْجِنِّ وَالإِنْسِ، اللَّهُمَّ كُنْ لِي جَاراً مِنْ شَرِّهِمْ، جَلَّ ثَنَاؤُكَ وَعَزَّ جَارُكَ، وَتَبَارَكَ اسْمُكَ، وَلاَ إِلَهَ غَيْرُكَ" (ثلاثَ مرَّاتٍ)**

"Ilaahbaa wayn, ilaahbaa ka awood badan khalqigiisa dhamaantood, ilaahbaa ka awood badan waxaan ka cabsanayo ee aan ka digtoonahay, waxaan magan galayaa Ilaahay, mana jiro Ilaah xaq lagu caabudo isaga mooyee,

kaasoo haya todobada samo inay kusoo dhacaan dhulka ogolaanshihiisa mooyee, sharka adoonkaaga hebal (ayaan kaa magan galayaa) iyo askartiisii, xulufadiisii, taageerayaashiisa jinka iyo insigaba, Ilaahow iiga hiili sharkooda, amaantaaduna way wayn tahay, hiilkaaguna waa waynyahay, waxa barako batay magacaaga, Ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee" (sadex jeer)

## 38) Habaarka Cadowga.

**131- " اللَّهُمَّ مُنْزِلَ الْكِتَابِ، سَرِيعَ الْحِسَابِ، اهْزِمِ الأَحْزَابَ، اللَّهُمَّ اهزِمْهُمْ وَزَلْزِلْهُمْ"**

"Ilaaha soo dajiyey kitaabkow, xisaabtiisu degdegta tahayow, jabi xsibiyadan, ilaahow jabi oo kaga gariiri"

## 39) Muxuu dhahayaa qofka qoom ka cabsada?

**132- " اللَّهُمَّ اكْفِنِيهِمْ بِمَا شِئْتَ"**

"Ilaahow igaga filnow waxaad doonto"

## 40) Ducada qofka ay asiibto waswaaska xaga iimaanka ah.

**133- " يَسْتَعِيذُ بِاللَّهِ و يَنْتَهِي عَمَّا شك فِيهِ"**

“Ilaahay ayuu magan galayaa, waanu joojinayaa wixii uu ka shakiyey”

**134- يَقُولُ: "آمَنْتُ بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ"**

Wuxuu dhahayaa: “ilaahaybaan rumeeyey iyo rusushiisa”

**135- يَقْرَأُ قَوْلَهُ تَعَالَى: ﴿هُوَ الْأَوَّلُ وَالْآخِرُ وَالظَّاهِرُ وَالْبَاطِنُ وَهُوَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ﴾**

Wuxuu akhrinayaa qawlka Ilaahay: “isagu waa kii horreeyey kii danbeeyey ka sarreeya ka sokeeya isaguna wax walba wuu ogyahay”

## 41) Ducada bixinta daynta.

**136- " اللَّهُمَّ اكْفِنِي بِحَلاَلِكَ عَنْ حَرَامِكَ، وَأَغْنِنِي بِفَضْلِكِ عَمَّنْ سِوَاكَ"**

“Ilaahayow igaga filnaysii xalaashaada xaaraantaada, hodana iga dhig deeqdaada darteed wixii adiga kaasoo hadhay (dadka kale igaga filnow)”

137- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْهَمِّ وَالْحَزَنِ، وَالْعَجْزِ وَالْكَسَلِ، وَالْبُخْلِ وَالْجُبْنِ، وَضَلَعِ الدَّيْنِ وَغَلَبَةِ الرِّجَالِ"

“Ilaahow waxaan kaa magan galay walwalka iyo murugada, caajisnimada iyo wahsiga, bakhaylnimada iyo fulaynimada, culayska daynta iyo in la iga adkaado”

## 42) Ducada qofka ku waswaasa salaada iyo quraanka.

138- " أَعُوذُ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيطَانِ الرَّجِيمِ، وَاتْفُلْ عَلَى يَسَارِكَ (ثلاثاً)

“Ilaahay ayaan ka magan galay shaydaanka la fogeeyey, kuna tuf dhinacaaga bidix” (sadex jeer)

## 43) Ducada qofka arrin ku adkaato.

139- " اللَّهُمَّ لاَ سَهْلَ إِلاَّ مَا جَعَلْتَهُ سَهْلاً، وَأَنْتَ تَجْعَلُ الْحَزْنَ إِذَا شِئْتَ سَهْلاً "

“Ilaahow majiro wax fudud wixii aad fudaydiso mooyee, adigaana wax adag ka dhiga fudayd hadaad doonto”

## 44) Muxuu dhahayaa ama samaynayaa qofka danbaabay?

**140- " مَا مِنْ عَبْدٍ يُذْنِبُ ذَنْباً فَيُحْسِنُ الطُّهُورَ، ثُمَّ يَقُومُ فَيُصَلِّي رَكْعَتَيْنِ، ثُمَّ يَسْتَغْفِرُ اللَّهَ إِلاَّ غَفَرَ اللَّهُ لَهُ**

“majiro adoon danbaabay oo hagaajiyey waysada, kadibna istaagay oo tukaday laba rakcadood, kadibna Ilaahay waydiista danbi dhaaf (haduu jiraba) Ilaahay wuu u dhaafaa”

## 45) Ducada shaydaanka lagu eryo iyo waswaaskiisa.

**141- " الاسْتِعَاذَةُ بِاللَّهِ مِنْهُ "**

“Ilaahay ka magan gal shaydaanka”

**142- " الأَذَانُ "**

“Aadaanka”

**143- "الأَذْكَارُ وَقِرَاءَةُ الْقُرْآنِ "**

“Ducooyinka iyo akhrinta quraanka”

## 46) Ducada marka ay dhacdo wax aanu raali ka ahayn ama laga awood bato arrinkiisa.

**144- " قَدَرُ اللَّهُ وَمَا شَاءَ فَعَلَ "**

“Ilaahbaa qadaray, wuxuu doonana wuu sameeyaa”

## 47) Bogaadinta qofka ilmo loo dhalay iyo jawaabta uu bixinayo.

**145- بَارَكَ اللَّهُ لَكَ فِي الْمَوْهُوبِ لَكَ، وَشَكَرْتَ الْوَاهِبَ، وَبَلَغَ أَشُدَّهُ، وَرُزِقْتَ بِرَّهُ " وَيَرُدُّ عَلَيْهِ الْمُهَنَّأُ فَيَقُولُ: "بَارَكَ اللَّهُ لَكَ وَبَارَكَ عَلَيْكَ، وَجَزَاكَ اللَّهُ خَيْراً، وَرَزَقَكَ اللَّهُ مِثْلَهُ، وَأَجْزَلَ ثَوَابَكَ"**

“Ilaahay hakuu barakeeyo ilmaha lagu hibeeyey, noqo mid mahadiya Ilaahay, hana koro, halagugu arsaaqo baarinimadiisa” wuxuu ku jawaabayaa ka la bogaadiyey, isagoo leh: “Ilaahay haku barakeeyo, korkaagana ha barakeeyo, Ilaahayna hakugu abaal mariyo khayr, mid lamidana hakugu arsaaqo, hana wayneeyo abaalkaaga”

## 48) Ducada caruurta lagaga ilaaliyo shaydaanka.

**146- كَانَ رَسُولُ اللَّهِ صلى الله عليه وسلم يُعَوِّذُ الحَسَنَ وَالحُسَيْنَ رضي الله عنهما "أُعِيذُكُمَا بِكَلِمَاتِ اللَّهِ التَّامَّةِ مِنْ كُلِّ شَيْطَانٍ وَهَامَّةٍ، وَمِنْ كُلِّ عَيْنٍ لاَمَّةٍ"**

Rasuulkii Ilaahay (ﷺ) wuxuu ku ilaalin jiray Xasan iyo Xuseen ilaahay raali haka ahaadee “waxaan idiin magan galinayaa ereyada Ilaahay ee dhamayska tiran (kana magan galaya) shaydaan kasta, bahal kasta oo sun leh, iyo il kasta oo xaasida”

## 49) Ducada loogu duceeyo qofka buka marka la booqdo.

**147- " لاَ بأْسَ طَهُورٌ إِنْ شَاءَ اللَّهُ "**

“Dhib malaha, way ku daahirinaysaa hadii Alle ka dhigo”

**148- " أَسْأَلُ اللَّهَ الْعَظيمَ رَبَّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ أَنْ يَشْفيَكَ " (سبع مرات)**

“Waxaan waydiisanayaa Ilaaha wayn, rabbiga leh carshiga wayn inuu ku shaafiyo”

## 50) Fadliga in lasoo booqdo qofka xanuusanaya.

**قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم: "إِذَا عَادَ الرَّجُلُ أَخَاهُ الْمُسْلِمَ مَشَى فِي خِرَافَةِ الْجَنَّةِ حَتَّى يَجْلِسَ، فَإِذَا جَلَسَ غَمَرَتْهُ الرَّحْمَةُ، فَإِنْ كَانَ غُدْوَةً صَلَّى عَلَيْهِ سَبْعُونَ أَلْفَ مَلَكٍ حَتَّى يُمْسِيَ، وَإِنْ كَانَ مَسَاءً صَلَّى عَلَيْهِ سَبْعُونَ أَلْفَ مَلَكٍ حَتَّى يُصْبِحَ"**

Nabigu (ﷺ) wuxuu yiri: "markuu ninku soo booqdo walaalkiisa muslimka, wuxuu socdaa isagoo goosanaya midhaha jannada illamaa uu ka fadhiisanayo, haduu fadhiisto waxa daboola naxariis, hadii ay galin hore tahay waxa u duceeya todobaatan kun oo malag illaa uu ka galabaysanayo, hadii ay galabtahayna waxa u duceynaya todobaatan kun oo malag ilaa uu ka waabariisanayo"

## 51) Ducada bukaanka ka quustay nolosha.

**150- " اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي، وَارْحَمْنِي، وَأَلْحِقْنِي بِالرَّفِيقِ الْأَعْلَى "**

"Ilaahayow ii danbi dhaaf, iina naxariiso, igana mid dhig asxaabta sarreysa (nabiyada iyo dadka wanaagsan)"

**151- " جَعَلَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم عِنْدَ مَوْتِهِ يُدْخِلُ يَدَيْهِ فِي الْمَاءِ فَيَمْسَحُ بِهِمَا وَجْهَهُ، وَيَقُولُ: لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ إِنَّ لِلْمَوْتِ سَكَرَاتٍ "**

"Wuxuu yeelay nabigu (ﷺ) markuu dhimanayey inuu gacantiisa galiyo biyaha oo uu ku masaxo wajigiisa, isagoo leh: Ilaah xaq lagu caabudo

majiro Ilaahay mooyee, geeridu sakaraad ayay leedahay”

**152- "لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ وَاللَّهُ أَكْبَرُ، لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ، لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَـهُ، لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ لَـهُ الْمُلْكُ وَلَـهُ الْحَمْدُ، لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ وَلاَ حَوْلَ وَلاَ قُوَّةَ إِلاَّ بِاللَّهِ"**

“Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee, Ilaahbaa wayn, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana laha cid shuraako ah, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee, waxa u sugan mulkiga iyo mahadda, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee, xeelad iyo awoodna majirto aan ka ahayn ta Ilaahay.

## 52) Qofka dhimanaya oo loo laqimo.

**153- " مَنْ كَانَ آخِرُ كَلاَمِهِ لاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ دَخَلَ الْجَنَّةَ"**

“Qofka ereygiisa u danbeeya yahay (laa ilaaha ilaa Allah) ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee, jannada wuu galay”

## 53) Ducada qofka musiibo ku dhacdo

**154- " إِنَّا لِلَّهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ رَاجِعُونَ، اللَّهُمَّ أْجُرْنِي فِي مُصِيبَتِي، وَأَخْلِفْ لِي خَيْرَاً مِنْهَا"**

“Annaga Ilaahbaa na leh, annaguna isagaan u laabanaynaa, Ilaahow iga ajir sii musiibadaydan, wax ka khayr badana iigu badal”

## 54) Ducada marka indhaha loo laabay maydka.

**155- " اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِفُلاَنٍ (بِاسْمِهِ) وَارْفَعْ دَرَجَتَهُ فِي الْمَهْدِيِّينَ، وَاخْلُفْهُ فِي عَقِبِهِ فِي الْغَابِرِينَ، وَاغْفِرْ لَنَا وَلَهُ يَا رَبَّ الْعَالَمِينَ، وَافْسَحْ لَهُ فِي قَبْرِهِ، وَنَوِّرْ لَهُ فِيهِ"**

“Ilaahow u danbi dhaaf hebal (magiciisa ayuu sheegayaa) darajadiisana sare ugu qaad kuwa hanuunsan dhexdooda, u ilaali cidhibtiisana (ubadkiisii) kuwa hadhaya dhexdooda”

## 55) Ducada salaada janaasada loogu duceeyo maydka.

**156-" اللَّهُمَّ اغْفِرْ لَهُ وَارْحَمْهُ، وَعَافِهِ، وَاعْفُ عَنْهُ، وَأَكْرِمْ نُزُلَهُ، وَوَسِّعْ مُدْخَلَهُ، وَاغْسِلْهُ بِالْمَاءِ وَالثَّلْجِ وَالْبَرَدِ، وَنَقِّهِ مِنَ الْخَطَايَا كَمَا**

**نَقَّيْتَ الثَّوْبَ الأَبْيَضَ مِنَ الدَّنَسِ، وَأَبْدِلْهُ دَاراً خَيْراً مِنْ دَارِهِ، وَأَهْلاً خَيْراً مِنْ أَهْلِهِ، وَزَوْجَاً خَيْراً مِنْ زَوْجِهِ، وَأَدْخِلْهُ الْجَنَّةَ، وَأَعِذْهُ مِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ [وَعَذَابِ النَّارِ]"**

“Ilaahow u danbi dhaaf, una naxariiso, cafi oo ka saamax oo wanaaji hoygiisa, waasici meeshuu galayo, kuna dhaq (maydh) biyo, baraf iyo qabow, kana nadiifi danbiyada sidaad uga nadiifisay marada cad usgaga, daartiisiina ugu badal mid khayr badan, ehelkiisiina mid ka khayr badan, xaaskiina mid ka khayr badan, jannadana gali, kana magan gali cadaabka qabriga, iyo cadaabka naarta”

**157- " اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِحَيِّنَا وَمَيِّتِنَا، وَشَاهِدِنَا وَغَائِبِنَا، وَصَغِيرِنَا وَكَبِيرِنَا، وَذَكَرِنَا وَأُنْثَانَا. اللَّهُمَّ مَنْ أَحْيَيْتَهُ مِنَّا فَأَحْيِهِ عَلَى الْإِسْلاَمِ، وَمَنْ تَوَفَّيْتَهُ مِنَّا فَتَوَفَّهُ عَلَى الإِيمَانِ، اللَّهُمَّ لاَ تَحْرِمْنَا أَجْرَهُ، وَلاَ تُضِلَّنَا بَعْدَهُ "**

Ilaahow u danbi dhaaf kaayaga nool iyo kaayaga dhintay, kaayaga jooga iyo kaayaga maqan, kaayaga wayn iyo ka yarba, kaayaga labka ah iyo ka dhadiga ahba. Ilaahow kaad noolayso ku noolee islaamnimada, kaad oofsatana ku oofso iimaanka, Ilaahow hanaga xarrimin ajirkiisa, hana na baadiyeysiin gadaashiis”

**158-** " اللَّهُمَّ إِنَّ فُلاَنَ بْنَ فُلاَنٍ فِي ذِمَّتِكَ، وَحَبْلِ جِوَارِكَ، فَقِهِ مِنْ فِتْنَةِ الْقَبْرِ، وَعَذَابِ النَّارِ، وَأَنْتَ أَهْلُ الْوَفَاءِ وَالْحَقِّ، فَاغْفِرْ لَهُ وَارْحَمْهُ إِنَّكَ أَنْتَ الغَفُورُ الرَّحِيمُ "

“Ilaahow hebal oo ah ina hebal wuxuu ku jiraa daryeelkaaga, iyo xadhiga magantaada, ka badbaadi fitnada qabriga, cadaabka naarta, adigaa ehel u ah ballan oofinta iyo xaqa, u danbi dhaaf una naxariiso, adigu waxaad tahay danbi dhaaf badane naxariista”

**159-** " اللَّهُمَّ عَبْدُكَ وَابْنُ أَمَتِكَ احْتَاجَ إِلَى رَحْمَتِكَ، وَأَنْتَ غَنِيٌّ عَنْ عَذَابِهِ، إِنْ كَانَ مُحْسِناً فَزِدْ فِي حَسَنَاتِهِ، وَإِنْ كَانَ مُسِيئاً فَتَجَاوَزْ عَنْهُ "

“Ilaahow adoonkaaga ah wiilka ay dhashay adoomadaadu, wuxuu u baahday naxariistaada, adiguna waad ka kaaftoontahay cadaabkiisa, haduu ahaa qof wanaagsan u siyaadi wanaagiisa, haduu ahaa mid wax xumeeyay ka saamax oo ka dhaaf”

## 56) Ducada ilmaha saqiira marka lagu tukanayo.

**160-** " اللَّهُمَّ أَعِذْهُ مِنْ عَذَابِ القَبْرِ "

“Ilaahow ka badbaadi cadaabka qabriga”

**وإن قال: "اللَّهُمَّ اجْعَلْهُ فَرَطاً وَذُخْراً لِوَالِدَيْهِ، وَشَفِيعاً مُجَاباً، اللَّهُمَّ ثَقِّلْ بِهِ مَوَازِينَهُمَا، وَأَعْظِمْ بِهِ أُجورَهُمَا، وَأَلْحِقْهُ بِصَالِحِ الْمُؤْمِنِينَ، وَاجْعَلْهُ فِي كَفَالَةِ إِبْرَاهِيمَ، وَقِهِ بِرَحْمَتِكَ عَذَابَ الْجَحِيمِ، وَأَبْدِلْهُ دَاراً خَيْراً مِنْ دَارِهِ، وَأَهْلاً خَيْراً مِنْ أَهْلِهِ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِأَسْلاَفِنَا، وَأَفْرَاطِنَا، وَمَنْ سَبَقَنَا بِالْإِيمَانِ" إن قال ذلك فَحَسَنٌ**

Haduu dhaho: “Ilaahow ka yeel saqiir iyo kaydka waalidkiisa, iyo ergo la ajiibo, Ilaahow ku culaysi miisaanadooda, kuna waynee ajirkooda, raacina mu’iniinta wanaagsan, kana yeel kuwa Ibraahim kafaalo qaato, kana badbaadi naxariistaada darteed cadaabka jaxiima, daartiisiina mid ka khayr badan ugu badal, ehelkiisana mid ka khayr badan, ilaahow u danbi dhaaf kuwii naga horreeyey, saqiiradayada (noo hormaray), iyo kuwii iimaanka nooga horreeyey” haduu sidaa dhaho way fiicantahay.

**161- " اللَّهُمَّ اجْعَلْهُ لَنَا فَرَطاً، وَسَلَفاً، وَأَجْراً "**

“Ilaahow nooga yeel saqiir noo hormaray, salaf noo horreeyey, iyo ajarba”

## 57) Ducada Tacsida.

**162- " إِنَّ لِلَّهِ مَا أَخَذَ، وَلَهُ مَا أَعْطَى، وَكُلُّ شَيْءٍ عِنْدَهُ بِأَجَلٍ مُسَمًّى... فَلْتَصْبِرْ وَلْتَحْتَسِبْ "**

"Ilaahay waxa u sugan wixii uu qaatay, wixii uu bixiyey, wax kastana agtiisa ajal cayiman ayay leeyihiin… ee samir oo Ilaahay kaga ajar dalab"

**وَإِنْ قَالَ: ((أَعْظَمَ اللَّهُ أَجْرَكَ، وَأَحْسَنَ عَزَاءَكَ، وَغَفَرَ لِمَيِّتِكَ)) فَحَسَنٌ**

Haduu dhaho: "Ilaahay ajarkaaga ha wayneeyo, tacsidaadana ha hagaajiyo, maydkaagana ha u danbi dhaafo" way fiicantahay.

## 58) Ducada marka maydka xabaasha la galinayo.

**163- " بِسْمِ اللَّهِ وَعَلَى سُنَّةِ رَسُولِ اللَّهِ "**

"Magaca Ilaahay ayaan ku galinaynaa iyo sunnadii rasuulkii Ilaahay"

## 59) Ducada maydka marka la aaso kadib.

**164- " اللَّهُمَّ اغْفِرْ لَهُ، اللَّهُمَّ ثَبِّتْهُ "**

"Ilaahow u danbi dhaaf, Ilaahow sug"

## 60) Ducada siyaarashada qabriga.

**165- " السَّلاَمُ عَلَيْكُمْ أَهْلَ الدِّيَارِ، مِنَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُسْلِمِينَ، وَإِنَّا إِنْ شَاءَ اللَّهُ بِكُمْ لاَحِقُونَ، [وَيَرْحَمُ اللَّهُ الْمُسْتَقْدِمِينَ مِنَّا وَالْمُسْتَأْخِرِينَ] أَسْأَلُ اللَّهَ لَنَا وَلَكُمُ الْعَافِيَةَ"**

"Nabad galyo korkiina ha ahaato ehelka daartanow, ee mu'miniinta iyo muslimiinta, annaguna hadii Ilaahay ka dhigo waan idinka daba iman, [Ilaahayna ha u naxariisto kuweena hormaray iyo hadhsan] waxaan idiin waydiinaynaa Ilaahay inuu na cafiyo annaga iyo idinkaba"

## 61) Ducada dabaysha.

**166- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْـــــأَلُكَ خَيْرَهَا، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا "**

"Ilaahow khayrkeeda ayaan ku waydiistay, sharkeedana waan kaa magan galay"

**167- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَيْرَهَا، وَخَيْرَ مَا فِيهَا، وَخَيْرَ مَا أُرْسِلَتْ بِهِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا، وَشَرِّ مَا فِيهَا، وَشَرِّ مَا أُرْسِلَتْ بِهِ "**

"Ilaahow waxaan ku waydiistay khayrkeeda, iyo khayrka ku dhex jira, iyo khayrka aad u dirtay, waxaan kaa magan galayaa sharkeeda iyo sharka ku dhex jira iyo sharka aad u dirtay"

## 62) Ducada onkodka.

" سبحان الذي يُسبح الرعد بحمده والملائكة من خيفته "

“Xumaan waxa ka nasahan ka onkodku u tasbiixsado una mahad celiyo, malaa’iktuna ka cabsato”

## 63) Ducooyinka roobdoonta.

169- " اللَّهُمَّ اسْقِنَا غَيْثاً مُغِيثاً مَرِيئاً مَرِيعاً، نَافِعاً غَيْرَ ضَارٍّ، عَاجِلاً غَيْرَ آجِلٍ "

“Ilaahayoow nagu waraabi roob nagu da’a oo hunguri mareen ah oo noo soo saaro daaq, oo na anfaca oo aan dhib wadanin, oo soo degdega oo aan daahayn”

170- " اللَّهُمَّ أَغِثْنَا، اللَّهُمَّ أَغِثْنَا، اللَّهُمَّ أَغِثْنَا "

“laahayoow na roobee, Ilaahayoow na roobee, Ilaahayoow na roobee.”

171- " اللَّهُمَّ اسْقِ عِبَادَكَ، وَبَهَائِمَكَ، وَانْشُرْ رَحْمَتَكَ، وَأَحْيِي بَلَدَكَ الْمَيِّتَ "

“Ilaahow waraabi adoomadaada iyo xoolahaaga (mayeedhaanka), fidina naxariistaada, soona noolee baladkaaga dhintay”

## 64) Ducada markuu da'ayo roobku.

**172- " اللَّهُمَّ صَيِّباً نَافِعاً "**

"Ilaahayow noo shub (isagoo) na anfacaya"

## 65) Ducada di'ida roobka kadib.

**173- " مُطِرْنَا بِفَضْلِ اللهِ وَرَحْمَتِهِ "**

"Waxa naloogu roobeeyey fadliga (deeqda) Ilaahay iyo naxariistiisa"

## 66) Ducada roobku markuu bato ee looga cabsado fatahaado.

**174- " اللَّهُمَّ حَوَالَيْنَا وَلاَ عَلَيْنَا، اللَّهُمَّ عَلَى الآكَامِ وَالظِّرَابِ، وَبُطُونِ الْأَوْدِيَةِ، وَمَنَابِتِ الشَّجَرِ "**

"Ilaahayow (ku shub roobka) hareerahayaga, korkayagana ha yeelin, Ilaahayow ku shub roobka taagaga, buuraha yaryar, iyo togaga dhexdooda iyo meelaha dhirtu ka baxdo (jirridaha hoostooda)"

## 67) Ducada marka dayaxu dhasho.

**" اللَّهُ أَكْبَرُ، اللَّهُمَّ أَهِلَّهُ عَلَيْنَا بِالْأَمْنِ وَالْإِيمَانِ، وَالسَّلاَمَةِ وَالْإِسْلاَمِ، وَالتَّوْفِيقِ لِمَا تُحِبُّ رَبَّنَا وَتَرْضَى، رَبُّنَا وَرَبُّكَ اللَّهُ "**

“Ilaahbaa wayn, Ilaahow ha noogu bilato amaan iyo iimaan, nabad galyo iyo islaamnimo, iyo waafajinta waxaad jeceshahay rabbiyow ee aad raalida ka ka tahay, rabbigayo iyo rabbigaagu waa Ilaahay”

## 68) Ducada qofka sooman markuu afurayo.

**176- " ذَهَبَ الظَّمَأُ وَابْتَلَّتِ العُرُوقُ، وَثَبَتَ الْأَجْرُ إِنْ شَاءَ اللَّهُ "**

“Harraadkii waa tagay, xididadiina way qoyeen, ajirkiina wuu sugmay, hadii Ilaahay ka dhigo”

**177- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ بِرَحْمَتِكَ الَّتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ أَنْ تَغْفِرَ لِي "**

“Ilaahow waxaan ku waydiistay naxariistaada ku waasaca noqotay shay kasta inaad iigu danbi dhaafto”

## 69) Ducada kahor cuntada.

**178- " إِذَا أَكَلَ أَحَدُكُمْ طَعَاماً فَلْيَقُلْ بِسْمِ اللَّهِ، فَإِنْ نَسِيَ فِي أَوَّلِهِ فَلْيَقُلْ بسمِ اللَّهِ فِي أَوَّلِهِ وَآخِرِهِ "**

“Hadii midkiin cuno cunto ha dhaho bismillah (magaca Allah ayaan ku bilaabay) haduu ilaawo

bilowga ha dhaho magaca Allah ayaan ku bilaabay bilowgii iyo dhamaadkiiba”

**179- " مَنْ أَطْعَمَهُ اللَّهُ الطَّعَامَ فَلْيَقُلْ: اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِيهِ وَأَطْعِمْنَا خَيْراً مِنْهُ، وَمَنْ سَقَاهُ اللَّهُ لَبَناً فَلْيَقُلْ اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِيهِ وَزِدْنَا مِنْهُ "**

“Qofkii Ilaahay ku quudiyo cunto ha dhaho: “Ilaahow noo barakee, naguna quudi wax ka khayr badan, qofkii Ilaahay waraabiyey caano ha dhaho: Ilaahow noo barakee oo noo siyaadi”

## 70) Ducada marka cuntada laga faaruqo.

**180- " الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَطْعَمَنِي هَذَا، وَرَزَقَنِيهِ، مِنْ غَيْرِ حَوْلٍ مِنِّي وَلاَ قُوَّةٍ "**

“Ilaahbaa mahadda iska leh nagu quudiyey tan, naguna arsaaqay, ayadoo aanay jirin xeelad iyo awood katimid xagayga”

**181- "الْحَمْدُ لِلَّهِ حَمْداً كَثِيراً طَيِّباً مُبَارَكاً فِيهِ، غَيْرَ [مَكْفِيٍّ وَلاَ ] مُوَدَّعٍ، وَلاَ مُسْتَغْنَىً عَنْهُ رَبَّنَا "**

“Ilaahbaa mahad badan u sugnaatay, taasoo wanaagsan oo barakaysan, oo aan laga kaaftoomi karin, laga tagi karin, lagana deeqtoomi karin rabbiyow”

## 71) Ducada martidu ugu ducayso cidii marti qaaday.

**182- "اللهُمَّ بَارِكْ لَهُم فيما رَزَقتهُمْ، واغْفِر لهم وارحَمْهُم"**

“Ilaahow u barakee waxaad ku arsaaqday, una danbi dhaaf una naxariiso”

## 72) Ducada qofka ku waraabiyey ama doonay inuu ku waraabiyo.

**183- "اللهُمَّ أَطْعِمْ مَنْ أطْعَمَني وأَسْقِ مَنْ سَقَاني"**

“Ilaahow quudi cidii i quudisay, waraabina cidii i waraabisay”

## 73) Ducada markuu reer la afuro.

**184" أَفْطَرَ عِنْدَكُمُ الصَّائِمُونَ، وَأَكَلَ طَعَامَكُمُ الْأَبْرَارُ، وَصَلَّتْ عَلَيْكُمُ الْمَلاَئِكَةُ "**

“Agtiina haka afuraan dadka sooman, cuntadiinana ha cunaan dadka wanaagsan, malaa’iktuna ha idiin ducayso”

### 74) Ducada qofka sooman ku ducaysanayo marka cuntada la hor keeno ee aanu wali afurin.

**185- " إِذَا دُعِيَ أَحَدُكُمْ فَلْيُجِبْ، فَإِنْ كَانَ صَائِماً فَلْيُصَلِّ، وَإِنْ كَانَ مُفْطِراً فَلْيَطْعَمْ"**

"Hadii midkiin la marti qaado ha ajiibo, haduu soomanyahayna ha duceeyo, haduu afursanyahayna ha cuno"

### 75) Muxuu dhahayaa qofka sooman hadii la caayo?

**186- "إني صائم، إني صائم"**

"Anigu waan soomanahay, anigu waan soomanahay"

### 76) Ducada markuu arko midhihii oo soo baxaya.

**187- " اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِي ثَمَرِنَا، وَبَارِكْ لَنَا فِي مَدِينَتِنَا، وَبَارِكْ لَنَا فِي صَاعِنَا، وَبَارِكْ لَنَا فِي مُدِّنَا"**

"Ilaahow noo barakee midhaheena, noona barakee magaaladeena, noona barakee

saaceena, noona barakee mudkeena (muga wax lagu miisaamo)”

## 77) Ducada qofka hindhisay.

**188- " إِذَا عَطَسَ أَحَدُكُم فَلْيَقُلِ الْحَمْدُ لِلَّهِ، وَلْيَقُلْ لَهُ أَخُوهُ أَوْ صَاحِبُهُ: يَرْحَمُكَ اللَّهُ، فَإِذَا قَالَ لَهُ: يَرحَمُكَ اللَّهُ، فَلْيَقُلْ: يَهْدِيكُمُ اللَّهُ وَيُصْلِحُ بَالَكُمْ"**

“Hadii uu hindhiso midkiin ha dhaho: Ilaahbaa mahadda iska leh, hana dhaho walaalkii ama saaxiibkii: Ilaahay hakuu naxariisto, hadii uu dhaho: Ilaahay hakuu naxariisto, ha dhaho: Ilaahay haku hanuuniyo, hana hagaajiyo umuurahaaga”

## 78) Maxaa lagu dhahayaa qofka gaalka ah ee hindhisay una mahadceliyey Ilaahay?

**189- " يَهْدِيكُمُ اللَّهُ وَيُصْلِحُ بَالَكُمْ "**

“Ilaahay hakusoo hanuuniyo, hana hagaajiyo umuurahaaga”

## 79) Ducada qofka guursaday loogu duceeyo.

**190- " بَارَكَ اللَّهُ لَكَ، وَبَارَكَ عَلَيْكَ، وَجَمَعَ بَيْنَكُمَا فِي خَيْرٍ"**

"Ilaahay haku barakeeyo, hana barakeeyo korkaaga, hana idinku kulmiyo dhexdiina khayr"

## 80) Ducada qofka guursaday ama iibsaday gaadiid.

**191- إِذَا تَزَوَّجَ أَحَدُكُمُ امْرَأَةً، أَوْ إِذَا اشْتَرَى خَادِماً فَلْيَقُلْ: "اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَيْرَهَا، وَخَيْرَ مَا جَبَلْتَهَا عَلَيْهِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا، وَشَرِّ مَا جَبَلْتَهَا عَلَيْهِ، وَإِذَا اشْتَرَى بَعِيراً فَلْيَأْخُذْ بِذِرْوَةِ سَنَامِهِ وَلْيَقُلْ مِثْلَ ذَلِكَ"**

Hadii midkiin guursado xaas ama uu iibsado adeege, ha dhaho: "Ilaahow waxaan ku waydiistay khayrkeeda iyo khayrka aad ku abuurtay, waxaan kaa magan galayaa sharkeeda iyo sharka aad ku abuurtay, haduu iibsado awr (rati) ha qabto kuruskiisa oo ha dhaho (ducadan) oo kale"

## 81) Ducada kahor intaan loo tagin xaaska.

" بِسْمِ اللَّهِ، اللَّهُمَّ جَنِّبْنَا الشَّيْطَانَ، وَجَنِّبِ الشَّيْطَانَ مَا رَزَقْتَنَا"

"Magaca Allah ayaan ku bilaabay, Ilaahow naga fogee shaydaanka, kana fogee shaydaanka wixii aad nagu arsaaqday"

## 82) Ducada qofka cadhaysan.

193- " أَعُوذُ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ"

"Ilaahay waxaan ka magan galay shaydaanka la fogeeyey"

## 83) Ducada qofkii arka cid dhibaato ay ku habsatay.

194- " الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي عَافَانِي مِمَّا ابْتَلاَكَ بِهِ، وَفَضَّلَنِي عَلَى كَثِيرٍ مِمَّنْ خَلَقَ تَفْضِيلاً"

"Ilaahbaa mahadda iska leh iga caafiyey wuxuu kugu imtixaamay, igana fadilay kuwa badan oo uu abuuray"

## 84) Maxaa la dhahayaa (ducaysanayaa) golaha la fadhiyo?

**195- عَنِ ابْنِ عُمَرَ رضي الله عنه قَاَلَ: كَانَ يُعَدُّ لِرَسُولِ اللَّهِ صلى الله عليه وسلم فِي الْمَجْلِسِ الوَاحِدِ مِائَةُ مَرَّةٍ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَقُومَ: "رَبِّ اغْفِرْ لِي، وَتُبْ عَلَيَّ، إِنَّكَ أَنْتَ التَّوَّابُ الغَفُورُ"**

Ibnu Cumar waxa laga wariyey, Ilaahay raali haka ahaadee inuu yiri: waxa la tirin jiray rasuulkii Ilaahay (ﷺ) hal meel oo uu fadhiyo boqol jeer inuu dhaho, kahor intaanu kicin: “Rabbiyow ii danbi dhaaf, igana toobad aqbal, adigu waxaad tahay mid toobad aqbal badan oo danbi dhaafa”

## 85) Kafaaro gudka fadhiga.

**196- " سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ وَبِحَمْدِكَ، أَشْهَدُ أَنْ لاَ إِلَهَ إِلاَّ أَنْتَ، أَسْتَغْفِرُكَ وَأَتُوبُ إِلَيْكَ "**

“Xumaan ayaad ka dheertahay Ilaahayow, waadna mahadsantahay, waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin adiga mooyee, danbi dhaaf ayaan ku waydiistay, waana kuu toobad keenay”

## 86) Ducada qofka kugu dhaha "Ilaahay hakuu danbi dhaafo"

**197- " وَلَكَ "**

"Sidoo kale"

## 87) Ducada qofka wanaag kuu sameeya.

**198- " جَزَاكَ اللَّهُ خَيْراً "**

"Ilaahay khayr hakugu abaal mariyo"

## 88) Waxa kaa ilaalinaya fitnada Dajaalka.

**199- " مَنْ حَفِظَ عَشْرَ آيَاتٍ مِنْ أَوَّلِ سُورَةِ الْكَهْفِ عُصِمَ مِنَ الدَّجَّالِ" ، وَالْاسْتِعَاذَةُ بِاللَّهِ مِنْ فِتْنَتِهِ عَقِبَ التَّشَهُّدِ الْأَخِيرِ مِنْ كُلِّ صَلاَةٍ.**

"Cida xifdida tobanka aayadood ee u horreeya suurada Al-Kahfi, waxa laga ilaaliyey Dajaalka" iyo inaad Ilaahay ka magan gasho fitnadiisa kadib markaad ashahaadato atixiyaadka danbe salaad kasta"

## 89) Ducada qofka dhaha: Ilaahay dartii ayaan kuu jeclahay.

**200- " أَحَبَّكَ الَّذِي أَحْبَبْتَنِي لَهُ "**

“Haku jeclaado ka aad dartii ii jeceshahay”

## 90) Ducada qofka kuu soo bandhiga xoolihiisa.

**201- " بَارَكَ اللَّهُ لَكَ فِي أَهْلِكَ وَمَالِكَ "**

“Ilaahay hakuu barakeeyo ehelkaaga iyo xoolahaagaba”

## 91) Ducada qofka bixinaya daynta marka la gudayo.

**202- " بارَكَ اللَّهُ لَكَ فِي أَهْلِكَ وَمَالِكَ، إِنَّمَا جَزَاءُ السَّلَفِ الْحَمْدُ وَالأَدَاءُ "**

“Ilaahay hakuu barakeeyo ehelkaaga iyo xoolahaagaba, abaalgudka dayntu waa mahadnaq iyo gudid (in la iska bixiyo)”

## 92) Ducada marka laga cabsado shirkiga.

203- " اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ أَنْ أُشْرِكَ بِكَ وَأَنَا أَعْلَمُ، وَأَسْتَغْفِرُكَ لِمَا لاَ أَعْلَمُ "

"Ilaahow waxaan kaa magan galay inaan shirki kuula yimaado anigoo og, waxaan danbi dhaaf kaa waydiisanayaa wixii aanan ogayn"

## 93) Ducada qofka kugu dhaha: Ilaahay haku barakeeyo.

204- " وَفِيكَ بَارَكَ اللَّهُ "

"Adigana, Ilaahay haku barakeeyo"

## 94) Ducada in la naco baasaysiga.

205- اللَّهُمَّ لاَ طَيْرَ إِلاَّ طَيْرُكَ، وَلاَ خَيْرَ إِلاَّ خَيْرُكَ، وَلاَ إِلَهَ غَيْرُكَ "

"Ilaahow baas majiro waxaad baasayso mooyee, khayrna majiro khayrkaaga mooyee, Ilaah xaq lagu caabudana majiro adiga mooyee"

## 95) Ducada fuulida gaadiidka.

بِسْمِ اللَّهِ، وَالْحَمْدُ للَّهِ ﴿سُبْحَانَ الَّذِي سَخَّرَ لَنَا هَذَا وَمَا كُنَّا لَهُ مُقْرِنِينَ، وَإِنَّا إِلَى رَبِّنَا لَمُنقَلِبُونَ﴾، "الْحَمْدُ لِلَّهِ، الْحَمْدُ لِلَّهِ، الْحَمْدُ لِلَّهِ، اللَّهُ أَكْبَرُ،

اللَّهُ أَكْبَرُ، اللَّهُ أَكْبَرُ، سُبْحَانَكَ اللَّـهُمَّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي فَاغْفِرْ لِي؛ فَإِنَّهُ لاَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ إِلاَّ أَنْتَ "

Magaca Allah ayaan ku bilaabay, Ilaahbaa mahadda iska leh [Xumaan waxa ka nasahan ka noo sakhiray tan manaanan xamili karneen (hadii aanad noo fudaydin). Anaguna xaga rabbigayo ayaan u noqonaynaa] " Ilaahbaa mahadda iska leh, Ilaahbaa mahadda iska leh, Ilaahbaa mahadda iska leh, Ilaahbaa wayn, Ilaahbaa wayn, Ilaahbaa wayn, xumaan waad ka dheertahay Ilaahayow waxaan dulmiyey naftayda ee ii danbi dhaaf, maxaa yeelay majiro cid danbiyada dhaafta adiga mooyee"

## 96) Ducada Safarka.

**207-** " للَّهُ أَكْبَرُ، اللَّهُ أَكْبَرُ، اللَّهُ أَكْبَرُ، ﴿سُبْحَانَ الَّذِي سَخَّرَ لَنَا هَذَا وَمَا كُنَّا لَهُ مُقْرِنِينَ * وَإِنَّا إِلَى رَبِّنَا لَمُنقَلِبُونَ﴾ " اللَّهُمَّ إِنّا نَسْأَلُكَ فِي سَفَرِنَا هَذَا البِرَّ وَالتَّقْوَى، وَمِنَ الْعَمَلِ مَا تَرْضَى، اللَّهُمَّ هَوِّنْ عَلَيْنَا سَفَرَنَا هَذَا وَاطْوِ عَنَّا بُعْدَهُ، اللَّهُمَّ أَنْتَ الصَّاحِبُ فِي السَّفَرِ، وَالْخَلِيفَةُ فِي الْأَهْلِ، اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ وَعْثَاءِ السَّفَرِ، وَكَآبَةِ الْمَنْظَرِ، وَسُوءِ الْمُنْقَلَبِ فِي الْمَالِ وَالْأَهْلِ" وإذا رَجَعَ قَالَهُنَّ وَزَادَ فِيهِنَّ: "آيِبُونَ، تائِبُونَ، عَابِدُونَ، لِرَبِّنَا حَامِدُونَ"

“Ilaahbaa wayn, Ilaahbaa wayn, Ilaahbaa wayn, [Xumaan waxa ka nasahan ka noo sakhiray tan manaanan xamili karneen (hadii aanad noo fudaydin). Annaguna xaga rabbigayo ayaan u noqonaynaa] “Ilaahow waxaan ku waydiisanayaa safarkan samo falka iyo Alle ka cabsiga, camaladana wixii aad raali ka tahay, Ilaahow noo fudaydi safarkeena oo kan ah, noona soo gaabi fogaanshihiisa, Ilaahow adigaa ah saaxiibka safarka, ehelkana u hadhaya, Ilaahow waxaan kaa magan galayaa daalka safarka, muuqaalka xun, iyo isbadalka xun ee hantida iyo ehelkaba” markuu laabtana wuu dhahayaa, wuxuuna ku kordhinayaa: “Soo noqonay, annagoo toobad keenay, cibaadaysanayna, rabbigayagana u mahad celinayna”

## 97) Ducada marka la galayo magaalada iyo baladka.

**208- " اللَّهُمَّ رَبَّ السَّمَوَاتِ السَّبْعِ وَمَا أَظْلَلْنَ، وَرَبَّ الأَرَضِينَ السَّبْعِ وَمَا أَقْلَلْنَ، وَرَبَّ الشَّياطِينِ وَمَا أَضْلَلْنَ، وَرَبَّ الرِّيَاحِ وَمَا ذَرَيْنَ، أَسْأَلُكَ خَيْرَ هَذِهِ الْقَرْيَةِ، وَخَيْرَ أَهْلِهَا، وَخَيْرَ مَا فِيهَا، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا، وَشَرِّ أَهْلِهَا، وَشَرِّ مَا فِيهَا "**

“Ilaahow rabbiga samooyinka todobada ah iyo waxay hadhiyaanow, rabbiga todobada dhul iyo waxay sidaanow, rabbiga shayaadiinta iyo waxay lumiyaanow, rabbiga dabaylaha iyo waxay kiciyaanow, waxaan ku waydiistay khayrka magaaladan, khayrka ehelkeeda, khayrka ku dhex jira, waxaan kaa magan galay sharkeeda iyo sharka ehelkeeda iyo sharka ku dhex jiraba”

## 98) Ducada marka la galayo suuqa.

**209- لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ، وَلَهُ الْحَمْدُ، يُحْيِي وَيُمِيتُ، وَهُوَ حَيٌّ لاِ يَمُوتُ، بِيَدِهِ الْخَيْرُ، وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ "**

“Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana laha shuraako, isaga ayay u sugnaatay mulkiga iyo mahadduba, wuu nooleeyaa, waanu dilaa, isaguna waa noolyahay mana dhimanayo, gacantiisa ayaa khayrku ku jiraa, isaguna wax walba wuu awoodaa”

## 99) Ducada markuu kufo ama turunturoodo gaadiidku.

**210- "بسم الله "**

“Magaca Allah ayaan ku bilaabay”

## 100) Ducada qofka musaafirka ah ugu duceeyo qofka magaaladiisa jooga.

**211-" أَسْتَوْدِعُكُمُ اللَّهَ الَّذِي لاَ تَضِيعُ وَدَائِعُهُ "**

"Waxaan idinka kaga tagayaa Ilaahay oo aan dayicin wixii lagaga tago"

## 101) Ducada qofka gurigiisa jooga ugu duceeyo musaafirka.

**212- " أَسْتَوْدِعُ اللَّهَ دِينَكَ، وَأَمَانَتَكَ، وَخَوَاتِيمَ عَمَلِكَ "**

"Waxaan Ilaahay kuu waydiinayaa inuu ilaaliyo diintaada, amaanadaada, iyo khaatumada camalkaaga"

**213- " زَوَّدَكَ اللَّهُ التَّقْوَى، وَغَفَرَ ذَنْبَكَ، وَيَسَّرَ لَكَ الخَيْرَ حَيْثُ ما كُنْتَ "**

"Ilaahay hakuu siyaadiyo Alle ka cabsi, danbigaagana ha dhaafo, khayrkana hakuu fudaydiyo meel kasta ood tagto"

## 102) Takbiirta iyo tasbiixda inta lagu gudo jiro safarka.

214- قَالَ جَابِرٌ رضي الله عنه: "كُنَّا إِذَا صَعَدْنَا كَبَّرْنَا، وَإِذَا نَزَلْنَا سَبَّحْنَا "

Wuxuu yiri Jaabir, Ilaahay haka raali ahaadee: “Markaanu taago fuulno waan takbiiran jirnay, markaan soo hoobanana waan tasbiixsan jirnay”

## 103) Ducada musaafirku xilliga suxuurta.

215- " سَمَّعَ سَامِعٌ بِحَمْدِ اللَّهِ، وَحُسْنِ بَلاَئِهِ عَلَيْنَا، رَبَّنَا صاحِبْنَا، وَأَفْضِلْ عَلَيْنَا، عَائِذاً بِاللَّهِ مِنَ النَّارِ "

“Ku markhaati ah ayaa markhaati ah mahadnaqa Ilaahay iyo balaayada (wanaagsan) ee korkayaga uu yeelay, rabbiyow lajirkayaga ahow, deeqdaadana korkayaga yeel, kaana magan galnay naarta.”

## 104) Ducada markuu ku dago guri markuu safrayo ama hawl kale u socdo.

216- " أَعُوذُ بِكَلِمَاتِ اللَّهِ التَّامَّاتِ مِنْ شَرِّ مَا خَلَقَ "

“Waxaan kaga magan galayaa ereyada Ilaahay ee dhamayska tiran sharka wixii uu abuuray”

### 105) Ducada markuu safarka kasoo laabto.

**217- يُكَبِّرُ عَلَى كُلِّ شَرَفٍ ثَلَاثَ تَكْبِيرَاتٍ ثُمَّ يَقُولُ: لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ، وَلَهُ الْحَمْدُ، وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ، آيِبُونَ، تَائِبُونَ، عَابِدُونَ، لِرَبِّنَا حَامِدُونَ، صَدَقَ اللَّهُ وَعْدَهُ، وَنَصَرَ عَبْدَهُ، وَهَزَمَ الْأَحْزَابَ وَحْدَهُ "**

“Wuu takbiiranayaa taago kasta sadex jeer, kadibna wuxuu dhahayaa: “Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana laha shuraako, isaga ayaa iska leh mulkiga iyo mahaddaba, isaguna wax walba wuu karaa, soo laabanay, toobad keenay, cibaadaysanay, rabbigeena u mahad celinay, Ilaahay wuu rumeeyey ballantiisii, adoonkiisiina wuu u gargaaray, xulufadiina kalidii ayaa jabiyey”

## 106) Muxuu dhahayaa ama samaynayaa qofka la kulma wax farxad galiya ama uu karaahiyeysto.

**كَانَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم إِذَا أَتَاهُ الْأَمْرُ يَسُرُّهُ قَالَ: "الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي بِنِعْمَتِهِ تَتِمُّ الصَّالِحَاتُ" وَإِذَا أَتَاهُ الْأَمْرُ يَكْرَهُهُ قَالَ: "الْحَمْدُ لِلَّهِ عَلَى كُلِّ حَالٍ"**

Nabiga (ﷺ) hadii ay u timaado arrin farxad galisaa wuxuu dhihi jiray: “Ilaahbaa mahadda iska leh kaasoo nicmadiisa darteed ay ku dhamaystirmaan wanaagyaashu” hadii arrin uu necebyahay u yimaadana wuxuu dhihi jiray: “Ilaahbaa mahadda iska leh xaalad kastaba”

## 107) Fadliga in lagu salliyo nabiga (ﷺ)

**219- قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم: "مَنْ صَلَّى عَلَيَّ صَلاَةً صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ بِهَا عَشْراً"**

Nabigu (ﷺ) wuxuu yiri: “qofkii igu salliya salli (naxariis Ilaahay ii waydiiya), Ilaahay ayaa ku sallinaya toban jeer (u naxariisanaya)”

**220- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "لاَ تَجْعَلُوا قَبْرِي عِيداً وَصَلُّوا عَلَيَّ؛ فَإِنَّ صَلاَتَكُم تَبْلُغُنِي حَيْثُ كُنْتُمْ "**

Wuxuu yiri nabigu (ﷺ) "haka yeelina qabrigayga ciid iguna salliya, maxaa yeelay salligiinu wuu isoo gaadhayaa meel aad joogtaanba"

**221- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "الْبَخِيلُ مَنْ ذُكِرْتُ عِنْدَهُ فَلَمْ يُصَلِّ عَلَيَّ "**

Wuxuu yiri nabigu (ﷺ) "Bakhiilku waa ka la igu xuso agtiisa ee aan igu salliyin"

**222- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم:"إِنَّ لِلَّهِ مَلاَئِكَةً سَيَّاحِينَ فِي الْأَرْضِ يُبَلِّغُونِي مِنْ أُمَّتِي السَّلاَمَ"**

Wuxuu yiri nabigu (ﷺ) "Ilaahay wuxuu leeyahay malaa'ik soconaysa dhulka igasoo gaadhsiinaya ummadayda salaanta"

**223- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم:"مَا مِنْ أَحَدٍ يُسَلِّمُ عَلَيَّ إِلاَّ رَدَّ اللَّهُ عَلَيَّ رُوحِيَ حَتَّى أَرُدَّ عَلَيْهِ السَّلاَمَ"**

Wuxuu yiri nabigu (ﷺ) "majiro qof isoo salaama (haduu jiraba) Ilaahay ayaa iisoo celiya ruuxdayda illamaa aan ka qaadayo salaanta"

## 108) In la faafiyo salaanta.

**224- قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صلى الله عليه وسلم: "لاَ تَدْخُلُوا الْجَنَّةَ حَتَّى تُؤْمِنُوا، وَلاَ تُؤْمِنُوا حَتَّى تَحَابُّوا، أَوَلاَ أَدُلُّكُم عَلَى شَيْءٍ إِذَا فَعَلْتُمُوهُ تَحَابَبْتُم، أَفْشُوا السَّلاَمَ بَيْنَكُمْ"**

Wuxuu yiri rasuulkii Ilaahay (ﷺ) "Ma galaysaan jannada ilaa iimaan la idinka helo, mana rumaynaysaan ilaa aad is jeclaataan, ma idin tusaa arrin hadii aad la timaadaan aad is jeclaanaysaan, faafiya salaanta dhexdiina"

**225- ثَلاَثٌ مَنْ جَمَعَهُنَّ فَقَدْ جَمَعَ الْإِيمَانَ: الْإِنْصَافُ مِنْ نَفْسِكَ، وَبَذْلُ السَّلاَمِ لِلْعَالَمِ، وَالْإِنْفَاقُ مِنَ الإِقْتَارِ"**

Sadex qofkii kulansada wuxuu kulmisday iimaanka: naftaada ood u cadaalad samayso, nabadgalyo ood ku fidiso caalamka iyo inaad wax bixiso xilliga faqriga"

**226- وَعَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عُمَرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا: أَنَّ رَجُلاً سَأَلَ النَّبِيَّ صلى الله عليه وسلم أَيُّ الْإِسْلاَمِ خَيْرٌ قَالَ: "تُطْعِمُ الطَّعَامَ، وَتَقْرأُ السَّلاَمَ عَلَى مَنْ عَرَفْتَ وَمَنْ لَمْ تَعْرِفْ"**

Cabdilaahi binu Cumar Ilaahay haka raali ahaado isaga iyo aabihiibee waxa laga wariyey: in nin waydiiyey nabiga (ﷺ) islaamka maxaa ugu

khayr badan, wuxuuna yiri: “Cuntada ood quudiso (dadka), iyo inaad salaanto qof aad garanaysid iyo mid aanad aqooba”

## 109) Qaabka looga qaado salaanta qofka gaalka ah markuu ku salaamo.

**227- " إِذَا سَلَّمَ عَلَيْكُمْ أَهْلُ الْكِتَابِ فَقُولُوا: وَعَلَيْكُمْ "**

Haduu idin salaama ehelu kitaabku waxaad dhahdaan: sidoo kale.

## 110) Ducada marka diiqa iyo dameerku ay ciyaan.

**228- " إِذَا سَمِعْتُمْ صِيَاحَ الدِّيَكَةِ فَاسْأَلُوا اللَّهَ مِنْ فَضْلِهِ؛ فَإِنَّهَا رَأَتْ مَلَكاً وَإِذَا سَمِعْتُمْ نَهِيقَ الْحِمَارِ فَتَعَوَّذُوا بِاللَّهِ مِنَ الشَّيطَانِ؛ فَإِنَّهُ رَأَى شَيْطَاناً "**

“Hadaad maqashaan diiqa oo ciyaya (qaylinaya) waydiista Ilaahay deeqdiisa maxaayeelay wuxuu arkay malag. Hadaad maqashaan cida dameerkana ka magangala Ilaahay shaydaanka, maxaayeelay wuxuu arkay shaydaan”

## 111) Ducada cida eyda habeenkii.

**229- " إِذَا سَمِعْتُمْ نُبَاحَ الْكِلاَبِ وَنَـهِيقَ الْحَمِيرِ بِاللَّيْلِ فَتَعَوَّذُوا بِاللَّهِ مِنْـهُنَّ؛ فَإِنَّـهُنَّ يَرَيْنَ مَا لاَ تَرَوْنَ "**

"Hadaad maqashaan eyda oo ciyaysa iyo dameerada oo ciyaya habeenkii, Ilaahay waydiista magan galyo maxaayeelay waxay arkaan wax aydaan arkayn"

## 112) Ducada qofka aad caydo.

**230- قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم: "اللَّهُمَّ فَأَيُّمَا مُؤْمِنٍ سَبَبْتُهُ فَاجْعَلْ ذَلِكَ لَهُ قُرْبَةً إِلَيْكَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ "**

Nabigu (ﷺ) wuxuu yiri: "Ilaahow qofkii aan caayo uga yeel dhowaansho xagaaga ah maalinta qayaame"

## 113) Muxuu dhahayaa muslinku markuu amaano muslimka?

**231- قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم: "إِذَا كَانَ أَحَدُكُم مَادِحاً صَاحِبَهُ لاَ مَحَالَةَ فَلْيَقُلْ: أَحْسِبُ فُلاَناً وَاللَّهُ حَسِيبُهُ، وَلاَ أُزَكِّي عَلَى اللَّهِ أَحَداً، أَحْسِبُهُ – إِنْ كَانَ يَعْلَمُ ذَاكَ – كَذَا وَكَذَا "**

Nabigu (ﷺ) wuxuu yiri: "hadii midkiin amaanayo saaxiibkiis oo ay lagaa maarmaan tahay ha dhaho: "sidaas ayaan hebal u malaynayaa,

Ilaahbaana xisaabinaya, Ilaahayna uma taskiyeynayo (nadiifinayo) cidna, waxaan u malaynayaa- haduu ogyahay arrintaa- sidaas iyo sidaas.

## 114) Muxuu dhahayaa muslinku marka la amaano?

**232-"اللَّهُمَّ لاَ تُؤَاخِذْنِي بِمَا يَقُولُونَ، وَاغْفِرْ لِي مَا لاَ يَعْلَمُونَ، [وَاجْعَلْنِي خَيْراً مِمَّا يَظُنُّونَ]"**

“Ilaahow ha ii qabanin waxay leeyihiin, iina danbi dhaaf waxayna ogayn, igana yeel khayr waxay ii malaynayaan”

## 115) Side ayaa muxrimku u talbiyeysanayaa xajka iyo cumarada?

**233- " لَبَّيْكَ اللَّهُمَّ لَبَّيْكَ، لَبَّيْكَ لاَ شَرِيكَ لَكَ لَبَّيْكَ، إِنَّ الْحَمْدَ، وَالنِّعْمَةَ، لَكَ وَالْمُلْكَ، لاَ شَرِيكَ لَكَ "**

“Ilaahow waan ku ajiibay ajiibid, waan ku ajiibay mana lihid cid kula shuraako ah, mahadda iyo nicmaduna waxay u sugnaatay adiga, mulkigana adigaa iska leh, shuraakana ma lihid”

## 116) In la takbiirto marka uu gaadho rukunka madaw.

**234- " طَافَ النَّبيُّ صلى الله عليه وسلم بِالْبَيْتِ عَلَى بَعِيرٍ كُلَّمَا أَتَى الرُّكْنَ أَشَارَ إِلَيْهِ بِشَيْءٍ عِنْدَهُ وَكَبَّرَ "**

"Wuu ku dawaafay nabigu (ﷺ) masaajidka isagoo saaran awr, markasta oo uu gaadho rukunkana waxbuu ku tilmaamayey, waanu takbiiranayey"

## 117) Ducada la akhrinayo inta u dhaxaysa rukunka midigeed iyo dhagaxa madow.

**235-{ رَبَّنَا آتِنَا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِي الآخِرَةِ حَسَنَةً وَقِنَا عَذَابَ النَّارِ}**

"Rabbiyow na sii aduunyada wanaag aakhirana wanaag nagana badbaadi cadaabka naareed"

## 118) Ducada marka la taaganyahay Safa iyo Marwa.

**236- لَمَّا دَنَا النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم مِنَ الصَّفَا قَرَأَ: ﴿إِنَّ الصَّفَا وَالْمَرْوَةَ مِنْ شَعَآئِرِ اللَّهِ﴾ أَبْدَأُ بِمَا بَدَأَ اللَّهُ بِهِ" فَبَدَأَ بِالصَّفَا فَرَقِيَ عَلَيْهِ حَتَّى رَأَى الْبَيْتَ، فَاسْتَقْبَلَ الْقِبْلَةَ، فَوَحَّدَ اللَّهَ وَكبَّرَهُ وَقَالَ: "لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ،**

**لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ، أَنْجَزَ وَعْدَهُ، وَنَصَرَ عَبْدَهُ، وَهَزَمَ الْأَحْزَابَ وَحْدَهُ، ثُمَّ دَعَا بَيْنَ ذلكَ. قَالَ مِثْلَ هَذَا ثَلاَثَ مَرَّاتٍ" الْحَدِيثُ. وَفِيهِ: "فَفَعَلَ عَلَى الْمَرْوَةِ كَمَا فَعَلَ عَلَى الصَّفَا"**

Markuu u dhowaaday nabigu (ﷺ) buurta Safa, wuxuu akhriyey: “Safa iyo Marwo waa calaamadaha Ilaahay” waxaan ku bilaabayaa ta Ilaahay ku bilaabay. Wuxuu ku bilaabay Safa, waanu fuulay ilaa uu arkay masaajidka kadibna qiblada ayuu u jeestay, wuxuuna kali yeelay Ilaahay waanu takbiirtay, wuxuuna yiri: “Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, shuraakana malaha, waxa u sugan mulkiga iyo mahadda wax walbana wuu awoodaa, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, ballantiisiina wuu oofiyey, adoonkiisiina wuu ugargaaray, waanu jabiyey xulufadii kalidii, kadibna wuu duceeyey inta u dhaxaysa, wuxuuna dhahay mid lamida sadex jeer” xadiiska sida ku qoran, waxa ku jirtay: “Marwana sidii Safa oo kale ayuu yeelay (wixii uu buurta Safa ku ducaystay ayuu Marwana ku ducaystay”

## 119) Ducada maalinta Carafo.

**237- قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم: "خَيْرُ الدُّعَاءِ دُعَاءُ يَوْمِ عَرَفَةَ، وَخَيْرُ مَا قُلْتُ أَنَا وَالنَّبِيُّونَ مِنْ قَبْلِي: لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ "**

Nabigu (ﷺ) wuxuu yiri: "duco waxa ugu khayr badan ducada maalinta Carafo, waxa ugu khayr badan waxaan aniga iyo nabiyadu iga horreeyey ku ducaysteena waa: "Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, shuraakana malaha, waxa u sugan mulkiga iyo mahadda wax walbana wuu awoodaa"

## 120) Ducada Mashcaru Al-xaraam agteeda (Waa Muzdalifa)

**238- رَكِبَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم الْقَصْوَاءَ حَتَّى أَتَى الْمَشْعَرَ الْحَرَامَ فَاسْتَقْبَلَ الْقِبْلَةَ "فَدَعَاهُ، وَكَبَّرَهُ، وَهَلَّلَهُ، وَوَحَّدَهُ" فَلَمْ يَزَلْ وَاقِفاً حَتَّى أَسْفَرَ جِدَّاً فَدَفَعَ قَبْلَ أَنْ تَطْلُعَ الشَّمسُ. "**

Nabigu wuxuu fuulay hasha Qaswaa illamaa uu yimid Mashcaru Al-xaraam, markaasuu u jeestay xaga qiblada "waanu duceeyey, waanu takbiirtay, tahliishay (laa ilaaha ilaa Allah), Ilaahayna wuu kali yeelay" manuu ka suulin inuu taagnaado ilaa

waagu casaaday (guduutay) kahor intaan qorraxdu soo bixin"

### 121) In la takbiirto marka dhagaxa la tuurayo (qururux kasta).

**239- " يُكَبِّرُ كُلَّمَا رَمَى بِحَصَاةٍ عِنْدَ الْجِمَارِ الثَّلاَثِ، ثُمَّ يَتَقَدَّمُ، ويَقِفُ يَدْعُو مُسْتَقْبِلَ الْقِبلَةِ، رَافِعاً يَدَيْهِ بَعْدَ الْجَمْرَةِ الأُولَى وَالثَّانِيَةِ. أَمَّا جَمْرَةُ الْعَقَبَةِ فَيَرْمِيهَا وَيُكَبِّرُ عِنْدَ كُلِّ حَصَاةٍ وَيَنْصَرِفُ وَلاَ يَقِفُ عِنْدَهَا "**

"Wuu takbiiranayaa markasta oo uu tuurayo qururux sadexda dhagax tuur agtooda, kadibna hore ayuu u socnayaa waanu istaagayaa isagoo ducaysanaya oo qiblada u jeesanaya gacmahana sare u qaadaya kadib dhagaxtuurka koowaad iyo ka labaad. Balse dhagaxtuurka Caqabah (ta wayn) wuu tuurayaa isagoo takbiiranaya qururux kasta (oo uu tuurayo) waanu dhaqaaqayaa, mana istaagayo agteeda."

### 122) Muxuu dhahayaa markuu yaabo ama arrin farxad leh uu arko?

**240- " سُبْحَانَ اللَّهِ! "**

“Xumaan Ilaahbaa ka nasahan”

**241- " اللَّهُ أَكْبَرُ! "**

“Ilaahbaa Wayn”

## 123) Muxuu samaynayaa qofka loo sheego arrin farxad leh?

**242- " كَانَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم إِذَا أَتَاهُ أَمْرٌ يَسُرُّهُ أَوْ يُسَرُّ بِهِ خَرَّ سَاجِداً شُكْراً لِلَّهِ تَبَارَكَ وَتَعَالَى "**

“Nabigu (ﷺ) markay u timaado arrin uu ku farxo ama lagu farxayo, wuu sujuudi jiray, isagoo u mahad celinaya Ilaaha barakada badan ee korreeya”

## 124) Muxuu dhahayaa qofka xanuun ka dareemay jidhkiisa?

**243- " ضَعْ يَدَكَ عَلَى الَّذِي تَأَلَّمَ مِنْ جَسَدِكَ وَقُلْ: بِسْمِ اللَّهِ، ثَلاَثاً، وَقُلْ سَبْعَ مَرَّاتٍ: أَعُوذُ بِاللَّهِ وَقُدْرَتِهِ مِنْ شَرِّ مَا أَجِدُ وَأُحَاذِرُ "**

“Saar gacantaada meesha jidhkaaga ku xanuunaysa, waxaadna tidhaahdaa: magaca Allah ayaan ku bilaabay, sadex jeer. Todoba jeerna waxaad dhahdaa: Ilaahay waxaan ka magan galay iyo awoodiisa ku magan galay sharka waxaan helay ee ana ka digtoonahay”

## 125) Ducada qofka ka cabsada in il ku dhacdo ama in la cawryo.

**244- " إِذَا رَأَى أَحَدُكُم مِنْ أَخِيهِ، أَوْ مِنْ نَفْسِهِ، أَوْ مِنْ مَالِهِ مَا يُعْجِبُهُ [فَلْيَدْعُ لَهُ بِالْبَرَكَةِ] فَإِنَّ الْعَيْنَ حَقٌّ "**

“hadii midkiin uu walaalkii ku arko ama naftiisaba ama xoolihiisa wax uu la cajabo [ha ugu duceeyo barako] sababtoo ah ishu waa xaq”

## 126) Maxaa la dhahayaa markuu naxo (argagaxo)?

**245- " لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ! "**

“Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee”

## 127) Maxaa la dhahayaa markaa xoolaha la gawracayo ama biraynayo?

**" بِسْمِ اللَّهِ وَاللَّهُ أَكْبَرُ [اللَّهُمَّ مِنْكَ وَلَكَ] اللَّهُمَّ تَقَبَّلْ مِنِّي "**

“Magaca Allah ayaan ku bilaabay, Ilaahbaa wayn, [Ilaahow adiguu kaa yimid adiga dartaana waan u gawrici] Ilaahow naga aqbal”

## 128) Muxuu dhahayaa si uu dhagarta shaydaanka isaga fogeeyo?

**247- " أَعُوذُ بِكَلِمَاتِ اللَّهِ التَّامَّاتِ الَّتِي لاَ يُجَاوِزُهُنَّ بَرٌّ وَلاَ فَاجِرٌ: مِنْ شَرِّ مَا خَلَقَ، وَبَرَأَ وَذَرَأَ، وَمِنْ شَرِّ مَا يَنْزِلُ مِنَ السَّمَاءِ، وَمِنْ شَرِّ مَا يَعْرُجُ فِيهَا، وَمِنْ شَرِّ مَا ذَرَأَ فِي الْأَرْضِ، وَمِنْ شَرِّ مَا يَخْرُجُ مِنْهَا، وَمِنْ شَرِّ فِتَنِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ، وَمِنْ شَرِّ كُلِّ طَارِقٍ إِلاَّ طَارِقاً يَطْرُقُ بِخَيْرٍ يَا رَحْمَنُ "**

“Ilaahay waxaan kaga magan galayaa erayadiisa dhamayska tiran ee aanay dhaafi karin qof fiican iyo ku xunba: sharka makhluuqaadkiisa iyo sharka wuxuu abuuray ee uu bar bilaabay, iyo sharka kasoo daga xaga samada, iyo sharka fuula xageeda, iyo sharka waxa lagu abuuray dhulka, iyo sharka kasoo baxa dhulka, iyo sharka fitnooyinka habeenka iyo maalinta, iyo sharka soo garaacma habeenka marka laga reebo mid khayr u soo garaacma, Ilaaha naxariistow”

## 129) Toobad keenka iyo danbi dhaaf warsiga.

**248- قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صلى الله عليه وسلم: "وَاللَّهِ إِنِّي لأَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ فِي الْيَوْمِ أَكْثَرَ مِنْ سَبْعِينَ مَرَّةً "**

Rasuulkii Ilaahay (ﷺ) wuxuu yiri: "Ilaahbaan ku dhaartee, waxaan Ilaahay danbi dhaaf waydiistaa oo aan u toobad keenaa maalintii wax ka badan todobaatan jeer"

**249- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "يَا أَيُّهَا النَّاسُ تُوبُوا إِلَى اللَّهِ فَإِنِّي أَتُوبُ فِي الْيَوْمِ إِلَيْهِ مِائَةَ مَرَّةٍ"**

Wuxuu yiri (ﷺ): "Dadow u toobad keena Ilaahay, anigu waxaan u toobad keena maalintii boqol jeer"

**250- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "مَنْ قَالَ أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ الْعَظِيمَ الَّذِي لاَ إِلَهَ إِلاَّ هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ وَأَتُوبُ إِلَيهِ، غَفَرَ اللَّهُ لَهُ وَإِنْ كَانَ فَرَّ مِنَ الزَّحْفِ"**

Wuxuu yiri (ﷺ): "Qofkii dhaha: waxaan danbi dhaaf waydiistay Ilaaha wayn ee Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin isaga mooyee, kaasoo nool oo maamula uunkiisa, waanan u toobad keenayaa, Ilaahay waa u danbi dhaafaa xataa haduu ka cararay dagaal"

251- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "أَقْرَبُ مَا يَكُونُ الرَّبُّ مِنَ الْعَبْدِ فِي جَوْفِ اللَّيْلِ الآخِرِ فَإِنِ اسْتَطَعْتَ أَنْ تَكُونَ مِمَّنْ يَذْكُرُ اللَّهَ فِي تِلْكَ السَّاعَةِ فَكُنْ"

Wuxuu yiri (ﷺ): "Rabbi markuu ugu dhowyahay adoonkiisa waa habeenka qeybtiisa sadexaad, hadaad awoodo inaad kamid noqoto kuwa xusaya Ilaahay saacadaas, kamid ahow"

252- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "أَقْرَبُ مَا يَكُونُ الْعَبْدُ مِنْ رَبِّهِ وَهُوَ سَاجِدٌ فَأَكْثِرُوا الدُّعَاءَ "

Wuxuu yiri (ﷺ): "Adoonku wuxuu ugu dhowyahay rabbigii markuu sujuudsanyahay ee badiya ducada"

253- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "إِنَّهُ لَيُغَانُ عَلَى قَلْبِي وَإِنِّي لأَسْتَغْفِرُ اللَّهَ فِي الْيَوْمِ مِائَةَ مَرَّةٍ "

Wuxuu yiri (ﷺ): "qalbigayga waxa daboola (hamiga umadiisa) aniguna danbi dhaaf ayaan waydiistaa Ilaahay maalintii boqol jeer"

## 130) Fadliga tasbiixda, taxmiida, tahliisha iyo takbiirta.

254-" قَالَ صلى الله عليه وسلم مَنْ قَالَ: سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ فِي يَوْمٍ مِائَةَ مَرَّةٍ حُطَّتْ خَطَايَاهُ وَلَوْ كَانَتْ مِثْلَ زَبَدِ الْبَحْر

Wuxuu yiri (ﷺ): “Qofkii dhaha: subxaana Allah wa bixamdihii ( xumaan waxa ka nasahan Ilaahay, mahaddana isaga iska leh) maalintii boqol jeer waxa laga tirtiraa danbiyadiisa xataa haday lamid yihiin daadxoorta (xunbada badda)”

**255- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "مَنْ قَالَ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، لَهُ الْمُلْكُ، وَلَهُ الْحَمْدُ، وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ عَشْرَ مِرَارٍ، كَانَ كَمَنْ أَعْتَقَ أَرْبَعَةَ أَنْفُسٍ مِنْ وَلَدِ إِسْمَاعِيلَ"**

Wuxuu yiri (ﷺ): “qofkii dhaha: “Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana laha shuraako, isagaa iska leh mulkiga iyo mahaddaba, wax walbana wuu awoodaa, toban jeer wuxuu lamid yahay sidii qof xoreeyey afar nafood oo kamida caruurta nabi Ismaaciil”

**256 وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "كَلِمَتَانِ خَفِيفَتَانِ عَلَى اللِّسَانِ، ثَقِيلَتَانِ فِي الْمِيزَانِ، حَبِيبَتَانِ إِلَى الرَّحْمَنِ: سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ، سُبْحانَ اللَّهِ الْعَظِي"**

Wuxuu yiri (ﷺ): “laba kalmadood oo u fudud carrabka, kuna culus miisaanka, Ilaaha naxariistaana jecelyahay waa: subxaana Allah wa bixamdihi (xumaan Ilaahbaa ka dheer, mahaddana iska leh) iyo subxaan Alla al-cadiim (xumaan waxa ka dheer rabbiga wayn).”

**257 وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "لأَنْ أَقُولَ سُبْحَانَ اللَّهِ، وَالْحَمْدُ لِلَّهِ، وَلاَ إِلَـهَ إِلاَّ اللَّهُ، وَاللَّهُ أَكْبَرُ، أَحَبُّ إِلَيَّ مِمَّا طَلَعَتْ عَلَيْهِ الشَّمسُ"**

Wuxuu yiri (ﷺ): "Inaan dhaho: xumaan Allah ayaa nasahan mahaddana Allah ayaa iska leh, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaahay mooyee, Ilaahbaa wayn, ayaan ka jecelahay wax kasta oo qorrax usoo baxdo"

**258- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "أَيَعْجِزُ أَحَدُكُم أَنْ يَكْسِبَ كُلَّ يَوْمٍ أَلْفَ حَسَنَةٍ" فَسَأَلَهُ سَائِلٌ مِنْ جُلَسَائِهِ كَيْفَ يَكْسِبُ أَحَدُنَا أَلْفَ حَسَنَةٍ؟ قَالَ: "يُسَبِّحُ مِائَةَ تَسْبِيحَةٍ، فَيُكتَبُ لَهُ أَلْفُ حَسَنَةٍ أَوْ يُحَطُّ عَنْهُ أَلْفُ خَطِيئَةٍ"**

Wuxuu yiri (ﷺ): "midkiin miyuu ka caajisayaa inuu shaqaysto maalintii kun xasano" qof ayaa waydiiyey kuwii la fadhiyey kamida, sidee ayaa midkaayo u shaqaysanayaa kun xasano? Wuxuu yiri: "Wuu tasbiixsanayaa boqol jeer, waxa loo qorayaa kun xasano ama kun danbi ayaa laga tirtirayaa"

**259- " مَنْ قَالَ: سُبْحَانَ اللَّهِ الْعَظِيمِ وَبِحَمْدِهِ غُرِسَتْ لَهُ نَخْلَةٌ فِي الْجَنَّةِ"**

"Qofkii dhaha: xumaan waxa ka hufan Ilaaha wayn, mahaddana isaga iska leh, waxa timir looga beeraa jannada"

**260- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "يَا عَبْدَ اللَّهِ بْنَ قَيْسٍ أَلاَ أَدُلُّكَ عَلَى كَنْزٍ مِنْ كُنُوزِ الْجَنَّةِ"؟ فَقُلْتُ: بَلَى يَا رَسُولَ اللَّهِ، قَالَ: "قُلْ لاَ حَوْلَ وَلاَ قُوَّةَ إِلاَّ بِاللَّهِ"**

Wuxuu yiri (ﷺ): "Cabdilaahi binu Qaysow, maku tusaa khasnad kamida khasnada jannada?" waxaan dhahay: haa, rasuulkii Ilaahayow. Wuxuu yiri: "Waxaad dhahdaa: "Xeelad iyo awood majirto aan ka ahayn ta Ilaahay"

**261- وَقَالَ صلى الله عليه وسلم: "أَحَبُّ الْكَلاَمِ إِلَى اللَّهِ أَرْبَعٌ: سُبْحَانَ اللَّهِ، وَالْحَمْدُ لِلَّهِ، وَلاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ، وَاللَّهُ أَكْبَرُ، لاَ يَضُرُّكَ بِأَيِّهِنَّ بَدَأْتَ"**

Wuxuu yiri (ﷺ): "hadalka waxa Ilaahay ugu jecelyahay afar: "xumaan Ilaahbaa ka nasahan, mahadda Ilaahbaa iska leh, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Allah mooyee, Ilaahbaa wayn, kuma dhibayso kii aad ku bilowdo"

**262- جَاءَ أَعْرَابِيٌّ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ صلى الله عليه وسلم فَقَالَ: عَلِّمْنِي كَلاماً أَقُولُهُ: قَالَ: "قُلْ: لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ، اللَّهُ أَكْبَرُ كَبِيراً، وَالْحَمْدُ لِلَّهِ كَثِيراً، سُبْحَانَ اللَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ، لاَ حَوْلَ وَلاَ قُوَّةَ إِلاَّ بِاللَّهِ الْعَزِيزِ الْحَكِيمِ" قَالَ: فَهَؤُلاَءِ لِرَبِّي، فَمَا لِي؟ قَالَ: "قُلْ: اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي، وَارْحَمْنِي، وَاهْدِنِي، وَارْزُقْنِي"**

Nin reer baadiye ah ayaa u yimid rasuulkii Ilaahay (ﷺ), wuxuuna yiri: waxaad i bartaa hadal aan idhaahdo: wuxuu yiri: "Waxaad dhahdaa:

Ilaah xaq lagu caabudo majiro Ilaaha kalida ah mooyee, mana laha shuraako, Ilaahbaa wayn oo wayn, mahad badan Ilaahbaa iska leh, xumaana waxa ka hufan Ilaaha ah rabbiga caalamiinta, xeelad iyo awoodna majirto aan ka ahayn ta Ilaaha sharafta leh ee xikmada badan mooyee" wuxuu yiri: kuwaas rabbigaybaa iska leh, anigu maxaan helayaa? Waxaad dhahdaa: Ilaahow ii danbi dhaaf, iina naxariiso, ina hanuuni, ina arsaaq"

**263- كَانَ الرَّجُلُ إِذَا أَسْلَمَ عَلَّمَهُ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم الصَّلاَةَ ثُمَّ أَمَرَهُ أَنْ يَدْعُوَ بِهَؤُلاَءِ الْكَلِمَاتِ: "اللَّهُمَّ اغْفِرِ لِي، وَارْحَمْنِي، وَاهْدِنِي، وَعَافِنِي وَارْزُقْنِي"**

Ninku markuu islaamo waxa nabigu (ﷺ) bari jiray salaada, kadibna wuxuu fari jiray inuu ku ducaysto ereyadan: "Ilaahow ii danbi dhaaf, iina naxariiso, ina hanuuni, ina cafi, ina arsaaq"

**264- " إِنَّ أَفْضَلَ الدُّعَاءِ الْحَمْدُ لِلَّهِ، وَأَفْضَلَ الذِّكْرِ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ"**

"Ducada waxa ugu fadli badan: Ilaahbaa mahadda iska leh, dikrigana waxa ugu fadli badan: Ilaah xaq lagu caabudo majiro Allah mooyee"

**265- " الْبَاقِيَاتُ الصَّالِحَاتُ: سُبْحَانَ اللهِ وَالْحَمْدُ لله، وَلَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ، وَاللهُ أَكْبَر، وَ لَا حَوْلَ وَلَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللهِ "**

"Hadhaaga wanaagsan waa: xumaan Ilaahba ka nasahan, mahaddana Ilaahbaa iska leh, Ilaah xaq lagu caabudo majiro Allah mooyee, Ilaahbaa wayn, xeelad iyo awoodna majirto ta Ilaahay mooyee"

## 131) Sidee nabigu (ﷺ) u tasbiixsan jiray?

**266- عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو رضي الله عنه قَالَ: "رَأَيْتُ النَّبيَّ صلى الله عليه وسلم يَعْقِدُ التَّسْبِيحَ" وفي زيادةٍ: "بِيَمِينِهِ "**

Cabdilaahi binu Camru Ilaahay raali haka ahaadee wuxuu yiri: "waxaan arkay nabiga (ﷺ) oo tasbiixsanaya" riwaayo kalena waxay ku dartay "gacantiisa midig"

## 132) Noocyada khayrka iyo aadaabta guud.

**267- " قَالَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم "إِذَا كَانَ جُنْحُ اللَّيْلِ – أَوْ أَمْسَيْتُم – فَكُفُّوا صِبْيانَكُم، فَإِنَّ الشَّيَاطِينَ تَنْتَشِرُ حِينَئِذٍ، فَإِذَا ذَهَبَ سَاعَةٌ مِنَ اللَّيلِ فَخَلُّوهُمْ، وَأَغْلِقُوا الأَبْوَابَ وَاذْكُرُوا اسْمَ اللَّهِ؛ فَإِنَّ الشَّيطَانَ لاَ يَفْتَحُ بَاباً مُغْلَقاً، وَأَوْكُوا قِرَبَكُمْ، وَاذْكُرُوا اسْمَ اللَّهِ، وَخَمِّرُوا**

**آنِيَتَكُم، وَاذْكُرُوا اسْمَ اللَّهِ، وَلَوْ أَنْ تَعْرُضُوا عَلَيْهَا شَيْئاً، وَأَطْفِئُوا مَصَابِيحَكُمْ"**

Nabigu (ﷺ) wuxuu yiri: “markaad habeensataan ama galabaysataan xareeya caruurtiina (xilliga maqaariibta) maxaa yeelay shayaadiinta ayaa xilligaas soo faafta, marka saacad habeenka ah tagto sii daayaa, albaabadana xidha oo ku xusa magaca Ilaahay, maxaa yeelay shaydaanku ma furo albaab xidhan, daboola weelkiina (biyaha iyo raashinku ay  ku jiraan) kuna xusa magaca Ilaahay, daboola weelkiina, xusa magaca Ilaahay, xataa hadii waxun aad saartaan (sida maro yar iwm) , damiyana faynuuskiina (nalka ama korontada)”

وصلى الله وسلم وبارك على نبينا محمد وعلى آله وأصحابه أجمعين .

Naxariis iyo nabadgalyo iyo barako korkiisa ha yeelo Muxammad iyo ehelkiisa iyo saxaabadiisa dhamaantood.

Tusmo


*1) Ducada marka hurdada lagasoo kaco:______10*

*(2 Ducada xidhashada Dharka.______________15*

*(3 Ducada xidhashada dharka cusub. ________15*

*(4 Ducada qofkii gashta maro cusub. ________16*

*(5 Muxuu dhahayaa markuu bixinayo dharka?_16*

*(6 Ducada galida suuliga ama musqusha. _____17*

*(7 Ducada markuu kasoo baxayo suuliga. _____17*

*(8 Ducada waysada kahorreeya.____________17*

*(9 Ducooyinka marka waysada laga faaruqo. _17*

*(10 Ducooyinka marka guriga laga baxayo._____18*

*(11 Ducada marka guriga lasoo galayo. _______19*

*(12 Ducada marka lagu socdo masaajidka. _____19*

*(13 Ducada galida masaajidka. ______________20*

*(14 Ducada ka bixida masaajidka. ____________21*

*(15 Ducooyinka Aadaanka___________________21*

*(16 Ducooyinka Furfurashada (salaada). _______23*

*(17 Ducooyinka Rukuucda.__________________28*

*(18 Ducada rukuucda marka lagasoo kaco. _____29*

*(19 Ducooyinka Sujuuda.____________________30*

*(20 Ducada fadhiga labada sujuudood u dhaxeeya 32*

*(21 Ducada sujuuda Quraanka ______________ 32*

*(22 Atixiyaadka. __________________________ 33*

*(23 Salliga nabiga (ﷺ) ee ka danbeeya Atixiyaadka. ______________________________ 33*

*(24 Ducooyinka ka danbeeya Atixiyaadka, kahor intaan la salaamo naqsanin. _________________ 35*

*(25 Ducooyinka ka danbeeya Salaada _________ 40*

*(26 Ducada salaada istikhaarada (khayr dalbashada) 45*

*(27 Ducooyinka subaxa iyo galabta. __________ 47*

*(28 Ducooyinka Hurdada ___________________ 60*

*(29 Ducada habeenkii markuu baraarugo (is rogo). 67*

*(30 Ducada walwalka iyo cabsida hurdada. _____ 67*

*(31 Muxuu samaynayaa qofka riyo xun ku riyooda? 68*

*(32 Ducada qunuutka Witriga. _______________ 68*

*(33 Ducada marka laga salaamo naqsado Witriga. 70*

*(34 Ducada walbahaarka iyo murugada. _______ 71*

*(35 Ducada kurbashada (balaayooyinka). ______ 72*

*(36 Ducada la kulanka cadawga iyo ka awooda leh. 73*

*(37 Ducada qofka ka cabsada dulmiga madaxda. 74*

*(38 Habaarka Cadowga. ____________________75*

*(39 Muxuu dhahayaa qofka qoom ka cabsada? _75*

*(40 Ducada qofka ay asiibto waswaaska xaga iimaanka ah. 76*

*(41 Ducada bixinta daynta. _________________76*

*(42 Ducada qofka ku waswaasa salaada iyo quraanka. 77*

*(43 Ducada qofka arrin ku adkaato. __________77*

*(44 Muxuu dhahayaa ama samaynayaa qofka danbaabay? 78*

*(45 Ducada shaydaanka lagu eryo iyo waswaaskiisa. 78*

*(46 Ducada marka ay dhacdo wax aanu raali ka ahayn ama laga awood bato arrinkiisa. ________78*

*(47 Bogaadinta qofka ilmo loo dhalay iyo jawaabta uu bixinayo. 79*

*(48 Ducada caruurta lagaga ilaaliyo shaydaanka. 79*

*(49 Ducada loogu duceeyo qofka buka marka la booqdo. 80*

*(50 Fadliga in lasoo booqdo qofka xanuusanaya. 80*

*(51 Ducada bukaanka ka quustay nolosha. _____81*

*(52 Qofka dhimanaya oo loo laqimo. __________82*

*(53 Ducada qofka musiibo ku dhacdo __________83*

*(54 Ducada marka indhaha loo laabay maydka._83*

*(55 Ducada salaada janaasada loogu duceeyo maydka. 83*

*(56 Ducada ilmaha saqiira marka lagu tukanayo. 85*

*(57 Ducada Tacsida. _________________________87*

*(58 Ducada marka maydka xabaasha la galinayo. 87*

*(59 Ducada maydka marka la aaso kadib. ______87*

*(60 Ducada siyaarashada qabriga. ____________88*

*(61 Ducada dabaysha.________________________88*

*(62 Ducada onkodka. ________________________89*

*(63 Ducooyinka roobdoonta. _________________89*

*(64 Ducada markuu da'ayo roobku. ___________90*

*(65 Ducada di'ida roobka kadib.______________90*

*(66 Ducada roobku markuu bato ee looga cabsado fatahaado. 90*

*(67 Ducada marka dayaxu dhasho.____________90*

*(68 Ducada qofka sooman markuu afurayo. ____91*

*(69 Ducada kahor cuntada. ___________________91*

*(70 Ducada marka cuntada laga faaruqo. ______92*

*(71 Ducada martidu ugu ducayso cidii marti qaaday. 93*

*(72 Ducada qofka ku waraabiyey ama doonay inuu ku waraabiyo. ________________________________93*

*(73 Ducada markuu reer la afuro.______________93*

*(74 Ducada qofka sooman ku ducaysanayo marka cuntada la hor keeno ee aanu wali afurin. ______94*

*(75Muxuu dhahayaa qofka sooman hadii la caayo? 94*

*(76 Ducada markuu arko midhihii oo soo baxaya.94*

*(77 Ducada qofka hindhisay. __________________95*

*(78 Maxaa lagu dhahayaa qofka gaalka ah ee hindhisay una mahadceliyey Ilaahay? __________95*

*(79 Ducada qofka guursaday loogu duceeyo.____96*

*(80 Ducada qofka guursaday ama iibsaday gaadiid. 96*

*(81 Ducada kahor intaan loo tagin xaaska. _____97*

*(82 Ducada qofka cadhaysan. _________________97*

*(83 Ducada qofkii arka cid dhibaato ay ku habsatay. 97*

*(84 Maxaa la dhahayaa (ducaysanayaa) golaha la fadhiyo? 98*

*(85 Kafaaro gudka fadhiga. ________________98*

*(86 Ducada qofka kugu dhaha "Ilaahay hakuu danbi dhaafo" 99*

*(87 Ducada qofka wanaag kuu sameeya. ______99*

*(88 Waxa kaa ilaalinaya fitnada Dajaalka. _____99*

*(89 Ducada qofka dhaha: Ilaahay dartii ayaan kuu jeclahay. 100*

*(90 Ducada qofka kuu soo bandhiga xoolihiisa. 100*

*(91 Ducada qofka bixinaya daynta marka la gudayo. 100*

*(92 Ducada marka laga cabsado shirkiga. _____101*

*(93 Ducada qofka kugu dhaha: Ilaahay haku barakeeyo. 101*

*(94 Ducada in la naco baasaysiga. ___________101*

*(95 Ducada fuulida gaadiidka. _______________101*

*(96 Ducada Safarka. _________________________102*

*(97 Ducada marka la galayo magaalada iyo baladka. 103*

*(98 Ducada marka la galayo suuqa. __________104*

*(99 Ducada markuu kufo ama turunturoodo gaadiidku. 104*

*(100 ___ Ducada qofka musaafirka ah ugu duceeyo qofka magaaladiisa jooga. ___________________105*

(101 Ducada qofka gurigiisa jooga ugu duceeyo musaafirka. ______105

(102 Takbiirta iyo tasbiixda inta lagu gudo jiro safarka. _________106

(103 ________Ducada musaafirku xilliga suxuurta. 106

(104 Ducada markuu ku dago guri markuu safrayo ama hawl kale u socdo. ____________________106

(105 Ducada markuu safarka kasoo laabto. 107

(106 _Muxuu dhahayaa ama samaynayaa qofka la kulma wax farxad galiya ama uu karaahiyeysto. 108

(107 _________ Fadliga in lagu salliyo nabiga (ﷺ) 108

(108 ___________________ In la faafiyo salaanta. 110

(109Qaabka looga qaado salaanta qofka gaalka ah markuu ku salaamo.______________________111

(110 Ducada marka diiqa iyo dameerku ay ciyaan. 111

(111 ______________Ducada cida eyda habeenkii. 112

(112 _________________Ducada qofka aad caydo. 112

(113 Muxuu dhahayaa muslinku markuu amaano muslimka? 112

*(114 Muxuu dhahayaa muslinku marka la amaano? 113*

*(115 Side ayaa muxrimku u talbiyeysanayaa xajka iyo cumarada?______________________________ 113*

*(116 In la takbiirto marka uu gaadho rukunka madaw. ___________ 114*

*(117 Ducada la akhrinayo inta u dhaxaysa rukunka midigeed iyo dhagaxa madow. _______________ 114*

*(118 Ducada marka la taaganyahay Safa iyo Marwa. 114*

*(119 ___________________ Ducada maalinta Carafo. 116*

*(120 Ducada Mashcaru Al-xaraam agteeda (Waa Muzdalifa) 116*

*(121 In la takbiirto marka dhagaxa la tuurayo (qururux kasta). 117*

*(122 __ Muxuu dhahayaa markuu yaabo ama arrin farxad leh uu arko? _________________________ 117*

*(123 Muxuu samaynayaa qofka loo sheego arrin farxad leh? 118*

*(124 Muxuu dhahayaa qofka xanuun ka dareemay jidhkiisa? 118*

*(125 Ducada qofka ka cabsada in il ku dhacdo ama in la cawryo. 119*

*(126 Maxaa la dhahayaa markuu naxo (argagaxo)? 119*

*(127 _____ Maxaa la dhahayaa markaa xoolaha la gawracayo ama biraynayo? ________________ 119*

*(128 Muxuu dhahayaa si uu dhagarta shaydaanka isaga fogeeyo? ___________________________ 120*

*(129 Toobad keenka iyo danbi dhaaf warsiga. 121*

*(130 Fadliga tasbiixda, taxmiida, tahliisha iyo takbiirta. 122*

*(131 ________Sidee nabigu (ﷺ) u tasbiixsan jiray? 127*

*(132 Noocyada khayrka iyo aadaabta guud. 127*

*Tusmo___________________________________ 129*